**Xeer sharciyeedka 21 Febraayo 1959 L. 1 tix raac.**

**Qod. 1**

Lifaaqan qoraalka xeerka badda ee la meel mariyay, wuxuuna dhaqan gal noqonayaa 1da Abriil 1959.

**Qod. 2**

Hal tusaale ee qoraalka xeerka badda, waxaa saxiixay maamulkii gumeysiga ee Soomaaliya iyo Wasiirka Koobaad, Wasiirka Garsoorka iyo Wasiirka arimaha dhaqaalaha, waxaana loogu dhaqmi doonaa sidii nuqul asal ah, la dhigi doonaana laguna keydin doonaa Wasiirka Garsoorka.

**Qod. 3**

Xeerka Badda ee lagu faafiyay Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya, waxaa loo gudbin doonaa Gobollada, Gudoomiyaasha Degmooyinka, Wakiiladda Degmooyinka iyo dhamaan Dowladaha Hoose si loogu bandhigo muddo lix maalmood ah oo xiriir ah, min shan saac maalintii si cid kastaa fahamkeeda uga bogato.

**XEERKA BADDA**
Qodobada Hordhaca ah

**Qod. 1**
**Dhul badeedka**

Dhul badeedku wuxuu hoos yimaadaa madaxbanaanida Dalka, dhanka badda oo baaxadiisu ay gaarayso ilaa lix mayl baddeed ee ku dherersan xeeb qaaradeedka iyo jasiiradaha. Ballacaasna, waxaa laga cabir qaadtaa jiidda xeebta ku calaamdeysan hir hoosaadka badda.

Marka laga gudbo nidaamyada kale oo loogu talagalay in lagu xadeeyo saameyn sharciyo ama heshiisyo caalami ah.

**Qod. 2**
**Ku dhaqidda sharciga dalka iyo sharciga maraakibta qaranka**

Maraakiibta Soomaaliyeed ee badweynta ku jirta, ku sugan goob ama bed aan hoos tegin madaxbanaani dal kale, waxaa loo qaadanayaa in ay joogaan dhulka Soomaaliyeed.

Gudaha xadka dhul badeedka ku xusan qodobada hore, waxaa lagu dhaqayaa sharciga dalka dhammaan fal iyo dhacdo lagu sameeyay markab kasta dushi ee quseysa sharciga ciqaabta, Booliiska, caafimaadka iyo amniga guud.

Sharci qarameedka maraakiibta, waxaa lagu maamula mulkiyadda iyo wada lahaanshaha, xuquuqda damaanadaha si la mid ah habka faafintooda, masuuliyadda mulkiilaha markabka xilalka uu qaaday, awoodihiisa , waajibaadkiisa iyo kuwa saaraan taliyaha; heshiisyada shaqaaleynta, kireynta, nooliga iyo xamuul qaadka, ka qeyb qaadashada guuldarooyinka loo dhan yahay; xilalka ka dhasha isku dhaca maraakiibta meel ka baxsan biyaha dalka, lagana reebo xaaladda ay soo farageliso madaxda garsoorka dalku; xilalka ka dhasha gargaarka, badbaadin iyo ka kabashada.

**Qod. 3**
**Awodda garsooor**

Falalka ku saabsan isku dhac maraakiib ama caawinaad, badbaadin ama dib ugu helidda badweynta dhexdeeda, waa suuragal in looga dacwoodo garsoorayaasha dalka, haddii markabka sababay jugta ama la caawiyay ama la badbaadiyay, ama dadka iyo alaabta la badbaadiyay ama dib loo helay ay sugan yihiin dalka gudahiisa (174 -177).

**Qaybta 1aad**
Xuquuqda nidaamka maamulka badda.

**CINWAANKA 1AAD**
Xubnaha maamulka badaha

**Qod. 4**
**Wasaaradda awoodda u leh**

Maamulka baddu, wuxuu si toos ah u hoos imaanayaa Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

**Qod. 5**
**Qeybaha maamulka xeebaha**

Saameynta maamulka xeebaha badda ee dalka, waxay ka kooban tahay hal mid oo deegaankeedu yahay magaalo madaxda Xamar, xafiiskeedana lagu magacaabo dekedda Xamar.

Deegaanka xeeb badeedka, waxaa ka mid ah xafiiska badda ee Kismaayo oo xad dhuleedkiisu yahay Ras Kiyambooni ilaa Ceel Garas oo aan ku jirin; Marka xad dhuleedkeeduna yahay Ceel Garas ilaa Dhanaane oo ka mid ah; Boosaaso xad dhuleedkeedu yahay Eyl ilaa Bandar Ziada; Wakiillada xeebaha Baraawe, Cadale, Hobyo, Eyl , Bandar Beyle , Xaafuun, Baargaal, Caluula, Xaabo, Bandar Murxaanyo iyo Qandala.

Howlaha xafiiska badda ee isdhaafka xeebta ka bilaabata Dhanaane ilaa Ayl laga saaro, waxay ku wareegeysa si toos ah xafiiska dekedda Xamar.

**Qod. 6**
**Xafiisyada maamulka badda**

Waxay hoos yimaadan madaxa Dekedda Xamar oo iyadana hoos tagta Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Xafiisyada badda iyo xafiiska dhexe Nalalka iyo tusmooyinka digniin, waxay hoos yimaadan madaxa Dekadda Xamar. Wakiillada xeebaha iyo howlaha degmooyinka minaaradaha iyo baaqyada digniin badeedka, waxay hoos tagaan xafiisyada badda.

**Qod. 7**
**Shaqaalaha Maamulka Badda**

Shaqaalaha madaxa dekedda Xamar, xafiisyada iyo adeegyada la xiriira, sharciyan waa adeegyaasha badda.

**Qod. 8**
**Shaqada taliyaha dekadda ama ku xirashada**

Madaxa deegaanka, madaxa xafiiska badda iyo wakiillada xeebtu waa taliyeyaasha dekedda iyo dhaqdhaqaaqa deegaanka saldhiggooda.

Marka laga gudbo wax qabadka iyaga loogu idmaday xeerkaan iyo hab dhaqanka, taliyeyaasha dekedda ama dhaq dhaqaaqa, waxay ka qabtaan deegaanka hoos yamaada

dhammaan wax qabadka maamul ee la xiriira mushaaxa iyo isagagooshidda gaadiidka badda oo aan loo idman madax kale ee maamul.

Taliyeyaasha dekedda ama dhaq dhaqaaqa,waxay ku leeyihiin sidoo kale xirfad farsamo ee Ciidanka Boliiska dekedaha ama dhaq dhaqaaq goobaha madaxda ka yihiin daryeelka iyo amaanka dadka, si howshu u socoto rar iyo dejinta rakaabka dad iyo miisaan badeecaba, sida badanna u feejignaado adeega badda.

**Qod. 9**
**Taliyeyaasha dekedaha iyo dhaqdhaqaayadu**
**waxay beddeli karaan awoodda madaxda qunsuliyadda**

Taliyeyaasha dekedda ama marsaddu waxay qaban karaan howlaha madaxda qunsuliyadda, marka arrintu ku saabasan tahay saxiixa iyo shaabadeynta warqadda badmaaxda iyo taakuleynta maraakiibta ganacsi ee ajaanibta, marka dalka u joogin wakiil qunsuliyadeed, codsadana taliyaha markabku.

**Qod. 10**
**Feejignaanta xagga badmaaxidda iyo isagagooshidda dibadda.**

Feejignaanta xagga badmaaxidda iyo dhaqdhaqaaqa gaadiidka qaranka ee badda iyo caalamka, waxaa fuliya madaxda qunsuliyadaha (236, n.3).

**CINWAANKA 2AAD**
Hantida Dowladda ee Badda

**Qod. 11**
**Alaabta loo isticmaalo hanti dowladeedka badda**

Waxay qeyb ka yihiin hantida dowladda ee badda: xeebaha, dekedaha, qooriyada iyo wabiyadu halka ay badda uga darsamaan, harooyinka biyo cusbada oo xitaa mar mar dhif ah ku darsama badda.

Dhismooyinka iyo hawlaha kale ee ka tirsan maamulka ee ku dhex jira gudaha xadka hantida badeed ee dowladda dhul badeedka, waxaa loo qaadanayaa in ay ka mid yihiin hanti badeedka dowladda.

Maamulka badda ayaa nidaaminaya ku dhaqanka hanti badeedka dowladda iyo ilaalintoodaba.

**Qod. 12**
**Aagga hanti badeedka dowladda**

Xeeb bacaadeeddu waa qeyb ka mid ah xeebta ee ku fidsan ilaa inta ay soo gaarto, marka baddu kacsani tahay.

Xaddidaadda xeebta bacaadeed, waxaa sameeya xafiiska badaha iyagoo ku salaynaayoo baaritaan deegaanka iyo markhaatiyo waayeellada aqoonta gaar ah u leh deegaanka.

Xeebta iyo dhulka ku dhereran xeeb bacaadeedda, waxaa loogu talaggalay in bulshadu uga adeegato isticmaalka badda. Meeshii aysan ka caddeyn nidaamka qodobbada soo socda, xeebtu waxay gaartaa dhulka loogu tala galay in bulshadu uga adeegato isticmaalka xeeb bacadeedka iyo badda ilaa soohinta mulkiyadda xigta ee guud ama gaar.

**Qod. 13**
**Xadeynta aagga hanti badeedka dowladda**

Xadeynta meelaha qaarkood ee aagga hanti badeedka dowladda iyo hantida guud ama midda gaar, sida ku xusan farqada sadaxaad ee qodobka hore, waxaa samaynaya, sida badan, xafiiskaka madaxda goobta goorta ay la noqoto in ay ku haboon tahay, xitaa waa ku imaan kartaa codsi uga yimid mulkileyaasha soohinta la wadaaga iyo ciddii kale oo dan ku leh.

Xadeynta hor u dhaca, waxaa bixiyaWasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, waxaana fuliya Madaxa goobta.

Murankii ka dhasha xadeynta hor dhaca, waxaa lagu xalinayaa hab maamul Wasiirka arrimaha dhaqaalaha oo uu ku waafaqay Wasiirka maaliyadda. Dacwooyinka loo gudbiyo hay'adaha garsoorka ee ka dhasha xadeynta, difaaca hantida dowladda, waxaa u xilsaaraan si gaar ah Wasiirka arrimaha maaliyadda.

**Qod. 14**
**Cabbirka xadeynta**

Xadeynta hanti badeedka dowladda waxaa lagu yagleelaa cabbir Wasiirka arrimaha dhaqaalaha.

Qofkii maamulka hortiisa aan ku caddayn diidmo muddo boqoliyosideetan maalmood gudahood ee ka bilaabata maalinta ogeysiinta ama la shaaciyay cabbirka, suuragal uma noqoneyso weligii in beddelaad lagu sameeyo ama laga laabto xadeyntaas.

Maamulka ayaa awoodda u leh xaaladdaas oo kale in uu ku raaligeliyo sida ay la noqoto iyo magdhow u qalanta qiimaha saxa ah hantida iyo xuquuqdii laga filayay, loona qiimeeyay si fiiro gaar ah xaaladdoodii ka horeysay cabbirka xadeynta.

**Qod. 15**
**Ka saaridda aagga hanti badeedka dowladda iyo ugu talggalka aagga hanti badeedka dowladda in loo isticmaalo arrimo kale guud**

Ka saaridda hanti badeedka dowladda aag loo arkay in aan si guud badda looga isticmaali karin iyo jiheyn muddo gaabanba qeybo ka mid ah hanti badeedka dowladda iyo isticxmaalka guud ee kale, waxaa lagu sameeyaa cabbirka Wasiirka arrimaha dhaqaalaha oo uu ku waafaqo Wasiirka arrimaha maaliyadda.

**Qod. 16**
**Mamnnuucidda degid iyo cusbooneysiinta**
**hanti badeedka dowladda amaba dhul xeebeedka**

Hanti badeedka dowladda, qalabka nooc kasta iyo dhul xeebeedka waa ka mamnnuuc in la dego nooc kasta ha ahaadee iyo cusbooneysiin aan loo fasaxin.

Taliyaha dekedda ama dejinta ayaa laga filayaa in uu faro ciddii ku xad gudubta in uu ku soo celiyo sideedii hore oo loogu talagalay, haddii uusan fulin amarka, Wasiirka arrimaha dhaqaalaha ayaa oggooolaanaya, xafiiskana sameynayo, kharajkana waxaa laga qaadayaa daneeyaha, marka laga reebo mid uu ka dhashay fal ciqaabeed lidku ah qofka sameeyay.

## Qod. 17
## Ku dhaqanka hantida dowladda, wax ka soo saaridda iyo ka gurashada dhagxaanta iyo walxo kale

Maamul badeedku, isagoo eegaya sida waafaqasan baahida istcmaalka guud, wuu awoodaa in uu cid u oggolaalo degitaan iyo isticmaal, xitaa si gaar ah, hanti ka mid ah hanti badeedka dowladda iyo aagga dhul xeebeedka muddo cayiman.

Oggolaashaha ku dhaqanka hantida, kuwa muddadoodu ka badan tahay labo sano iyo kuwa muddadoodu ay ka yar tahay labo sano , balse leh dhismooyin saariddooda dhib lagala kulmayo, iyadoo la tixgelinayo shaygaas dantii loo siiyay, maamulku wuxuu qaadanaya waajibaad gaar ah xagga ganacsadaha, iyadoo loo marayo xeerka Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Ku dhaqanka kale xitaa kuwa soo saaridda, dhagax gurashada iyo agab kale, waxaa lagu helaa shati ay bixiso madaxda degmada. Haddii ay jiraan codsiyo dhaqan ee badan, waxaa la door bidayaa codsadaha bixiya dammaanad weyn ee ku dhaqankeeda u isticmaalayo si ka faaideysi leh, soona jeediya in uu ugu isticmaalayo howl uu maamulku garto in ay ka jawaabeyso dano badan ee guud.

Haddii ay san jirin sababahaas, door biddida waxaa la siinayaa iibiyaha codsiga ku soo horeeyay.

## Qod. 18
## Kirada Ku dhaqanka

Iyadoo la tixgelinayo degidda iyo isticmaalka hanti badeedka dowladda, iibiyaha waxaa laga doonayaa in uu ku shubo khasnadda dowladda kirada ku xusan warqadda ku dhaqanka lagu siiyay. Inta uu dhaqan galka yahay ku dhaqanku kirada waa la dhimi karaa in u dhiganta oo kali ah goorta qeyb ku dhaqanka lagala noqdo ama qeyb ka mid ah ku dhaqanka uu isticmaalkeedu suuro gal noqon sabab awood dhabiiici oo ku keentay isbeddel hantidii ku dhaqanka.

Waajibka shubidda kirada waa istaagayaa goorta ay dhamaato muddada ku dhaqanku, Ganacsaduhu ku dhaqanka iska celiyo ama suuro gal noqon weydo guud ahaan ku dhaqanka sabab awood dabiici, kala noqosho guud oo laga jaray sanooyinka socda ee u dhiman iibiyaha.

Ku dhaqanka ujeedadiisu ahayd sadaqo ama wax kale oo dan guud ah, waxaa loo xaddidaa kiro yar oo magac u yaal ah looga dan leeyahay xasuusta nooca hanti badeedka dowladda.

## Qod. 19
## La noqshada ku dhaqanka

Ku dhaqan kasta waa lala noqon kara dhamaanti iyo qeybti sababo cad awoogood ee la xiriira isticmaalka guud ee badda ama sababo kale ee dan guud ah, goorta ay la noqoto maamulka badda ee awoodda u leh.

La noqoshada, waxaa lagu soo ban dhigaa go’aan madaxdii bixisay ku dhaqanka. Ku dhaqannada laga sameeyay dhismooyin taagan, maamulku, haddii uu si kale ugu tala gelin waa in laga bixiyaa magdhow u dhiganta qiimeyno dhowr ah ee kharajka howsha iyo sanooyinka ka dhimman dhicidda waqtigii loo qabatay.

Mar kastana magdhowgu ma ka sare mari karo qiimaha howsha waqtiga la noqoshada.

Haddii la noqoshadu tahay qeyb, iibiyaha waa u madax bannaan yahay in uu iska celiyo ku dhaqanka isagoo war gelinayo madaxdii siisay muddo lixdan maalmood gudahood ah oo ka bilaabata la noqoshada.

**Qod. 20**
**Dhicida ku dhaqanka**

Maamulka badda waa ku dhawaaqi karaa in uu ka dhicay ku dhaqankii iibiyaha.

a) — Haddii aan la fulin howsha horay loogu qoray warqadda ku dhaqanka ama aan la bilaabin maamulkii shardi ee loo asteeyay.

b) — Haddii uu san u isticmaalin si joogto ah muddadii loo qabatay ee lagu go'aamiyay warqadda ku dhaqanka ama si xun uu u isticmaalo.

c) — Haddii uu ku sameeyo isbeddel baaxad leh oo aan loo fasaxin kana baxsan sababtii loo siisay ku dhaqanka .

d) — Haddii uu ka baaqsado bixinta kirada dhowr qeybood ee lagu go'aamiyay warqadda ku dhaqanka.

e) — Haddii uu ku xadgudbo ku dhaqankii kuna wareejiyo cid kale ku raaxeysigeeda.

f) — Haddii uu gudan waayo waajibaabdka ka dhasha ku dhaqanka ama ku waajibiyeen dhaqan sharci iyo xeerar. Xaaladaha xarfaha (a iyo b) iibiyaha waa la siin karaa muddo kordhin.

Ka hor inta aan lagu dhawaaqin muddo dhaca, Maamulka ayaa go'aaminaya muddo uu daneeyuhu ku soo gudbiyo figraddiisa (wixii uu ka qabo).

Muddo dhicidda ku dhaqanka, waxaa loogu dhawaaqaa go'aanka madaxdii ku dhaqanka bixisay (17).

Iibiyaha ka dhacay ku dhaqanku ma fili karo wax lacagcelin ah howlo uu qabtay iyo kharjyo uu galay.

**Qod. 21**
**Rahmidda dhismo laga sameeyay hanti badeedka dowladda**
**iyo soo hoos gelid ku dhaqanka**

Si loo rahmo (821 c.c.) howsha uu ka dhisay hantida hanti badeedka dowladda ama isku beddelka ku raaxeysiga ku dhaqanka, iibiyaha waa in uu ka codsadaa madaxdii siisay (17).

Haddii iib ama fulin qasab ah iibsadaha ama loo xugmiyaha howl dhismeedka iibiyahu ka sameeyay hanti badeedka dowladda, ma soo geli karo ku dhaqanka iyada oo aysan u fasaxin madaxdii bixisay ku dhaqanka.

Haddii uu geeriyoodo iibiyahu dhaxaltooyadiisa (159 St. Pers) ayaa soo galeysa ku raaxeysiga ku dhaqanka fasax la'aanta madaxdii bixisay, balse waa in ay weydiiistaan oggolaansho lix bilood gudahood oo ay dhici karto kala noqosho (muddo dhicid). Haddiise dhaxaltooyada ku jirto sabab la xiriirta mudnaantooda farsamo ama dhaqaale, maamulka badduna u rumeysneyn in ay habboon tahay in loo oggolaado ku dhaqanka, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka la xariira la noqoshada (19).

**Qod. 22**
**Wareejinta howl aan la dhaqaajin karin**

Marka iibiyaha loogu dhawaaqo muddo dhicidda (20), haddii aan si kale loogu talo gelin warqadda ku dhaqanka, howlaha aan ladhaqaajin karin ee laga dul dhisay aagga hanti badeedka dowladda, waxay u harayaan maamulka isagoo aan wax kharaj ah celin, marka laga reebo in maamulku laftiisu awooddo in uu amro in iibiyuhu ku bixiyo kharajka duminta si hantida hanti badeedka dowladda loogu soo celiyo siddeeddii hore.

## Qod. 23
## Asluubta isticmaalka hanti dowladeedka

Deegaanka loo aqoonsado in ay ku haboon tahay, taliyaha dekedda ama dejinta, markuu la tashto madaxda canshuuraha, ayaa xadeynayaa jiheynta iyo isticmaalka goobo ka mid ah hanti badeedka dowladda in wax laga raro ama laga dejiyo iyo muddo gaaban dhigasho badecooyin iyo agab kale waqti aan ka badaneyn baahidda caadiga ee dhaq dhaqaaqyada dekedaha.

Madaxda canshuuraha ayey ka go'daa in ay siiyaan fasax mar ah (217) iyo ku waajibid xuquuq dhigasho.

## Qod. 24
## Warshadaha iyo dhismooyinka lagu keydiyo walxaha sahalka ku gubta

Ku dhaqanka warshadaha iyo dhismooyinka keydinta waaxlxaha si sahal ah ku gubta ee xeebaha, xitaa haddii ay uga yaaliin meel gooni ka ah ee ka mid ah hanti badeedka dowladda ama dhul badeedka, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka ciwaankaan iyo go'aanka Wasiirka arrimaha dhaqaalaha oo dhageystay golaha wasiirada. Ku dhaqanka kaalimaha shidaal, saliidda macdinta iyo wixii ka soo baxo, si la mid ah keydinta xeebaha dareerayaasha sahalka ku gubta oo muggoodu ka sareeya labaatan mitir sadax jibaaran, waxaa bixiya ku dhaqankooda Wasiirka arrimaha dhaqaalaha.

Dhismooyinka iyo goobaha shaqo, keydadka iyo kaalimaha ee faqrada hore, waxaa lagu dhaqayaa nidaam iyo xeer u gaar ah oo loogu talaggalay.

## CINWAANKA 3AAD
Dhaqdhaqaaqa maamuul booliska iyo adeegga dekedda iyo goobaha dejin/rarka

## Qod. 25
## Edebta dhaqdhaqaaqa iyo kala waareegga maraakiibta iyo howlaha dhex socda dekedda iyo goobaha dejinta /raridda

Taliyaha dekedda ama googbta dejinta/raridda ayaa habeeya ilaaliyana soo gelidda iyo ka bixidda, dhaqdhaqaaqa kaabadda iyo ku soo xirashada maraakiibta, isticmaalka sabeeyeyaasha ka adeeganaya goobta , rarka, dejinta iyo keydinta badeecadaha, rarka iyo dejinta rakaabka, howlaha adeegga nalalka iyo digayaasha badda, isticmaalka dabka iyo digtoonida ka hortagga dabka, wuxuu u diyaariyaa dhammaan howlaha nooc kasta ee amni iyo booliiska dekedda ama dejinta /raridda iyo wixii hareertooda ah, waxayna la leeyihiin awood iyo amar ka bixin xirashada iyo goosashada iyo dhaqdhaqaaq kasta ee maraakiibta inta ay ku jiraan dekedda iyo goobta dejinta/rarka, waxaa kale uu leeyahay, haddii uu u baahdo in xafiiska dhaqdhaqaaqa amro in uu kala wareejiyo markab kana qaado kharaj.

**Qod. 26**
**Ka saarid agab iyo maraakiibta quustay**

Haddii ay ku quusto badeeco ama agab kale dekedda iyo goobta dejinta/rarka daneeyeyaashu waa in ay u howl galaan si dhaqsi ah ka saaridooda (217).
Marka daneeyeyaashu aysan fulin waajibkaas, madaxa deegaanka, haddii ay la noqoto in qatar ama carqalad ay ku noqoneyso badmaaxidda, xafiiska ayaa ku dhaqaaqaya bixinteeda.

Haddise howshu tahay maraakiib ku quustay dekedda, goobta dejinta/raridda iyo meel ka mid ah bad xeebeedka, madaxda deegaanka , haddii ay u la muuqato in dhacdada ay ka imaan karto qatar ama carqalad badmaaxid, wuxuu ku amrayaa mulkiilaha in uu bixiyo kharajka saaridda qashinka isagoo u xaddidaya muddada howsha uu ku qabanayo, markuu dhageysto waaxda howlaha guud iyo xafiiska farsamada maraakiibta.

Haddii mulkilaha uu san fulin amarka, madaxda deegaanku waa ku dhaqaaqayaa xafiis ahaan soo saaridda.

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, wuxuu go'aaminayaa saaritaanka xafiis ahaan, habka iyo suurta galnimada u iibinta maamulka agabka qashinka la soo saaray, cadadka lacageed ee loo celinayo mulkilayaasha goorta laga jaro kharajkii maamulka, haddii quusidda maaraakiibta tankooda guud ka badneyn sadaxboqol ton mulkiluhu wuxuu bixinayaa oo kali ah ilaa in u dhiganta qiimaha qashinka la soo saaray.

**Qod. 27**
**U gurmadka maraakiib qatar ku jirta**

Taliyaha dekedda ama dejinta/raridda ee ka war hela markab qatar ku jira ama jabay iyo shilalka kale badeed (145- 146) waa in si deg deg ah u caawinaa, haddii uu san haysan una heli karin habkii loo baahnaa, waa in uu digniin siiyo madaxda kale oo u faa'ideyn karta.

Marka madaxda baddu ay san si dhaqso ah u fara gelin karin, talaabooyinka ugu horeeya ee loo baahan yahay waa in ay qaadataa madaxda dowladda ee meesha joogta.

Si loo siiyo gurmad, madaxda baddu, ama la'aantooda madaxda dowladda ee goobta, waa amri karaan maariikiibta goobta joogta ama ka agdhow in ay heegan u noqdaan iyaga iyo shaqaalahooduba (197- 213). Gunooyinka iyo magdhowga howlaha ay qabteen maraakiibtaasi, waxaa lagu go'aaminayaa laguna sheegaa sida ay qabaan nidaamka gargaarka iyo samatabixinta (150- 154).

**Qod. 28**
**Ilaalinta hawlaha dekedaha iyo goobaha dejinta/raridda**
**Mudaaharaad ka dhaca dekedaha iyo goobaha**
**dejinta/raridda ama dusha maraakiibta**

Dadka ku dhex ganacsada dekedaha iyo goobaha dejinta/raridda sida badan barxadda hanti badeedka dowladda, waxay qeyb ka tahay fulinta howsha ilaalinta ee madaxda badda (236,238,240).

Marka mudaaharaad ka jiro dekedda iyo goobaha dejinta/raridda ama maraakiibta fadhida dushooda, madaxda badda, marka ay ka war heshaba way fara gelinaysaa si ay u soo celiso is maqalkii, waxayna codsan kartaa, haddii loo baahdo howsha laamaha amniga.

**Qod. 29**
**Dhibaatada loo geysto howlaha iyo dhismooyinka dekedda ama badda**

Haddii la dhibaateeyo howl dhismo deked ama bad, madaxda badda xubinteeda farsamada ayaa sameyneysa qiimeyn hordhac ah fareysaana cidda masuulka ah in ay fuliso amarka dayactirka loo baahan yahay in muddo ciyiman gudaheed, haddiise ciddii ka masuulka ahayd aysan fulin amarkii oo arrinkuna yahay deg deg madaxda baddu way ku dhaqaaqeysaa dayactirka xafiis ahaan, Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha ayaana go'aaminaya .

Marka dhibaatooyinka aan soo sheeganay uu sababo markab, madaxda baddu waa in ay weydiisaa in loo soo shubo curaar dammaanad u ah kharajka dayactirka (52/3).

**Qod. 30**
**Jilaabasho, isticmaalka walxaha qarxa iyo dab ku shidka dekedda iyo goobaha dejinta/raridda**

Dekedaha dhexdooda iyo deegaanka maraakiibtu ku hakato ama ka sii gudubto, waxay hoose yimaadaan oggolaanshaha madaxda badda sida ay u la muuqato, howlaha jilaabashada, gubidda walxaha qarxa iyo shididda nalalka ama dabka oo dhibaateyn kara adeegga digayaasha badda.

**Qod. 31**
**Hageyaal xirfad leh**

Badmaaxayaasha iyo jilaabatada ee la weydiistay caawinaad hagid markab fadhiya ama ay haysato dhibaato in meel la gudbiyo, waa aqbali karaan xilkaas, haddii goorta ay koraanba sheegaan aqoontooda saxda ah sheegaana in aysan ahayn naaquudeyaasha idman, masuulna ka noqonayaan dhaawacii uu gaarsiiyo markabka, oo kali ah, marka la caddeeyo si dhab ah in dhaawacaasi ku yimid xog qaldan ama tilmaano xun ee ay bixiyeen si loo cayimo waddada.

**Qod. 32**
**Shaqooyinka dekedaha**

Waa shaqaalaha dekedda dadka ku lug leh noocyada howlaha raridda, dejinta keydinta, keyd bixinta, kala iibsiga, gaadiidka gawaarida iyo bakhaarada, guud ahaan dhaq dhaqaaqa dadka iyo badeecooyinka iyo sidoo kale howlaha taageeridda iyo dhamaystirka oo ay qeyb ka yihiin howl dadeed ama isticmaalka aaladda gaadiidka sabeeye ama midka dhuleed, qalab farsamo ( 237).

**Qod. 33**
**Shirkadaha shaqada dekedaha**

Qabashada howsha dekedaha iyagoo metelayo qof sadaxaad shirkado ama shaqsiyaad, waxaa lagu helaa/kasbadaa xeerka Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Ku dhaqankaas waa la siin kara isla shaqaalaha dekedda oo isugu tegay qaab iskaashato. Qiimaha howlaha dekedda, waxaa lagu go'aamiyaa laguna dhaqaa nidaamka ku dhaqanka.

**Qod 34**
**Goleyaasha shaqada dekedda**

Dekedaha iyo goobaha dejinta/raridda, waxay sameysan karaan guddi hoosaadyo lagu soo saaro xeerka Wasiirka arrimaha dhaqaalaha, guddiyada shaqaalaha ee dekaddu waxay ka caawiyaan taliyaha dekedda iyo goobaha dejinta/raridda xagga anshaxa shaqada dekedda.

**CINWAANKA 4AAD**
Shaqaalaha badda

**Qod. 35**
**Dadka badda iyo kuwa ku howlan badda ee dekedaha iyo goobaha dejinta/raridda**

Shaqaalaha badda iyo xiriirka howlaha ay qabtaan waxay u kala qeybsamaan dadka badda iyo howlaha badda ee dekedda iyo goobaha dejinta/raridda (220, 246).

Dadka Badda waxaa ka mid ah shaqaalaha markabka saaraan derejo iyo howl kasta oo ay kala leeyihiin, ha noqdeen kuwa doomaha ama biyaha sabbeeya oo ay riixeyso quwad farsamo.

Shaqaalaha howlaha badda ee dekedda iyo goobaha dejinta/ rariddu waa shaqaalaha dekedaha, waxaana ka mid ah kuwa doomaha wada kuna shaqeysta, jilaabatada iyo shaqaalaha ku howlan guud ahaan wax soo saarka badda.

**Qod. 36**
**Lambarka iyo warqadda badmaaxnimo ee dadka badda**

Dadka badda waxaa la siiyaa lambar gaar ah ee u keydsan madaxa degmada.

Qof kasta oo ka mid ahna waxaa uu leeyahay buug badmaax oo ah midda keli ah ee muujisa xirfaddiisa badeeda dalka dibaddiisana u dhiganta baasaboor in xaddidan muddada ay jirto baahi daneed ama adeegga isla xirfadaas (204,246).

Diiwaan gelinta lambarinta dadka badda waxaa looga baahan yahay waxyaabaha soo socda.

a) — In uu yahay muwadin Soomaaliyeed;
b) — Dalka gudahiisana degan yahay;
c) — Da'diisuna gaartay 15 sano ( 94 xeerka shaqada);
d) — Furuqna laga tallaalay;
e) — Fasaxna ka haysto qofkii daryeelaha u ahaa ( 82 xeerka qooyska) goorta codsaduhu yar yahay;
f) — Jir ahaana loo garto in uu ku haboon yahay badmaaxnimo;
g) — Aqoon dabaal iyo dhaqaajinata sabeeyeyaasha;

h) — Xukun dhicin maxkamadeed dambiyo la xiriira mulkiyad (480 ee ss. X.C.) ama dad ( 439- 440 e ss. X.C.) laguna ciqaabay ciqaab aan ka yareyn ugu yaraan hal sano xarig ah ee laga reebo goorta uu soo marayo dhaqan celin ( 152- 155 X.C.).

Da' yarta aan ka yareyn 10 sano waa loo qori karaa dad badeedkasi looga shaqaaleeo maraakiibta iyo doomaha, haddii qaraabada da'yarta ay xubin ka yihiin shaqaalaha masuulna ka noqonayaan. Haddii unugoodu dego da'yartu waa ka mid dadka badda inta ay ka gaarayaan 15 sano lama shaqaaleyn karo markab iyo doomo shaqaalahoodu aysan ka mid ahayn qaraabadoodu oo masuuliyaddooda qaado.

## Qod. 37
## Tirtiridda qoraallada diiwaanka lambarrada

Tirtiridda qoraallada lambarrada ee dadka badda , waxaa lagu sameeyaa sababaha soo socda;

a) — Geerida qofka ku qornaa;
b) — Qofku in uu soo gudbiyo caddeyn khiyaar ah ee ka bixid howsha badda ee qoraal ah;
c) — In uu lumiyo muwaddinnimada Soomaaliyeed;
d) — In uu lumiyo jir ahaan si joogta ah ku haboonaashada badmaaxnimada.
e) — Xukun aan racfaan lahayn uu ku dhaco dambiyada ka joojinaya in la diiwaan geliyo ( 36/3 xarafka "h");
f) — Kh) Qofku marka uu ka joogsado howlaha badmaaxnimada muddo 10 sano oo xiriir ah isagoo ku qoran xirfadle ama 5 sano oo xiriir ah inta kale.

Dadka looga tirtiray lambarka diiwaanka si waafaqsan xarafka "c" iyo "e" waa codsan karaan in dib loo diiwaan geliyo, marka ay ka dhamaadaan sababihii keenay in laga tirtiro, Kuwa looga tirtiray si waafaqsan xarafka "b" iyo "f" waa codsan karaan in dib loo diiwaan geliyo inta lagu guda jiro muddo ka bilaabata maalinta tirtirka una dhiganta muddadii uu saarnaa ee hore uu dhameystay.

## Qod. 38
## Darajoyinka xirfadeed ee badmaaxyada

Badmaaxeyaasha iyo dadka ka shaqeeya wax soo saarka badda derejooyinkooda xirfad badmaax waa kuwa soo socda:

a) — Kuwo shaqadoodu tahay markabka dushiiisa:
1. — Dhamaha safarada fog oo leh aqoon uu xukumo/hago maraakiibta nooc kasta iyo safar kasta;
2. — Badmaax sare waa midka leh aqoon uu xukumo/hago maraakiib nooc kasta oo wadarta culeyskoodu ka badneyn kun tan oo dhex mushaaxa magaaladii la dhihi jiray Lorenzo Marques oo (manta ah Moputo Caasimadda Muzanbique) ilaa xeebaha Carabta, Qooriga Bersiya iyo Badda Cas, si la mid badmaaxinta qooriga Cumaan, jiidda xeebta Hindiya ilaa Magaalada Kalkata;
3. — Naaquude oo leh aqoon uu ku xukumo/hago maraakiibta shiraaca leh wadarta culeyskooduna ka badaneyn 250 tan oo ay riixayaan alaad farsamo ee dhaqaajisa kana shaqeeya xad xeebeeka joqoraafi ee ku xusan lambarka soo socda;
4. — Badmaax u idman dhaqdhaqaaqa, aqoonna u leh in uu xukumo/hago maraakiibta shiraaca leh ee isku darka culeyskoodu ka badaneyn 150 tan oo ay riixayaan alaad farsamo

ee dhaqaajisa mushaaxana xad xeebta magaaladii la dhihi jiray Lorenzo Marques oo (manta ah Moputo Caasimadda Muzanbique) ilaa xeebaha Carabta, Qooriga Cumaan oo ay ku jirto Qooriga Bersiya oo ay san ku jirin Badda Cas;

5. — Madax doomeed aqoon u leh xukunka/hago maraakibta shiraaca oo ay xiiraan aalad farsamo ee dhaqaajisa wadarta culeyskoodu aan ka sareyn 50 tan ee ku jira biyo badeedka dalka;

b) — Howlaha mishiinka ku saabasan:
   1) — Dhamaha mishiinka ee aqoonta u leh jiheynta mishiinnada maraakiibta nooc kasta oo maraakiibta ku rakiban meel kasta ha u jeede;
   2) — Farsamo yaqaan markab oo aqoon u leh jiheynta mishinka maraakiibta nooc kasta oo awooddoodu aan ka sareyn 800 ama 900 tilmaan Faras ee saaran maraakiibta ku howlan badmaaxa laga bilaabo Lorenzo Marques ilaa xeebta Carbeed, Qooriga Bershiya iyo Badda Cas iyo sidoo kale badmaaxidda Qooriga Cumaan, jiidda xeebta Hindiya ilaa Kalkata.
   3) — Mishin yaqaan markabeed oo aqoon u leh jiheynta nidaamyada mishinka gubidda gudaha iyo shidaalka qarxinta awooddoodu aan ka sareyn 300 faras ee saaran maraakiibta ku howlan badmaaxa xeebaha ku xadeysan kor oo ay ku jirto Qooriga Bershiya kana baxsan tahay Badda Cas;
   4) — Dabshidaha idman ee aqoon u leh jiheynta mishinka maraakiibta nooc kasta awooddooduna aan ka sareyn 150 tilmaan Faras ee ku rakiban maraakiibta ku howlan badmaaxa ku xusan xarafka hore ee lambarka 4.
   5) — Injineer leh aqoon u suuragelisa maareynta gubashada ama qaraxa gudaha mishinnada awooddoodu aan ka sareyn dhumuc boqol faras ee ku rakiban maraakiibta ka howl gasha badmaaxidda biyo badeedka dalka;

c) — Si loo sameeyo dhismaha maraakiibta:

   1) — Injineerka markabka oo aqoon u leh ayaa dejinaya qoorsho sawireedka ama hogaaminaya dhisidda, isbedelka ama dayactirka maraakiibta nooc kasta:
   2) — Dhise markab ee leh aqoon qoorshe sawireedka ama hogaaminaya dhismaha, beddelaadda ama dayactirka maraakiibta leh hargab qoryo noocyo iyo tan kala duwan ama hargab biro oo wadarta culeyskoodu yahay ilaa 300 Tan;
   3) — Najaar Markab, aqoon u leh dhisidda iyo dayactirka maraakiibta qoryaha culeyskooda guud uusan ka sareeyn 150 tan.

## CIWAANKA 5AAD

Nidaamka maamul ee maraakiibta

### Qod. 39
### Maraakiibta, doomaha iyo sabbeeyeyaasha

Markab, waxaa loola jeedaa dhismo nooc kasta oo dhameysan looguna talaggalay gaadiid badeed xitaa mid kaluumeysi/jilaabasho, jiidid ama dan kale.

Si waafaqasan shuruudaha farsamo iyo adeegyada loo isticmaalo, maraakiibta ayaa loo kala diiwangeliyaa:

a) — Lambarinta maraakiibta;
b) — Diiwaanka doomaha ;

c) — Diiwaanka sabbeeyeyaasha;

Qoraalka diiwaan gelinta diiwaanka sabeeyeyaasha, waxaa lagu caddeeyaa goobta joogtada u ah ee shaqo deked ama dejin/rarid. Qodobbada quseeya maraakiita ayaa lagu dhaqayaa doomaha iyo sabeeyeyaasha, haddii aan si ka duwan loo dhigin.

**Qod. 40**
**Gelitaanka badmaaxnimada iyo oggaanshaha maraakiibta doomaha iyo Sabbeeyeyaasha**

Waa loo oggol yahay badmaaxnimada maraakiibta ka diiwaan gashan diiwaannada ay hayaan xafiisyada, kartina u leh si waafaqsan sharcigaan.

Sidoo kale marka laga gudbo culeyska/xajmiga iyo meesha uu yahay xafiiska diiwaangelinta, maraakiibta waxaa lagu kala aqoonsadaa magac, doomaha magaca iyo lambarka diiwangelinta, Sabeeyeyaashana lambarka diiwaangelintooda.

**Qod. 41**
**Qarameynta maraakiibta**

Waa lagu qori karaa lambarrada iyo diiwaannada ku xusan qod.39 dhammaan maraakiibta meel kasta ha lagu dhise oo ay leeyihiin muwadiniinta Soomaaliyeed iyo ajaaniba; erega muwadin, waxaa ka mid ah shirkado waaweyn, shirkad iyo ururro si gaar ah loo leeyahay.

Tan kasta oo saafi ah waxaa ku waajib ah:

a) — Wakhtiga diiwaangelinta hore, xuquuq sharcigu ku jideeya.
b) — Sanad kastana canshuurta ayuu sharcigu ku jideeya. Korarka tirada canshuurahaas lama beddeli karo intii labaatan sano ah oo ka bilaabata taariikhda diiwaangelinta hore. Mulkilayaasha maraakiibta iyo doomaha ee aan degganeyn goobta diiwaangelinta waa in ay soo cayimaan wakiilkooda goobta deggan, kaasoo madaxda baddu ugu muuqdo mid goobta ku nool.

**Qod. 42**
**Dokumeentiga jinsiyada maraakiibta, leysanka doomaha shatiga sabeeyeyaasha**

Maraakiibta, doomaha iyo sabbeeyeyaasha ku qoran diiwaanka lambarada ama diiwaano kale, waxay karti u leeyihiin badmaaxnimo marka ay surtaan/taagtaan calanka maraakiibta ganacsiga ee Soomaaliyeed, siday ugu kala horeeyaan dokumentiga jinsiyadeed, leysanka iyo shatiga (223).

Dokumentiga jinsiyadeed, waxaa bixiya madaxa deegaanka waana in lagu xusaa magaca, nooca iyo muuqaalka, miisaanka guud iyo midka saafiga ah ee markabka, magaca mulkilaha iyo deegaankiisa.

Laysanka doomaha iyo shatiga sabbeeyeyaasha, waxaa bixiya madaxda diiwannadooda haysa, waana in lagu xusaa magaca iyo lambarka ay ku diiwaan gashan yihiin, cabirkooda muhimka ah, culeyska guud iyo midkooda saafiga, magaca mulkilaha iyo deegaankiisa iyo xafiiska ay ka diiwaan gashan yihiin.

Dokumentiga jinsiyadeed, haddii xaalad deg deg ah jirto waxaa lagu beddeli karaa dokumenti kumeelgaar ah ee uu bixiyo madaxda deegaanku ee ku saabasan maraakiibta dhismaha

cusub ama madaxda qunsuliyadda, xitaa ka hor inta aan la siin markabka lambar maraakiibta ku socota calan ajnabi. Dokumentiga kumeelgaarka ah xitaa waxaa la siiyaa maraakiibta kuwa ay ka luntay ama ka baaba'aday dokumentiga jinsiyadeed.

Madaxda kor ku xusan, waxay xadeynayaan dhaqan galka muddada dokumentiga kumeelgaarka ah oo la xiriirta waqtiga loo baahan yahay oo loogu sameyn karo dokumentigs jinsiyadeed. Mar kastana muddada dhaqan galkeedu kama sare mari karo hal sano.

Laysanka doomaha iyo shatiga shaqada ee sabbeeyeyaasha, waxay noqon karaan xaaladaha kor ku xusan in loogu beddelo laysan ama shati shaqo oo ku meel gaar ah.

Dokumentiga kumeelgaarka ah waa in la cusbooneysiiyaa, marka la beddelo magaca iyo culeyska ama nooca iyo dabeecadda markabka.

Sidoo kale sababahaan laysanka doomaha waa in la cusbooneysiiyaa goorta la beddelo xafiiskooda diiwan gelinta ama lamabarka diiwaan gelintooda.

**Qod. 43**
**Oggolaansho calan ka dhigid**

Mulkiilaha doonaya in markabkiisa laga tiro lambarka ama diiwaannada Soomaaliyeed si uu uga diiwaan gashado dal kale ama doonayo in uu ka fogaado ama sheegin in uu sii heysto lamabarka diiwaan gelinta markabka ee diiwaanada Soomaaliyeed waa in uu u sameeyo caddeyn xafiiska diiwaan gelinta lambarinta, haddii markabku joogo dalka, madaxda qunsuliyadda, haddi markabku joogo dalka dibadiisa.

Madaxda ka gudoomeyso caddeynta ayaa faafineysaa, iyadoo ku dhejinayso illinka xafiiska diiwaan gelinta, mararka qaarne lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, iyadoo lagu wargelinayo ciddii dan ku leh in ay ku soo jawaabto boqoliyolabaatan maalmood gudahooda, haddii uu markab yahay, sagaashan maalmood haddii ay tahay doon ama sabbeeyee xuquuqda ay ku sheeganayaan si loo meel mariyo ka dhigidda calanka.

Haddii muddada kor ku xusan gudaheed laga soo gudbiyo hor istag ama la hubsado jiritaan xuquuq la taaban karo (681 ss., X.M.) ama dammaanad qaad markab (821 X.M.), oggolaanshaha waxaa la siin karaa mulkiilaha oo kali ah, marka hor istaagga lagu diido xukun kama dambeys ah (222 X.H.M.) ama deynleyaasha la wada raali geliyo ama ay cafiyaan madaxda badduna diyaariso mushaarka badmaaxinta iyo lacagta maamulka iyo madaxda garsoorkuba ku leeyihiin, soona codsadeen si macquulka ah si loo ilaaliyo danaha deynleyaasha.

Mdaxda bixineysa oggolaanshaha waa ka qaadeysaa warqadaha dalka (50, 221).

**Qod. 44**
**Oggolaanshaha calan ka dhigidda ee sababo dhaxal iyo xukun**

Dhaxlaha ama qofka loo xukumay markab Soomaaliyeed ee aan dooneyn in uu diiwaanka lamabarinta iyo diiwaannda Soomaaliyeed ugu sii jiro waa in uu u sameeyaa caddeyn xafiiska diiwaanka gelinta markabka ama dalka dibaddiisa madaxda qunsuliyadda.

Madaxda ka guddoomeyso caddeyntaas, waxay fulineysaa sida ay qabto faqrada labaad ee qodobka hore.

Siismada oggolaanshada ku dhaqanka, waxaa lagu dhaqaa faqrooyinka sadaxaad iyo afaraad ee qodobka hore.

**Qod. 45**
**Madaxda awoodda u leh oggolaanshaha calan ka dhigidda**

Bixinta oggolaanshaha calan ka dhigidda waa awood u gaar ah Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

**Qod. 46**
**Burburin markab si khiyaari ah**

Mulkilaha doonaya in uu burburiyo markab wadarta culeyskiisu ka sareeyso konton tan, doon ama sabbeeye waa in uu sameeyaa caddeyn uu uga codsanayo oggolaansho xafiiska diiwan gelinta, isagoo ku wareejinayo waraaqaha markabku ku shaqeeyo (53, 222).

Madaxda ayaa sameyneysa faafinta caddeynta habka uu qabo qod. 43aad.

Haddii boqoliyolabaatan maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta faafinta laga keeno ka hortag ama ay soo if baxdo jiritaan xuquuqo dhab ah (681 ss., X.M.) ama la damiintay markabka (821 X.M.) oggolaanshaha, waxaa la siin karaa oo kali ah ka dib, marka ka hortagga lagu diido xukun kama dambeys ah (222 X.H.M.), ama dhammaan dadkii deynta ku lahaa la wada raali geliyo, ama xuquuqihii ay baaba'aan, ama la'aantood mulkiluhu fuliyo amarrada madaxda maamulka badda ee mushaaraadka shaqaalaha markabka iyo wadar lacageedka maamulka ku lahaa, ama madaxda garsoorka kuna yimid codsi dhinacyada si loo ilaaliyo danta deynleyaasha.

Si kastaba ha ahaatee burburintu waxay noqon kartaa mid la oggolaado, marka ay jirto baahi macquul ah ee leh saldhig la garowsan karo oo deg deg ah.

**Qod. 47**
**Maleyn lumid**

Marka laga gudbo afar bilood maalintii ugu dambeysay ee war laga helo, haddii uu yahay markab ay riixaan/jiidaan mishin farsamo ama siddeed bilood xaaladaha kale, markabka waxaa loo qaadanayaa in uu lumay maalinta xigta goortii akhbaartiisa ugu dambeysay.

Ka dibna dhamaadaan fursadaha baaritaan oo qof kastaa oo loo arkay in ay ka bixin karto xog, xafiiska diiwaan gelintu, marka laga gudbo shuruudaha kor ku xusan, wuxuu qoreyaa habka tiraabka ee maleynta lumidda.

**Qod. 48**
**Tirtiridda lambarka iyo diiwaannada**

Markabka waxaa laga tiraa lambarka ama diiwaannada diiwaangelinta marka:

a) — Lumid dhab ah;
b) — Maleyn lumid (47);
c) — Dumin/burburin (46);
d) — Calanka laga dhigo (43 -45);
e) — Xafiiska diiwan gelintta uu ka beddesho (42/8).

Marka la tirtirayo, madaxdu waxay kala noqoneysaa waraaqaha shaqada, haddii aan horay looga qaadin sida ay qabaan habka qodobbada hore waana in ay faafiyaan dhicidda tirtiriddaas.

## Qod. 49
## Shuruudaha badmaaxiinta iyo sida loo hubiyo

Markabka u baxayo badmaaxnimo waa in uu ku sugan yahay xaalad uu badmaaxi karo, si macquul ahna u qalabeysnaado oo ku haboon gudashad howsha uu u safrayo.

Jiritaanka shuruudahana laga rabana, waxaa Xafiiska Farsamada Maraakiibta ee si toos ah u hoos yimaada Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, looga sameeyaa shahaado oo booqata kormeertana, wixii looga baahan yahay hubinta xaaladaha badmaaxnimada iyo qalabeyntoodaba, si loo ilaaliyo nafta aadamiga ee badda ku jirta iyo amaanka maraakiibta ganacsiga ee qaranka.

Shahaadooyinka iyo wax kasta oo kale oo cadeeyma ah ee uu bixiyo xafiiska farsamada maraakiibtu waa la aamini karaa ilaa inta laga helayo wax ka duwan.

Shahaadooyinka ay bixiyeen hay'ado ajaanib sharci ahaan dhisan, waxaa loo aqoonsanayaa ansaxnimadeeda sida la mid ah kuwa uu soo saaray xafiiska farsamada maraakiibtu.

Madaxda badda ee dalka iyo midda qunsuliyadda dalalka dibadda, wixii ay bixiyaan waa in la fuliyo kharajkoodana uu bixiyo mulkiilaha markabka, kormeerka iyo booqashada caadiga ah goorta ay dhacdo ansaxnimada shahaaddada kor ku xusan, sidoo kale kormeerka iyo booqashada aan caadiga ahayn marka ay aaminaan in ay haboon tahay ama marka la hubiyo in ay jiraan cillado dhibaateyn kara badmaaxnimada markabka iyo howl galka xubnihiisa.

## Qod. 50
## Warqadaha markabka

Warqadaha markabku waa:

a) — maraakiibta: warqadda dhalashada; kaalinta shaqaalaha markabka iyo diiwaanka markabka;
b) — doonyaha shiraaca leh: warqadda ruqsada iyo kaalinta shaqaalaha markabka;
c) — doonyaha sabeeyo: shatiga.

Dokumentiga kor la soo sheegay waa in lagu xafido markabka.

Kaalinta shaqaalenimo ee uu bixiyay xfiiska diiwaan gelinta, waa in ay ka muuqato;

1) — magaca markabka ama doonta
2) — magaca hantiilaha
3) — tilmaanta taariikhda uu markabku hawl gelayo iyo taariikhda uu ka fariisanayo.
4) — liiska shaqaalaha ah, oo ay ku caddahay heshiiska qof walba lagu qaatay, xirfadiisa, darajadiisa, shaqada uu markabka ka qabanayo mushaharka heshiiska lagula gaalay.

Kaalinta shaqalenimo waa in ay ku qoran tahay:

1) — fasaxyada xafiiska farsamada badda;
2) — bixinta canshuuraha iyo xuquuqda badaha;
3) — fiisaha dalkugalka ama dalkaga bixidda ee maamulka badda ama qunsuliyadda ay kaga dhufteen meel kasta uu ku hakaday.

Diiwaanka badda waxaa buuxiyo maalinkasta kabtanka markabka, wuxuuna ku muujnayaa dhammaan dhacdooyinka la xiriiro safarka badda, dakhliga iyo kharajka la xiriiro markabka iyo shqaalaha; waajibaadyada loo qoray amniga badmaridda; dambiyada lagu galo markabka dushiisa iyo tallaabooyinka anshaxmarineed ee laga qaato; dhamaan dhacdooyinka aan caadiga ahayn ee la xiriiro markabka, dadka markabka soo fuulay iyo badeecadda la soo saaray ee la sugay intii la safraayi; badeecadda la soo saaray iyo kuwa laga dejiyay, ayadoo la tilmaamayo

dhabeecada, tayada iyo tirada isla badeecadda, taariikhda iyo goobta laga soo raray iyo meesha ay ku socoto, magaca qofka badeecadda soo raray iyo magaca qofka loo soo raray, taariikhda iyo goobta dib loogu kala wareegaayo;

Kabtanka markabka wuxuu kaloo ku muujnayaa diiwaanka badda wakhtiga dhaqdhaqaaqa, inta jeer uu mashiinku wareegay, shidaalkii la isticmaalay, cilladaha iyo cilladaha laga bixiyay matoorka ayadoo la raacayo timaamamaha agaasimaha farsamada oo maalin walba laga rabo in diiwaanka uu ku qoro uuna saxiixo arrimahahaas iyo wixii la xiriiro.

Tilmaamaha lagu qoro diiwaanka badda maalin walbo waa in uu saxiixo taliyaha markabka. Arrimahaas waxay caddeyn u noqon karaan xataa hantiilaha markabka haddii si joogto ah loo sameeyo; mar kasta waxay ku noqon karan caddeyn lid ku ah hantiilaha markabka, haseyeeshee qofkii rabo in uu ka helo faa'iido ma kala sooci karo nuxurka.

## CINWAANKA 6AAD

Amniga badmaridda iyo markabka

### Qod. 51
### Imaatinka maraakiibta

Marka uu yimaado markab ama doon wadato calanka Soomaaliyeed deked ama marso ku taalo dhulka soomaalyeed, xattaa haddii uu iskiisa uu u tegayo ama lagu qasbo, kabtanka markabka ama doonta, marka laga soo tago waajibaadyada caafimaadka ee ku xusan Magaca Todobaad ee shrcigan, waa in uu:

a) — gacanta uu ka saaro madaxda badda ee soo korasyo markabka nuqul uu ku qoran yahay, magaca kabtanka, hantiilaha markabka ama wakiilkiisa, tirada dadka markabka saran, tirada iyo tayada badeecadda iyo tirada laga dejinaayo, tirada rakaabka saran iyo kuwa ka degaayo;

b) — in uu tusiyo dokumentiga markabka. Jornaalka badda ee markabka waxaa shabbadeynayo madaxda badda ayaga oo faallo gaaban ku qorayo meel gees ah ee hoose ee bogga dacalladiisa ah.

c) — in uu cadeeyo cilladaha iyo dhammaan dhacdooyinka aan caadiga ahayn ee dhacay intuu safarka ku jiray markabka ama doonta, badeecadda iyo dadka saarnaa markabka. Maraakiibtu waxay madaxda baddu ka qorayaan caddeyn ayaga oo ku derayo ansixin ay ku dul qoraan joornaalka badda: doonyuhuna waxay ka qorayaan warbixinta ku haboon. Wuxuu ka hormarinayaa, haddii loo baahdo, baaritaan deg deg ah oo la xiriiro arrinta laga soo dacwooday, wuxuuna ka sameynaya dacwo qoraal ah.

Dekedaha dibedda, hawlaha ku xusan xarfaha b) iyo c) waxaa sameynayo madaxda qunsuliyadda ama dad kalooo sharciga dalkaas loogu wakiishay ama heshiis caalami ah, ama laga fuliyay meesha ugu horeyso ee lagu hakado oo dalka ka mid ah ee uu ku xirtay ama meesha ugu horeyso oo dibedda ka mid ah ee uu ku xirtay meeshaas oo ay deggan tahay madaxda qunsuliyadda.

Marka cadeynta cilladaha iyo dhammaan dhacdooyinka aan caadiga ahayn ee dhacay ayna helin madaxda degaanka, kabtanka markabka waa in uu si dhaqsi ah ugu tagaa madaxda qunsuliyadda kadib marka loo oggolado in uu xur u yahay hawshiisa.

Kabtanka markabka waxaa laga rabaa in uu siiyo madaxda badda ama qunsuliyadda wirarka la weydiisto oo ku saabsan safarka iyo in uu u soo bandhigo madaxda, cadeymaha ay madaxdan u arkaan lagama maarmaan, tirada shaqaalaha iyo rakaabka

Qodobka ku xusan xarafka a) ee faqradda koowaad ee qodobkan iyo soo bandhigidda dokumentiyada caafimaadka iyo tilmaamaha markabka waa in ay haystaan xattaa maraakiibta iyo doonyaha wata callamada shisheeye.

**Qod. 52**
**Bixitaanka maraakiibta**

Markabka ama doonida wadato calanka Soomaaliya kama bixi karaan deked ama marsad dalka ama dibedda ah haddii aysan ka helin amar madaxda badda ama qunsuliyadda in shixnaddu bixi karto, ayada oo fasaxa bixitaanka lagu qoraayo diiwaanka.

Shixnaduhu lama siin deyn karo haddii hantiilaha iyo kabtanka markabka ama doonta aysan gudan waabibaadka sharciga saaray ee la xiriira xeerka amniga iyo kuwa furdada, aysan fulinna waajibaadkooda caafimaad ama furdadeed, ama aysan iska bixin canshuurta iyo xuquuqaha badda, ganaax ama khasiraad, iyo in ay iska shubaan lacagta damaanadda sharcigu dalbaday oo ku xusan faqradda labaad ee Qod. 29.

Fasaxa shixnadaha ee maraakiibta ama doonyaha wata calan dibedda ah, waxaa bixin karo oo keliya madaxda badda iyaga oo fasaxaas siinayo oo keliya marka la guto dhamaan waajibaadyada nabadgelyo ee furdada iyo in la iska bixiyay canshuuraha iyo xuquuqaha badda,ganaax ama khasiraad, iyo in la shubay lacagta damaanadda sharcigu dalbaday oo ku xusan faqradda labaad eeQod. 29.

**Qod. 53**
**Anshaxa markabka**

Dhammaan dadka ku sugan markabka dushiisa oo darajo kasta leh waxay u hogaansamayaan amarka kabtanka markabka.

Dadka markabka saaraan dhulka uma degi karaan ayaga oo aan fasax ka haysanin kabtanka.

Dadku waa in ay kala shaqeeyaan badbaadada markabka, dadka iyo badeecadda saaran ilaa kabtanka uu ka amro in ay ka cararaan. Xaladaha maskarjabidda, haddii dadka uu weydiisto gurmad deg deg ah shilka kaib, kabtanka martkabka ama madaxda badda ama qunsuliyadda, waxaa waajib ku ah in dadaalkooda ay bixiyaan sidii dib loogu heli lahaa qanaxyada.

**Qod. 54**
**Cabashooyinka shaqaalaha iyo rakaabka**

Talaabooyinka uu qaado kabtanka markabka ee la xiriro hawlihiisa, shaqaalaha iyo rakaabka waxay uga caban karaan madaxda badda ama qunsuliyadda, kabtankana kama reebi karo qofkii rabo in uu cabasho ugu tago madaxdaas, haddii ayasan jirin baahi deg deg ah ee la xiriirto shaqada oo joogitaankooda markabka dushiisa ka dhigeyso lagama maarmaan.

Shaqaalaha markabka tiro aan ka yareen ugu yaraan seddex dalool hal, waxay ka caban karaan oo kale tayada iyo cuntada oon ku filneen.

Madaxda badda ama qunsuliyadda, hubsiino ee xaaladda dhabta ah kadib, waxay amrayaan, haddii xaaladdu sidaas tahay, kabtanka markarbka in uu tallaabo ka qaado, haddii uu aamarka qaadan waayo, ayaga ayaa qaadayo tallaabo xafiis ahaan, oo qalqaalinayo lacagta lagama maarmaanka ah ee lagu gadayo cuntada ama waxay rahan u dhigayaan qalab ama alaab laga maarmo, ama aalad gargaar oo ka mid ah rarka, si loo xaqiijiyo badmaridda, ayada oo arrintan inta aysan dhicin ka hor la ogeysiinaayo hantiilaha markabka iyo, haddii ay suurto gal tahay, dadka iska leh alaabta aan soo sheegnay.

Marka la gado badeecadda, hantiilaha markabka waa in uu u magdhawo dadka iska leh.

Tallaabooyin la mid ah kuwaas waxaa qaadayo madaxda badda iyo qunsuliyadda xaaladaha dadka rakaabka ah ay so cawdaan.

**Qod. 55**
**Rarid sharci darro ee badeeco khatar ah**

Haddii ay dhacdo in si aan sharci ahayn loo soo raro badeeco khatar ah, kabtanka markabka mar allaale iyo marka uu ogaado falkaas, ayada oo hadba xaaladda la eegaayo, waa in uu amro in si deg deg looga dejiyo markabka, haddii uu safar ku jirana in laga dhigo meel aan waxyeello lahayn ama la burburiyo, haddii aysan suurto gal ahaynna in la xafido ilaa laga gaarayo meesha ugu horeyso ee lagu hakado.

Isla talaabooyinkaas waa in kabtanka markabka uu qaado marka la soo saaro walxo qaadistoodu, inkasta uusan jirin qodob sharci khaas ah oo mamnuucayo, tahay ama noqon karo khatar inta safarka lagu jiro ama kuwo waxyeello u leh markabka, dadka ama badeecadda, haddii aysan suurto gal ahaynna in la xafido isla walxahaas ilaa laga gaarayo meeshii uu u socday.

Badeecadaha iyo walxaha kor lagu soo sheegay marka meel lagu xafido ilaa laga gaarayo meesha ugu horeyso ee lagu hakanaayo, kabtanka markabka waa in uu gacanta ka geliyo kabtanka dekedda ama marsada ama madaxda qunsuliyadda si loo dhigo bakhaarrada dekedda looguna diyaariyo qofka isla leh.

**Qod. 56**
**Geerida ama lumidda dadka markabka saranaa**

Haddii uu geeriyoodo ama uu lumo qof markabka saarnaa, kabtanka markabka waa in uu bilaabo xaqijinta sababta geerida iyo duruufaha lumidda ayada oo ay caawinayaan labo markhaati.

Haddii geerida ay sabab u ahayd jirro leysu gudbiyo, kabtanka waa in uu gubo wixii uu isticmaali jiray iyo alaabtii uu lahaa qofka geeriyooday ee loo arkay in ay khatar ku yihiin caafimaadka dadka markabka saran.

Si kastaba alaabaha kor lagu sheegay, sida kuwa qofka la waayay, waxaa xafidayo kabtanka ilaa laga gaarayo meesha ugu horeyso ee lagu hakado halkaas oo gacanta laga saari doono madaxda badda ama qunsuliyadda.

Nnatiijada baaritaanka ee ku xusan faqradda koowaad, kabtanka ayada oo ay wehliyaan labadii markhaati oo caawinay, wuxuu u qorayaa warbixin madaxda kor ku xusan, kuwaasoo iyagana qorayo habraac dacwdo oo muujinayo xogta qofka geeriyooday ama la waayi, iyo wakhtiga, taariikhda sababta iyo duruufaha dhacdada ee uu ka soo warbixiyay kabtanka.

Warbixintaas waxaa loo gudbinayaa madaxda dawladda hoose ama degmadii ugu dambeysay ee qofka geeriyooday ama la waayi, haddii xaaladdu tahay qof la waayi waa in loo gudbiyo madaxda garsoorka ee dekedda ama marsada ugu horeyso.

**Qod. 57**
**Dib u soo celin badmaaxiyeyaal iyo muwaadiniin Soomaaliyeed**

Meelaha dibedda ah ee ayna degganeen madax qunsuliyadeed, kabtanka markabka waa in uu gabbaadad ku siiyo markabka dalkana uu soo celiyo badmaaxayaasha Soomaaliyeed ee halkaas looga tegay.

Waa in sidoo kale uu ku soo dhoweeyo markabka muwaadhin Soomaaliyeed kaloo kasta oo saabab kasta madaxda qunsuliyadda u aragto in ay lagama maarmaan tahay in dalka lagu soo celiyo

Kabtanka markabka, haseahaatee, ma ku siin karo magangelyo siyaasadeed markabka dushiisa dad, xattaa haddi ay yihiin muwaadhiniin Soomaaliyeed oo ay u doondooneyso madaxdu dambi caadi ah uu galay awgeed.

**Qod. 58**
**Dayacaad dokumentiga markabka**

Haddii la dayaco dokumentiga markabka, kabtanka markabka waa in meesha ugu horeyso ee lagu hakado u gudbiyo dacwo kabtabka dekedda ama marsada ama madaxda qunsuliyadda, oo siinaya dokumenti ku meel gaar ah si uu u sii wato badmarkiisa.

**Qod. 59**
**Xogwareysiga calanka maraakiibta dagaal**
**ee ajnabiga ah**

Maraakiibta iyo doonyaha wata calanka Soomaaliyeed waa in ay u hogaansamaan amarrada ah in ay istaagaan oo ay siiyaan maraakiibta dagaal ee quwadaha shisheeye ee saaxiibka ah, cudurdaar kadib, dhalashadooda marka ay weydiistaan.

Qasab kuma ah, haddaba, in ay u hogaansamaan waqtiyada nabadda ah booqashada ama ay tallaaboonka garsoor ee maraakiibta dagaal ee quwadaha saaxiibka ah, marla laga reebo sida qawaaniinta caalamiga ah qarrireen si loo reebo ganacsiga addoonta.

**Qod. 60**
**Baab'idda farsamo**

Qodobbada la xiriira calaamadaha badeed guud ahaan, kuwa lagu joojinaayo dhinac dhigidda maraakiibta ee badda, iyo kuwa la xiriira qalabka iyo isticmaalka isgaarsiinta raadiyadaha ee saaran markabka waxaa sheegayo sharciga.

## CINWAANKA 7AAD
Ilaaalinta caafimaadka badeed

### Qod. 61
### Adeegga caafimaadka ee badda

Adeegga caafimaadka badda ee ku saabsan ilalinta nadaafadda iyo caafimaadka guud ee dekedaha, maarsooyinka iyo maraakiibta ku xiran dekedda, kuwa soo gelayo iyo kuwa dekedda ka baxayo ee gelayo badda, si looga difaaco ku soo gudbinta qaabkaas ee cudurrada leys qaadsiiyo, waxaa daaweynayo Waaxda Caafimaadka Guud oo adeegsaneyso madaxda badda iyo shaqaaleheeda.

Meelaha lagu hakado ee dalka ka mid ah haddii ay lagama maarmaan noqoto waxaa loo magacaabaya dhaqtarka dekedda.

Ddhaqaatiirta dekeddu waxay qabanayaan dhamaan baarista iyo kormeerka la xiriiro shaqadooda ee ku xusan sharcigan iyo xeerkaba, waxayna wax ka qabanayaan dhamaan arrimaha caafimaadka ee dekedda dhexdeeda iyo marsada ama maraakiibta iyo doonyaha dushooda ee ku xiran dekedda.

Dhaqaatiirtu waa in ay si dhaqsi ah u wargeliyaan waaxda caafimaadka guud iyo madaxda badda fal kasta oo khuseeyo caafimaadka guud, sidaas oo kale amarjebin kastoo la xiriiro amarrada caafimaadka, ayaga oo soo jeedinayo tallaabooyinka ku haboon arrintaas.

Meelaha lagu hakado oo aan lahayn dhaqaatiir, adeegga caafimaad waxaa lagu aaminayaa shaqaalaha kalkaaliyeyaasha caafimaadka ayaga oo raacayo qaabka iyo xadeynta ay u sameysay Waaxda Caafimaadka Guud, oo sidoo kale u magacaabeyso dhaqtarka ku sugan meesha ugu dhow si uu u kormeero adeegga shaqaalaha kalkaaliyeyaasha caafimaadka ah iyo in uu dhex galo xaaladaha ay jirto baahi gaar ah.

### Qod. 62
### Codsi oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah.

Kabtanka markabka, xataa markab dagaal ama dooni dawladdu leedahay ama shisheeye marka ay soo gelayaan dekedda ama marsada gayiga soomaaliyeeed, waxaa khasab ku ah in ay ku hayaaan markabka ama doonida meel gaar ah ayagoo ka dul taagayo calan leh midabka jiaallaha oo muujinayo karantiil, - sida ku cad xeerka adduunka ee la xiriiro calaamadaha- kana reebayo xiriir kasta inta ka horeyso helista oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah.

Si loo helo oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah, kabtanka waxa khasb ku ah in uu weydiisto madxda badda ee markabka soo fuleyso.

Madaxda kor ku xusan oo uu caawinayo dhaqtarka dekedda ama, haddii uu maqan yahay, shaqaalaha kalkaaliyeyaasha caafimaadka ee idman, kabtanka waxaa khasab ku ah in uu tusiyo, dokumentiga caafimaadka ee uu hayo ka sokow, caddeynta caafimaadka ee ku xusan Qod. 64.

### Qod. 63
### Joogitaanka karantiilka dekedaha ama marsadaha

Waxaa awood u leh kabtanka markabka in uusan weydiisan oggolaasho in si xur ah uu u dhaqdhaqaaqo sida ku cad qodobka hore iyo in uu si xur ah badda ugu laabto, haseyeeshee waxaa laga rabaa in uu marka uu yimaado uu u caddeeyo madaxda xeebta in uu sidaas doonayo,

una geeyo caddeynta ku qoran xarafka a) faqradda koowaad ee Qod. 51, kuna hayo markabka ama doonida meel gaar ah, ayada oo uu ka taagan yahay calanka midabka jaallaha leh ee karantiilka inta uu joogo oo dhan, iyo maraakiibta ciidammada ajnabiga ah oo iyagu joogitaankoodu uusan ka badnaanan karin shan maalmood, marka laga reebo heshiisyada diblomaasiga ah ama xaaladaha kiisaska la xiriirta awoodda.

**Qod. 64**
**Caddeynta caafimaadka**

Kabtanka markabka, ka hor inta uusan weydiisan oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah, waa in uu koontroolo xaaladda caafimaad ee dadka saran markabka kana soo buuxiyo caddeyn caafimaad ee uu la saxiixayo xataa dhaqtarka markabka, haddii uu jiro.

Caddeynta waa in lagu muujiyo meesha iyo taariikhda markabka uu baxay, meelaha uu ku soo hakaday iyo taariikhdooda, tirada dadka saaran markabka oo ka kooban shaqaale iyo rakaab, xaaladda caafimaad ee markabka iyo xaalad kastoo kale ee cudur ah ee dhacday iyo wixii warar ah ee leysdhaafsaday muddaddii safarka.

Caddeynta caafimaad ee kabtannada lama oggola in la ogeysiiyo dadweynaha.

Marka madaxda xeebtu ay ka shakiso saxnimada caddeynta caafimaad ee uu bixiyay kabtanka, waxay bilaabi karaan su'aalo ay weydiinayaan shaqaalaha iyo rakaabka. Maraakiibta dagaalka waxaa markasta ku filan caddeynta uu bixiyo kabtanka.

**Qod. 65**
**Oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah**

Maraakiibta ka timaado wadammada aan lahayn dhaqaaleyn caafimaad, haddii safarka uu ahaa mid badqab ah, markabkana uusan helin warar tuhun leh intii isla safarka uu ku soo jiray, waxaa oggolaasho dhaqdhaqaaq xur ah siinayo madaxda badda markuu dhegeesto talada dhaqtarka dekedda, ama, haddii uusan joogin, shaqaalaha kalkaaliyeyaasha caafimaad ee idman, marka kabtanka markabka sida ugu dhaqsiyaha badan uu u bixiyo sida ku cad qodobadii hore. Haddiise ay muuqato:

1) — in cadadka shaqaalaha saran markabka aysan waafaqsaneyn waxa ku qoran dokumentiga markabka;
2) — in badeecadda saaran dhamaanteed ama qaar ka mid ah ay ka kooban tahay walxo laga yaabo in ay halis geliyaan caafimadka dadka;
3) — in markabka uu helay intii sfarka uu ku soo jiray warar tuhun leh;
4) — in intii uu safarka ku soo jiray la caddeeyay kiisas cudur oo aan la hubin ama dhimasho cudur aan la hubin;

Madaxda xeebtu waxay hakinayaan oggolaanshaha dhaqdhaqaaqa xur ah ilaa looga hogaansamo amarrada waaxda caafimaadka guud ay arrintaas ka soo saareyso, kadib markii warbixin deg deg ah uu arrintaas ka soo saaro khaqtarka dekedda ama, haddii uu maqan yahay, shaqaale kalkaaliye caafimaad idman.

Maraakiibta ka imaaneyso meelaha laga soo baxo ama lagu soo hakado oo u dhexeyso laba meelood oo leh adeeg caafimaad, si loogu oggolaado dhaqdhaqaaq xur ah waa in lagu cadaadiyo tallaabooyinka xaalad walbo ee ku qoran xeerka.

## CINWAANKA 8AAD
Kalluumeysiga badda

### Qod. 66
### Kalluun waaweyn iyo kuwo yar yar

Kalluumeysiga badda wuxuu uu qaybsamaa kallumeysi kalluun waaweyn iyo kuwo yar yar.

Kalluumeysiga kalluunka waaweyn waxaa loola jeedaa kuwo si gaar ah loogu kalluumeysto qalab adag ama leh shabaag lagu qabto kalluunka waaweyn iyo shabaag la jiido ee lagu isticmaalo gudaha badda ee markab kasta oo ku socdo makaaniko.

Kalluumeysiga kalluunka yar yar waxaa loola jeedaa hawlaha kaloo ee maraakiibta u habeysan qaab kalluumeysi kaas oo uu ku jiro kalluumeysiga sadaf iyo kuwo kaloo bocool ah oo looga faa'iideysan karo warshad ahaan.

Hawlaha la xiriiro maraakiibta u habeysan kalluumeysi ahaanta waxaa habeynayo qodobbada soo socdo, loona adeegsan karo oo kale muwaadhiniinta Soomaaliyeed iyo dadka ajnabiga ahba oo, sida waafaqsan heshiisyada, loo oggolaaday in ay ka kalluumeystaan biyaha dhulka dawladda.

### Qod. 67
### Hawlaha kalluumeysiga: Ruqso iyo shati

Hawlaha kalluumeysiga waaweyn ee badda dalka iyo hawlaha la xiriiro xanaaneynta aan ku meel gaarka ahayn ee kalluunka iyo xayawaanada kaloo biyokunool ah ee lagu hayo meelaha ku dhow xeebta ama biyaha dhulka dawladda ama badda, waxaa loo oggol yahay oo kelya dadka haysto ruqsada oo lagu siiyay dekreto Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Hawlaha kalluumeysiga kalluunka yar yar waxaa loo oggol yahay oo keliya dadka haysto shatiga ay bixiso madaxda maamuka badda kadib marka la bixiyo canshuurta u degsan. Muddada caadiga ah ee shatiga waa hal sano waana la cusbooneysiin karaa sannad walbo.

Hawlaha kalluumeysiga kalluunka yar yar ee qaabka iyo dhaqanka caadiga ah uma baahna shatiga kor ku qoran.

Ruqsadaha kalluumeysiga ee kalluunka waaweyn iyo shatiyada kalluumeysiga ee kalluunka yar yar waa in si cad keyd rasmi ah loogu sameeyo isticmaalkooda caadiga ah sida waafaqsan faqradda hore.

Xuquuqda kalluumeysiga ee kalluunka waaweyn ma dhaawacayo kalluumeysiga kalluunka yar yar- sidaas darteed, dhulka badda ee u dhexeeyo xeebta ilaa 500 meter ee xeebta lama oggola in lagu isticmaalo qalab kalluumeysi waaweyn.

### Qod. 68
### Ruqsada kalluumeisiga waaweyn

Ruqsada kaluumeysiga kalluunka waaweyn waxaa la oggolaan karaa muddo aan ka badneyn sagaal sano, waxaana la cusbooneysiin karaa marka wakhtiga uu dhaco muddo la mid ah taas marka uu go'aamiyo maamulka

Ruqsadda waxay ku tacluuqi kartaa hal ama wax ka badan ee aagagga biyaha; si kastaba ma siin karto kalluumeysi khaas ah, maamulka ayaa lagu aaminay in uu u cayimo meel walbo

cadadka ruqsad ee la siin karo ayada oo hadba si gaar ah loogu eegayo ka faa'ideysiga, iyo malay badnida badda iyo ayadoo leyswaaafajinaayo noocyada kala duwan ee kalluumeysi, iyo in la go'aamiyo shuruudo gaar ah oo aan loogu maarmin danta guud.

Marka ruqsadaha kalluumeysiga loo bixiyo shabaaga la jiido ee loo isticmaalo dhul balaaran oo ka mid ah badda dalka, waxaa lagu waajibinayaa qofka ruqsada la siiyay in dhulka uu ku diyaariyo qalabka lagu keydinayo laguna shaqeynayo waxsoosaarka iyo haraaga. Waajibaad la mid ah waxaa la sari karaa xataa xaaladaha kale.

Isla qasadkaas, dadka ruqsada la siiyay waxay heli karaan degaan iyo dhul dawladeed ee badda ah ee la heli karo, lagama maarmaanka u ah waxqabadka warshadaha. Dhulkaas waxaa loogu oggolanayaa isla go'aanka lagu bixinayo ruqsadda ama go'aan kaloo gadaal laga soo saaro.

Ruqsadaha waxay keeneysaa bixinta ijaar sannadeed oo la cayimayo hadba ayada oo loo eegayo dhabeecadda, ahmiyadda iyo muddada ruqsadu soconeyso, ayadoo si gaar ahna loo eegayo balaarinta ruqsada biyaha iyo dhulka ku xiriirsan marsadaha, iyo meelaha kaloo dhul badeedka ah oo lagu bixiyay sida waafaqsan faqradda hore.

**Qod. 69**
**Dib u dhigid**

Waxyaabaha aan lagu sheegin xeerkan, Cinwaanka Siddedaad, ruqsadaha qodobbada hore waa la dabaqi karaa, waayo waxay u dhigmaan qodobbada ee Cinwaanka Labaad ee qaybtan.

**Qod. 70**
**Hakinta qabashada hawlaha kalluumeysiga**

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha wuxuu awood u leeyahay in uu hakiyo, asaga oo aan bixineynin wax magdhow ah, ka kaluumeysiga meelaha biyaha badda ee la bixiyay ama meelo kooban oo ka mid ah, dan guud awgeed, ama baahi badmarineed awgeed ama baahi calaamadaha badda awgeed.

**Qod. 71**
**Qalabyada kalluumeysiga ee mamnuuca ah**

Xaalad kastaba waa mamnuuc in lagu kjalluumeysto miino ama walxaha kaloo qarxo, ama in koronto loo isticmaalo sida qalab toos ah ee wax dilo ama lagu gaggabiyo, sidoo kale waa mamnuuc in lagu tuuro ama lagu dhalaaliyo biyaha walxo wareeriyo, gaggabiyo ama dilo kalluunka iyo xayawaannada kaloo biyaha ku nool.

Waxaa kaloo mamnuuc ah in la gurbiyo iyo in la iibiyo xayawaanka la wareeriyay isla markana sidaas lagu dilay.

**Qod. 72**
**Ilaalinta kallumeysiga**

Ilaalinta kalluumeysiga iyo fulinta sharciyada habeynaayo waxaa lagu aaminay madaxda badda.

## Qaybta 2aad
Milkiyadda iyo hawl gelinta markabka

## CINWAANKA 1AAD
Lahaanshaha markabka

### Qod. 73
### Sharciga loo adeegsan karo maraakiibta

Haddi aan si kale loo xaddidin, maraakiibta waxaa lagu dhaqaya sharciga lagu dhaqo hantida guurtada ah.

Waxaa ka mid ah maraakiibta, doonyaha, aaladaha, alaabta wax lagu sharxo iyo guud ahaan dhammaan waxyaabaha loogu talo galay in muddo uu sii socdo oo la adeegsado ama wax lagu qurxiyo.

### Qod. 74
### Wadalahaanshaha markabka

Saamiga looga qayb gelayao wadalahaanshaha markabka waxaa lagu tibaaxayaa jajab.

Wax kasta oo ku saabsan danta ka wada dhexeyso milkiileyaasha ee markab, qaraarrada lagu gaaro aqlabiyadda waa ku khasab xataa tirada laga badan yahay.

Aqlabiyaddu waxay ka kooban tahay codadka dadka hantida ka wada dhexeyso oo ka wakiil ah guud ahaan wax ka badan nus qiimaha markabka, haseyeeshee iibinta ama rahan gelinta markabka, aqlabiyadda waxaa lagu gaaraa codadka dadka hantida ka wada dhexeyso oo ka wakiil ah guud ahaan ugu yaraan seddex dalool labo ee qiimahaas.

Haseyeeshee madaxda garsoorku waxay, codsiga inta badan ee kuwa hantida ka dhexeyso ka wakiil ah ugu yaraan nus qiimaha markabka ama, haddii ay jiraan sababo culus oo deg deg ah, ugu yaraan afar dalool hal qiimaha markabka, amri karaan gedista isla markabka ama in la geliyo rahan, kadib marka ay dhegeestaan milkiileyaasha kale ee ka soo horjeedo.

### Qod. 75
### Qaabka qoraallada la xiriira milkiyadda maraakiibta

Qoraallada xeerka shirkadda lagu dhisay, lagu wareejiyay hanti ama lagu baabi’yay milkjiyadda ama xuquuqo kaloo dhab ah ee markab ama qayb ka mid ah markabka waa in loo sameeyo qaab qoraal ah oo haddii aan lagu saameynin waxba kama jiraan noqoneyso.

### Qod. 76
### Xayeysiinta qoraallada la xiriira milkiyadda markabka

Qoraallada ku xusan qodobka hore saameyn uma lahan dadka kaloo sedexaad haddii aan lagu xayeysiinin laguna qorin diiwaannada lagu qoro maraakiibta, doonyaha ama sabbeeyeyaasha.

Maraakiibta iyo doonyaha xayeysiintoodu waa in lagu dhameestiro ayada oo qoraallada kor ku qoran lagu kala qoraayo dhalashada iyo ruqsadaha.

Xayeysiinta waa in la weydiisto xafiiska isqoridda. Haddii markabka ama doonida aysan ku sugneyn meeshsa la iskuqorayo, qoraalka dhalashada iyo kan ruqsada waxaa loogu sameyn karaa madaxda badda ama qunsuliyadda ee meesha markabka uu ku sugan yahay, waa haddii xafiiska iskuqoridda uu sidaas soo codsado.

### Qod. 77
### Kala horeeynta iyo mudnaanta qorista

Haddii qoraallo badan la xayeysiiyo sida waafaqsan qodobbada kor ku qoran, kala horeysiintoodu waxaa lagu kala saarayaa taariikhda lambarka lagu guuriyay ama lagu qoray diiwaanka lagu qoro maraakiibta, doonyaha ama doonyaha sabeeyo.

Haddii uu iskhilaafo qoritaanka lambarka ama diiwaanka iyo qoraallada warqadda dhalashada ee maraakiibta ama ruqsada ee doonyaha, waxaa mudnaan yeelanayo waxa ka muuqdo lambarka ama diiwaanka wax lagu qoro.

## CINWAANKA 2AAD
Hantiilaha

### Qod. 78
### Caddeynta hantiilaha

Hantiile markab waa qofka maalgeliyo markab hal safar iyo wax ka badan ama ujeedooyinka loogu talagalay, asaga oo siinaayo cunto iyo qalab kaloo aan looga maarmin safarka, ha noqdo isaga milkiile markab ama yuusan noqonine, wuxuu qaadayaa ama dadka kale oo uu kuu aaminay ay qaadayaan xilka markabka.

Hantiilaha aan milkiile markab ahayn, inta uussan qaadin masuuliyadda markabka, waa in uu geeyo xafiiska qorista maraakiibta caddeyn in uu yahay hantiile. Haddii hantiiluhu uu geynwaayo, caddeynta waxaa sameynkaro milkiilaha.

Haddii ay isku mar caddeymuhu wada sameeyaan hantiilaha aan milkiilaha ahayn iyo milkiilaha, xafiiska qorista maraakiibtu wuxuu qaadanayaa caddeynta hantiilaha ayada oo la raacayo habraaca gundhigga qoraalka oo ay tahay xafiisku in uu saxiixo isdhexgalka
caddeymaha haddii kale, xafiiska diiwaangelinta wuxuu heli kara cadeynta hantiilaha maraakiibta oo kaliya marka la siiyo nuqulka asalka ah ee milkiyadda oo tilmaameyso in uu isticmaalo markabka.

Caddeynta hantiilaha markabka waxaa lagu guurinayaa lambarka ama diiwaanka la iskuqoro.

### Qod. 79
### Uqaadasho Hantiile

Haddii la waayo caddeynta hantiilaha ee ku xusan qodobka hore, waxaa loo qaadanayaa hantiile, ilaa laga helo caddeyn lid ku ah, milkiilaha markabka. Haddii ay jiraan milkiileyaal badan, waxaa loo qaadanayaa hantiileyaal, ilaa laga helo caddeyn lid ku ah, inta u dhiganto saamigooda ee hantida ka wada dhaxeyso

**Qod. 80**
**Magacaabid wakiil**

Marka hantiilahu uusan ciwaan ku lahayn ama deganeen goobta laga diiwaan gelinaayo markabka ama doonta, ama marka isla hantiiluhu uu yahay kabtanka, hantiiluhu waa in uu u wakiisho qof meesha deggan si uu wakiil uga noqdo xafiiska la iska diiwaangelinayo hortiisa.

**Qod. 81**
**Masuuliyadda hantiilaha**

Hantiilaha ayaa masuul ka ah falalka shaqaalaha markabka iyo waajibaadyada uu galay kabtanka markabka kuwa ku saabsan markabka iyo rarka
Si kastaba ha ahaatee, hantiiluhu kama jawaabayo gudashada waajibaadyada kabtanka ee la xiriro gargaarka iyo samatabixinta, kamana jaawaabayo oo kale waajibaadyada shrcigu ku waajibinayo kabtanka ka madaxa safarka ahaan.

**Qod. 82**
**Xadeynta deynta hantiilaha**

Marka laga reebo waajibaadyada ka imaanayo ula kaca ama ulakac la'aanta culus iyo kuwa ka yimaado heshiisyada shaqaaleynta shaqaalaha markabka, hantiilaha markabka wuxuu masuul ka yahay:

a) — ilaa qiimaha markabka ama nooliga:

1) — mushahar siinta gargaarayaasha iyo samatabixiyeyaasha
2) — saamiga dulsaaran ee uu kaga qayb qaadanaayo cilladaha caadiga ah ee matoorrada,
3) — marka laga reebo in isagu uu si cad u fasaxay iyo in uu oggolaaday, waajibaadyada ka dhashay heshiisyada la galay ama hawlo uu fuliyay kabtanka markabka iyada oo ay ugu wacan tahay awooddiisa sharci awgeed, oo ka baxsan meesha laga hawl galayo ee baadida dhabta ah ee xafididda markabka ama sii wadashadiisa safarka, bishardi in baahiyahaas aysan ka dhalan in aysan kaafi aheen ama cillad hawl galka ah ama sahayga ah ee bilowga safarka.

b) — tartan ilaa lacag somaali 160 tankii ee markabka culeyskiisa:

1) — gunnada dadka seddexaad la siiyay oo sabab ay u tahay dhibaato ka dhalatay dhulka ama biyaha dhexdiisa ee uu sababay kabtanka ama shaqaalaha markabka;
2) — gunnada la bixiyay sababo la xiriira dhaawacyo sababay culeyska
3) — waajibaadyada ka dhashay foojarka raridda
4) — gunnada la bixiyay oo sabab u tahay khasaaro la xiriiro badda oo la galay ayada oo la fulinaayo heshiis;
5) — waajibaadyada ka yimid khasaaro sababay hawlaha dekedda iyo waajibaadyada iyo hawlaha la xiriiro qaadista haraaga markab degay;

c) — tartan ilaa lacag soomaali oo dhan 160 tankii ee markabka culeyskiisa marka lagu daro lacagta ku qoran xarafka b), ee magdhowga dadka dhibka soo gaaray ama dadka dhaxalkiisa

iska leh, marka ay ku timaado geeri ama dhaawac shaqsiyadeed ee qof kastoo ka dhashay sabab uu leeyahay kabtanka ama shaqaalaha. Lacagtaas dheeraadka ah ayaa si kastaba ha ahaatee loo qorey oo keliya maraakiibta ka badan saddex boqol tan culeyskooda.

**Qod. 83**
**Xisaabinta culeyska iyo nooliga sida waafaqsan xuduudda deynta hantiilaha markabka**

Sida waaafaqsan amarka ku xusan qodobbada hore, culeyska waxaa laga xisaabiyaa:

1) — maraakiibta iyo unugyada ku socdo quwadda makaanikada ah ee tankooda saafiga ahna cufkiisa la kordhiyay sababtoo ah booska uu ku fadhiyo qalabka mashiinka ah, waxaa laga gooyay tanka culaabta guud si loo helo tanka saafiga ah
2) — qaybaha kale waxaa laga xisaabinayaa tanka saafiga ah;

Sida waafaqsan xarafka a) ee qodobka hore nooliga waxaa laga xisabinayaa mar walbaba toban boqolkiiba ee qiimaha markabka safarka bilowgiisa, ha faa'iido nooli ama yuusan faa'iidine.

**Qod. 84**
**Qiyaasta qiimaha markabka**

Hantiilaha rabo in uu isticmaalo xuduudka masuuliyadiisa ilaa qiimaha Markabka ama nooliga, waxaa laga rabaa in uu keeno caddeynta qiimahaas.
Qiyaasta markabka waxaa laga sameynayaa:

1) — marka iskudhac ama shil kale uu dhaco, ayadoo la xurmeynaayo dhamaan amaah bixiyeyaasha ay khuseyso, xattaa haddii heshiis uu yahay, ayna soo ifbaxeen ka hor inta uusan imaanin dekedda ugu horeyso ee uu ku hakaday shilka kadib, sidoo kale ayada oo la xurmeynayo amah bixiyeyaasha ka soo jeedo cillad caam ah oo ay xaaladdaas ka dhalatay marka markabka uu soo gaaro joogsiga koowaad. Haddii, wakhtigaas ka hor, shil cusub oo ka madaxbanaan kii hore, uu yareeyo qiimaha markabka, qiime yareeyntaas looguma xisaabinayo amah bixiyeyaasha ay khuseyso shilkii hore. Hoos u dhigista qiimaha laguma xisaabinayo iyadoo la tixgelinayo deynta la xiriiro shilkii hore.

   Shilalka sida lama filaanka ah uu dhacay muddadii uu markabka joogay dekedda, qiimeynta waxaa lagu sameynayaa xaaladda markabka uu ku sugnaa dekedda shilka kadib.
2) — haddii ay ku tacluuqdo deyn la xiriirto rarka ama deyn ka dhalay ceymiska rarka, kana madax banana xaaladaha ku xusan n. 1), qiimeynta waxaa lagu sameynayaa xaaladda markabka ee dekedda badeecadda u socoto ama meesha safarka uu ku go'ay. Haddii badeecaddu meelo kala duwan u socotay khasaarahana loo nisbeynkaro sabab keliya, qiimeynta waxaa lagu sameynayaa xaaladda markabka ee dekeddii ugu horeysay ee meelaha uu ku soo hakaday.
3) — xaaladaha kaloo dhan ee ku xusanQod. 82 qiimeynta waxaa lagu sameynayaa xaaladda markabka ee dhamaadka safarka. Marka hantiilalaha ama kabtanka ay weydiistaan, maamulka garsoorka ee meesha lagu sameynayo qiimeynta ama madaxda qunsuliyadda ee dibedda, waa inay magacaabaan khabiir si loo xaqiijiyo qiimaha la soo sheegay.

**Qod. 85**
**Amaahbixiyeyaal isbiirsaday**

Amaahbixiyeyaasha loo nisbeynayo hal musiibo in ay wada qabsatay iyo kuwo wax musiibo ah aysan khuseyn kuwaasoo qiimaha markabka loogu cayimaayo hal goob hakasho, waxayna ka wada qayb qaadanayaan lacagta uu hantiiluhu masuulka uga yahay xiriirkooda, ayada oo la tixgelinaayo awoodda uu leeyahay qofka waxa xaq u leh, taasina waxay ku xiran tahay darajada amaahda loogu balan qaaday ama uu ku helay mudnaanta taas oo ku xiran heerkooda darajo ee sheegashooyinka deynta lagu xaqiijiyay mudnaanta.

**Qod. 86**
**Wax-ku-oolnimada dammaanada uu bixiyo hantiilaha**
**marka la afduubto markabka**

Marka la afduubto markabka, damaanadda lagu bixiyay tartanka ilaa xadka ugu sarreeyo ee masuuliyadda, waxay anfac u leedahay dhammaan amah bixiyeyaasha kuwaas oo xadkan laga horjoogsan karo.

Haddii markabka markale la afduubto, madaxda garsoorku waxay amri karaan kala laabasho, haddii hantiiluhu uu caddeeyo in uu ballan qaaday ilaa xadka ugu sareeyo ee masuuliyaddiisa, in ballan qaadkaas uu ballan qaaday uu maqsuudinayo amaahbixiyuhuna uu haysto kalsooni water leh ee uu isticmaali karo.

Haddii damaannadda uu bixiyay hantiilaha ay ka heer hooseyso ama damaanado kale si isdabajoog ah loo weydiistay, wixii la xiriiro arrimahan waxaa nidaaminayo heshiiska dhinacyada, ama, haddii uusan jirin, waxaa go'aan ka gaarayo madaxda garsoorka si loo reebo in laga baxo xuduudka masuuliyadda.

**Qod. 87**
**Xaaladaha aan la oggolaan karin afduub iyo warqado fulineed**

Looma oggola amaahbixiyeyaaasha, oo la horjoogsan karo ilaa xadka masuuliyadda, afduub iyo warqado fulineed midkoodna, haddii ay hore u bilaabeenna waa in ay joojiso madaxda garsoorka haddii hantiiluhu uu dhigay curaar u dhiganto qiimaha ku xusanQod. 84, korsaar sharci ah laga soo bilaabo maalinta amah bixiyeyaasha la kala baxay ilaa taariikhda dibaajiga iyo maalinta la bixiyay kharajka dacwada iyo kharajka xaraashka.

Haddii masuuliyadda hantiilaha ee waxqabad ama xaqiiqooyinka la xiriiro uu ka keeno codsi faa'iido u ah xadidaada ee aan weli la qeexin, wuxuu awoodi karaa, marka ay madaxda garsoorku go'aamiso iyo qaabka garsoorku tilmaamo, in uu beddelo lacagtii debaajiga kuna beddelo damaanad adag.

**Qod. 88**
**Codisga lagu hubinayo amaahda iyo qaybinta lacagta ku waajibtay hantiilaha**

Shan maalmood gudahood maalinta la dhigay dibaajiga ama la bixiyay damaanadda ku qoran qodobka hore, hantiiluhu waa in uu u geeyo garsooraha maxkamadda gobolka ee awoodda dhuleed u leh codsi si uu u hubiyo amaahda una qaybiyo lacagta u waajibtay.

Codsiga hantiilahu waa in lagu soo tixo amaahbixiyeyaasha isagu uu yaqaanno. Haddii hantiiluhu uu ka dhaco wakhtiga isaga oo aan keenin codsiga, waxaa codsiga keeni karo qof kasta oo mid ah amaah bixiyeyaasha.

**Qod. 89**
**Amrista amaahbixiyeyaasha**

Garsooruhu waa in uu si deg deg ah u wargeliyo, kuna qoro dhambaal xafidan oo rasiid soo celin in la helay ahna leh, amaahbixiyeyaasha la amray in ay ku keenaan soddon maalmood gudahood, oo haddii ay ku keeniwaayaan muddadu ay ka dheceyso, qof kasta amaahdiisa iyo codsiga lagu meeleynayo qaabka qorshaha loo kala qaybinayo.

Wargelin la mid ah wuxuu u sameynayaa amaahbixiyeyaasha aan la garaneynin, asaga oo ogeysiis ugu baahinayo Faafinta Rasmiga ah, iyo qaab kasta oo loo arko in u qalmo.

Amaahbixiyeyaasha deggan dalka dibeddiisa, garsooruhu waa in uu u xaddido qaabab gaar ah oo lagu wargelinayo ama loo baahinayo amarka una qabanayo daneeyeyaasha wakhti ku haboon oo lagu soo dhameystiraayo waxa laga rabo oo ku qoran faqradda hore.

**Qod. 90**
**Qoraalka lagu caddeynayo amaahda iyo qaabka loo qaybinayo**

Qoraalka garsooraha ee lagu caddeynayo amaahda waxaa la geynayo xafiiska diiwaangelinta. Marka la geeyo waa in la wargeliyo, ayada oo loogu dhejinayo looxa lagu baahiyo ogeysiiska ee xafiiska laga qoro maraakiibta.

Haddii shan iyo toban maalmood gudahood maalintii la keenay qoraalka uu soo baxo muran ku saabsan amaahda ama caddeynta qiimaha markabka iyo nooligaba, garsooruhu dib ayuu u bilaabayaa wuxuuna isugu yeeraa dhinacyada, wuxuuna muddeynayaa dacwada asaga oo dhageysanayo dhinacyada dacwada maxkamadda horteeda.

Haddii uu go’aan ka gaaro doodda ama muddada ku qoran qodobka hore ay dhamaato ayada oo aan dood soo bixin, garsooruhu wuxuu sameynayaa qaabkii loogu kala qaybin lahaa lacagta amaah-bixiyeyaasha tartamayo ayada oo la tixgelinayo awoodda uu leeyahay qof wax xaq u leh. Mashruucaas waxaa la dhigaayaa xafiiska diiwaan gelinta maxkamadda, si qof kasta oo dan ka leh uu arki karo nuqulna uu u heli karo.

**Qod. 91**
**Ansixinta mashruuca kala qaybinta**

Shan sano marka ay ka soo wareegto maalinta la soo dhigay mashruuca kala qaybinta, garsooruhu wuxuu isugu yeerayaa amaah- bixiyeyaasha asaga oo u qoraayo dhambaal xafidan oo rasiid soo celin in la helay ahna leh si loo doodo loona ansixiyo mashruucaas, asaga oo ku casumaayo xataa hantiilaha si uu u soo dhexgalo kulanka.

Haddii dhamaan amaahbixiyeyaasha soo xaadiray ay oggolaadaan mashruuca hantiiluna uusan soo jeedin wax gaar ah, wuxuu sharciyeynayaa mashruuca.

Haddii mid ama dhamaan amaahbixiyeyaasha ay soo xaadiri waayayaan maalinta iyo saacadda loo qabtay, maqnaashahaas wuxuu ka dhigan yahay oggolaasho mashruucas.

Haddii kala qaybinta oo dhexdeeda lagu jiro, soo jeedin ay ka dhexdhaliso khilaaf amaahbixiyeyaasha la isku raacay ama qaar ka mid ah iyo hantiilaha, garsooruhu wuxuu kulan

isugu yeerayaa dhinacyada kala qaybinta lacagtana dib ayuu u dhigayaa ilaa lagu dhawaaqayo xukun fulin ee la xiriiro in laga heshiiyay khilaafkii dhashay ama khilaafyadii in aan laga heshiinin.

## CINWAANKA 3AAD
Kabtanka iyo shqaalaha markabka

### Qod. 92
### Jiheynta badmaaxidda ee markabka

Kabtanka markabka ayaa, si gaar ah u leh, jiheynta maamulka iyo badmaaxidda markabka. Xataa marka uu isticmaalayo naakhuude, waa in uu shaqsiyanjiheeyaa markabka marka uu gelayo ama ka baxaayo dekedda iyo xaalad kasta oo kale oo baxmaaxiddu ay leedahay dhibaato.

Haddii uu geerioyoodo ama uu maqnaado ama dhibaato ay ku timaado kabtanka inta lagu jiro baxmaaxiddu, maamulka markabka waxaa iska leh qofka kala sareyn ahaan u soo xigo darajada markabka ee adeegyada markabka korkiisa.

### Qod. 93
### Waajibaadka kabtanka, safarka ka hor iyo inta safarka lagu jiro

Inta aan la safrin ka hor kabtanka markabka waa in shaqsiyan uu hubiyo in markabka uu ku sugan yahay xaalad ku haboon in uu safro, in shaqaalahu diyaar yihiin, iyo in si wanaagsan loo raray isla markaana la khannigeliyay.

Haddii inta safarka lagu jiro ay baxaan dhacdooyin khatar gelin karto rarka, kabtanka waa in uu raadiyo qaab uu ku badbaadiyo asaga oo isticmaalayo wax kasta ee uu haysto ama uu ku leexdo deked ama marso ama uu weydiisto kaalmo maraakiibta kale.

Haddii loo baahdana uu dayaco, tuuro ama uu waxyeeleeyo qayb ka mid ah markabka ama rarka, waa in sida ugu suurtogalnimo badan uu ka bilaabo markabka kadibna rarka, asaga oo mudnanta siinaayo waxyaabaha qiimahoodu yar yahay iyo kuwa ku waxtarka badan in la dayaco ama ka waxtar yar kuwa daruuriga u ah in la keydiyo.

Kabtanka marka laga cararayo msrkabka waa bin uu ahaado qofka u dambeeyo eek a cararo markabka, asaga oo dadaal kasta ku bixinayo sidii uu badbaadin lahaa dokumentiga markabka iyo alaabaha kaloo qiimaha leh ee xifdintooda lagu aaminay.

### Qod. 94
### Haynta dokumentiyada markabka

Kabtanka markabka waa in uu si nidaam ah ugu xafido uguna xanaaneeyo markabka dokumentiga la xiriiro markabka, shgaqaalaha, rakaabka iyo rarkaba.

## Qod. 95
## Matalaadda iyo awoodaha qaanuuneed

Kabtanka waxaa magacbayo hantiilaha isaga ayuuna matalayaa. Wuxuuna awood ku leeyahay dhammaan dadka daneynayo markabka iyo rarka wuxuuna awooddiisa u isticmaalayaa sida sharciga uu u siiyay.

Meelaha uusan joogin hantiilaha ama qof ka wakiil ah oo leh awoodda loo baahan yahay, kabtanka wuxuu sameynayaa dhamaan qoraallada loogu baahan yahay danaha markabka iyo safarka; wuxuu kaloo sameyn karaa qaadashada iyo ruqseynta shaqaalaha.

Xaaladaha ku xusan faqradda hore, kabtanka wuxuu, xaaladaha deg degga ah, ogeysiinayaa go'aannada ama uu ku bilaabayaa ama sii wadayaa dacwo magaca ama danta hantiilaha ee arrimaha ku saabsan markabka iyo safarka

Dadka kaloo seddexaad, marka laga reebo xaaladaha hantiilaha ama wakiilkiisu ay joogaan oo leh awoodda loo baahan yahay, waxay awood u leeyihiin in ay ogeysiiyaan kabtanka naftiisa ama ay ku furan dacwo ku saabsan falal shaqaalaha ee la xiriiro markabka iyo safarka.

Hantiilaha wuxuu soo koobi karaa sua'alaha uu soo jeediyay kabtanka ama suaalaha isaga liddiga ku ah, wuxuu sidoo kale duri karaa xukunnada iskhilaafsan ee kabtanka.

## Qod. 96
## Baahida lacageed, cunto iyo qalabeyn inta safarka lagu jiro

Haddii, inta safarka lagu jiro, ay soo baxdo baahi lacageed oo loogu baahan yahay in lagu soo gado cunto, in lagu dayactiro ama baahi deg deg ah ee markabka ama lagu sii wado safarka, kabtanka markabka waa in sida ugu dhaqsiyaha badan u ogeysiiyo hantiilaha.

Haddii taasi ayna suurtoobeyn ama hantiiluhu la wrgeliyay haseahaatee uusan bixin hantidii loo baahnaa ama uusan soo bixinin amarradii loo baahnaa, kabtanka wuxuu amar weydiisanayaa madaxda garsoorka ee dalka, hadii dibedda ay tahayna madaxda qunsuliyadda, haddii ayna qunsuliyad lahayna, madaxda degaanka, si uu qaato amaah lacagaha loo baahan yahay ama uu ula galo hashiis kuwa raashiinka dadka siiyo, qalabka ama farsamada gacanta, ama siiyo rahan ama uu u iibiyo cunto, alaab ama qaalab aan looga maarmin safarka markabka.

Haddii inta safarka lagu jro ay cuntadu dhamaato ama waxyaabo kaloo aan looga maarmin socodka, kabtanka waa in uu ka taxadaro sahayda, kana codsado sahay maraakiibta uu la kulmo ama uu ku xirto meesha ugu dhow xattaa haddii loo baahdo uu ka leexdo khadka.

Xaaladaha ay jirto baahi deg deg ah, kabtanka wuxuu isticmaali karaa baahida markabka darteed badeecadda saran markabka, haseyeeshee xaaladahaas waa in uu hantiiluhu uu celiyo dadka iska leh xaqa qiimaha badeecadda inta ay joogto mar allaale iyo marka ay tagaan meesha ay u socdaan.

## Qod. 97
## Maamulista danaha dadka iska leh rarka

Kabtanka waa in, marka ay tahay lagama maarmaan waafaqsanna baahida safarka, uu ilaaliyo danaha dadka iska leh rarka.

Haddii, si loo reebo ama loo yareeyo khasaaro, loo baahdo in la qaado tallabo khaas ah, kabtanka markabka waa in uu u sheego dadka badeecadda daneeynayo iyo dadka wakiilka u ah ee

joogo meel uu isagu ogyahay iyo in uu raaco amarkooda; haddii la waayo, waa in uu sida ugu wanagsan waxqabasho ugu dhaqaaqo.

**Qod. 98**
**Inta uu ka koobanyahay kuuliga**

Kuuliga markabka waxay ka koobanyihiin taliyaha iyo dhammaan dadka kale ee loo shaqaaleeyay adeegga markabka.

Iyadoo la eegayo xirfadda hagidda iyo adeegyada ay qabanayaan, sidoo kale waxa ku saabsan culayska nooca iyo awoodda qaybta mashinka, madaxa degmada wuxuu go'aamiyaa, marka uu dhageysto gaadiidlaha tayada iyo inta ay yihiin tirada iyo wax qabadka kuuliga. Kuuliga markabka ee u xilsaaran khadka iyo marinada oo ay ku jiraan hakadyada Dalka dhexdiisa waa in ay ka koobnaadaan kuuli Soomaali ah, kolba sida uu jaangooyo Wasiirka Arrimaha Dhaaqaalaha kadib marka uu dhageysto gaadiidlaha, bilowga diiwaangelinta markabka marka la siiyo lambarka Soomaalied.

Iyadoo maanka lagu hayo nooca safarka la galaya iyo culayska, dooni kasta inta ay ka koobanyihiin shaqaalaha saaran waxaa lagu salaynayaa hadba dhaqanka maxalliga ee madaxda badda ee goobta laga rarayo oo ay ku jirto tirada shaqaalaha u qoran oo u dhexeeya ugu yaraan inta lagama maarmaanka ah iyo ugu badnaan inta aan la dhaafi karin ee la xiriira ammaanka safarka badda iyo ilaalinta nafta aadanaha.

Kuuliga sabbbeeyeyaasha waa in uu ahaada mid ku habboon dhaq-dhaqaaqa caadiga ee hawsha sabbeeyaha uu qabanayo.

**CINWAANKA 4AAD**
Heshiiska shaqaalaynta

**Qod. 99**
**Noocyada kala duwan ee heshiiska shaqaalaynta**

Heshiiska shaqaalaynta waxaa la geli karaa:

a) — safar cayiman ama safarro badan;
b) —waqti
c) — waqti aan la xaddadin; mushaarka la siinayo qofka la shaqaaleeyay wuxuu noqon karaa:
d) — lacag cayiman oo la siinayo safarka oo dhan;
e) — lacag la siiyo bisha ama xilli waqti kale;
f) — qaab uu kaga qaygalayo faai'iidada safarka laga helayo.

Heshiiska shaqalaynta dhinaca safarka, waxaa loola jeeda, safarka dekedda laga raray illa uu ka gaarayo halka ugu dambaysa ee uu u socdo, iyadoo ay ku jiraann meelaha dhexe ee la sii maro, sidoo kale meelaha uu ka soo gudbay si uu gaaro dekedda laga soo rarayo Faai'iidada safarka waxaa loola jeeda badeecada saafiga iyo lacagaha kale oo laga helo safarka.

Heshiiska waqtiga xaddidan iyo midka ku saabsan safarro badan lama geli karo waqti ka badan hal sano; haddii la galay sanad wax ka badan , waxaa loo qaadanayaa mid ah waqti aan la xaddadin.

Haddii, la galo safarro badan ama heshiisyo badan ee waqti xaddidan, ama heshiisyo midka ama nooca kale, oo shaqaaluhu hawsha qabanaya si aan kala go' lahayn oo uu ka hoos

shaqaynayo isla gaadiidlaha waqti ka badan hal sano, xiriirka shaqaalayntu waxaa loo qaadanayaa in uu yahay midka waqtiga aan xaddidnayn.

**Qod. 100**
**Qaabka heshiiska**

Heshiiska shaqalaynta ee ka dhexeeya taliyaha iyo gaadiidlaha ama midka ka dhexeeya taliyaha ama gaadiidlaha iyo dadka kuuliga waa in uu ahaadaa qoraal, iyago ay goobjoog ka yihiin masuuliinta badda Dalka la joogo, ama madaxda qunsuliyadda, haddii la joogo dalka dibbadiisa, iyadoo isla markaas la muujinayo kaalinta kuuligu markabka.
Heshiiska shaqaalaynta waa in ay saxiixaan taliyaha ama gaadiidlaha iyo qofka la shaqaaleysiiyay, haddii kuwani aanay awoodin ama aanu saxiixi karin, waa in ay saxiixaan laba markhaati oo aanay ku jirin kuuliga.

Shaqaalaynta kuwa aan qaangaarka ahayn waa in ay u saxiixaan dadka ka masuulka ah ama ilaaliyaha, ha ahaadaan soo dhexgalkooda shaqsiga marka la qorayo, ama caddaynta oggolaashaha lagu muujiyay warqadda tasdiiqa, taaso lagu keydinayo masuuliyiinta kor lagu soo sheegay.
Dadka ka yar da’da 18 jirka looma shaqaleyn karo adeegga makiinadda, loomana xilsaari karo adeeggaas.

Inta aan la saxiixin heshiiska waa in loo akhriyaa loona fasiraa qofka la shaqaalaynayo; xilgudashda qaabkaas waa in lagu sheegaa heshiiska isaga ah.
Heshiiska ku saabsan doonyaha amaa sabbeeyaasha wuxuu noqon karaa mid afka ah, iyadoo loo eegayo hab-dhaqanka.

**Qod. 101**
**Keydinta heshiiska**

Qoraalka asalka ee heshiisyada shaqaalaynta waxaa keydinaya masuuliinta badda ama qunsuliyadda, nuqul la tasdiiqiyay ee heshiisyadaas waxaa lagu keydinayaa dokumentiyada markabka.

Haddii shaqaalayntu ay ka dhacday dibadda, goob aanay xarun ku lahayn qunsuliyaddu, heshiisku waa in qoraal lagu sameeyaa iyadoo ay joogaan laba markhaati kuwaaso wax ka saxiixaya heshiiska; waxaana lala keydinayaa dokumentiyada markabka.

**Qod. 102**
**Waxa ku jira heshiiska**

Heshiiska shaqaalaynta waa in lagu muujiyaa:

a) — markaba uu qofka la qoray shaqada ka qabanayo;
b) — magaca iyo tilmaamaha qofka la qoray, meesha uu degganyahay, lambarka qoritaanka (36), haddii uu leeyahay, shahaadada xirfadeed uu leeyahay (38);
c) — xilka iyo hawlaha uu markabka ka qabanayo;
d) — safarka ama safarrada la galayo iyo maalinka la qoray oo ay tahay in uu shaqada qabto, haddii qoristu ay ku saabsantahay safar; waqtiga laga bilaabayo iyo heshiisku inta u soconayo, haddii qoristu ay tahay waqti xaddidan; waqtiga laga bilaabayo heshiiska, haddii qoristu ay ku saabsantahay waqti aan la xaddidan;

e) — qaabka iyo halbeegga mushaarka;
f) — goobta iyo taariikhda la soo gunaanadayo heshiiska.

Haddii heshiiska qoritaanka aaan la lagu xusin safar ama waqti xaddidan, waxaa lagu dhaqayaa sharciga ku saabsan heshiiska waqtiga aan la xaddadin.

**Qod. 103**
**Waajibaadka shaqaalaha la qoray**

Dadka ka mida kuuliga lagama oonayo in ay qabtaan shaqa ka duwan midda loo oray. Sikastaba taliyaha markabka, iyadoo loo danaynayo safarka wuxuu awood u leeyahay si ku meelgara in uu u xilsaaro kuuliga hawl ka duwan kuwa loo shaqaaleeyay, inkastoo anay u qalmin kaalintooda xirfadeed iyo darajada ay markabka kula joogaan.

Haddiba ay jirto baahi xagga ammaanka safarka, shaqaalaha waxaa loo xilsaari karaa hawl kasta.

Dadka kuuliga markabka ka mida ee qabta hawlo ka duwan kuwii loo qoray, waxay xaq u leeyihiin mushaarka ugu badan ee shaqadaas u sugnaaday.

Dadka kuuliga oo uu ku jiro taliyaha, markabka kuma soo rari karaan badeeco ay iyagu leeyahiin, iyadoo aan oggolaasho laga haysan gaadiidlaha ama qof wakiil ka ah.

Qofka kuuliga ee ku xadgudba mamnuucidda faqradda aan soo sheegnay wuxuu bixinayaa laba-jibbaar qiimaha kharshka ka jira goobta iyo taariikhda la soo raray safarkaas isaga ah marka loo eegayo isla nooca badeecadaas iyo isla nooca midka aanay ahayn in la soo qaado iyadoo dhibaato ku ahayn madhowga dhibka.

**Qod. 104**
**Sida loola dhaqmayo qofka dhaawacma ama jirrada**

Marka laga soo tago mararka xeerar gaara ku waajibinayaan gaadiidlaha in uu ka caymiyo kuuliga dhaawacyda iyo jirrooyinka, marka qofka shaqaalaha sababa la xariira shaqada uu ku dhaawacmo ama ku jirrado, wuxuu xaq u leeyahay in la daaweeyo muddada uu daawada u baahanyahay iyadoo kharashka uu qabo gaadiidlaha, laakiin markasta waa in aany muddadadu ka badnaan affar bilood oo laga soo bilaabo taariikhda uu markaba ka degay.

**Qod. 105**
**Sida loola dhaqmayo marka shaqaalahu geeriyoodo**

Marka qof shaqaale ah geeriyoodo inta safarka lagu jiro:

a) — haddii loo shaqaaleeyay mushaar joogta ah safarka oo dhan, dhaxaltoyadiisa waxay xaq u yeelanayaa kala bar mushaarkiisa haddii uu geeriyooday sii socodka safarka ama xilliga imaanshaha; waxayse xaq u leeyihiin mushaar buuxa haddii uu geeriyooda soo noqoshada;
b) — Haddii mushaarkiisu bille ahaa ama waqti xilli kale, waxaa la siinayaa mushaarka illaa maalinta uu geeriyooday;
c) — haddii loo shaqaaleeyay in uu ka qaybgalo faai'iidada safarka, waxay xaq u leeyihiin qaybta ku soo aadday marka uu geeriyooday ka dib bilowga safarka.

**Qod. 106**
**Dhammaadka Heshiiska**

Heshiiska shaqaalaynta la galay hal safar ama safarro badan sharciyan waxay dhammaanayaan marka la gaaro safarka ama safarrada ugu dambeeya sida ku qoran heshiiska. Heshiiska shaqaalaynta waqtiga xaddidan wuxuu dhammaanaya sharciyan marka ay dhammaato waqtiga lagu sheegay heshiiska, Sikastaba, haddii muddadu ay dhammaato inta safarka lagu jiray, waxaa loo qaadanayaa in uu heshiiska sii soconayo inta laga gaarayo dekedda ugu dambaysa ee loo socday.

Heshiisyada la soo sheegay iyo heshiisyada shaqaalaynta waqtiga aan la xaddadin, waxay dhammaanayaan markasta oo ay doonaan gaadiidlaha ama qofka shaqaalaha, waa haddii se la bixiyay ogaysiiska digniinta muddada ku qoran heshiiska ama, haddii aanu jirin hab-dhaqan. Sikastaba shaqaalaha waqtiga aan xaddidnayn waxay ikhtiyaarkaas adeegsan karaan keliya marka uu tago dekedda ugu dambeysa ee uu u socday.

**Qod. 107**
**Baabi'inta heshiiska**

Noc kasta oo ka mida heshiiska shaqaalaynta sharciyan waxay baaba'ayaan:

a) — marka gebi ahaan markabka la waayo ama si buuxda u shaqayn waayo muddo ka badan lixdan maalmood, sababo shil badeed awgeed;
b) — la lumiyo jinsiyad-qarameedka markabka;
c) — makabka oo xaraash maxkamadeed ku dhaco;
d) — marka shaqaalaha sababo jirro ama dhaawaca awgeed markabla looga dejiyay ama aanu dib u buuxin karin kaalintiisi marka markabku ka baxayo dekad si uu deked kale ugu baqoolo;
e) — dekedda uu ku socday ay ku timid sharid ganacsi, ama markabkii oo la xannibay, ama sabab kale, oo aanu masuul ka ahayn gaadiidlaha oo aanay suurtagal ahayn in markabku safarkiisa sii wato;
f) — markabka oo la fariisiyo lana socodsiin muddo aan ka yareyn labaatan cisho ama fariisinta xilliedka doonta ama sabbeeyaha, oo la fariisiyo si loo daayactiro muddo aan ka yareyn soddon cisho;
g) — marka la tirtiro Lambarka qofka shaqaalaha;
h) — marka qofkii hayay masuuliyadda shaqaalaha ama ilaalinta uu ka noqdo oggolaashaha diiwaangelinta lambarka da'-yaraha;
i) — marka laga soo tago arrimaha lagu soo sheegay lambarada kore qofka shaqaalaha, aanu markabka ka haynay xilkiisi ka hor inta aanu markbku soo bixin;
j) — marka masuuliinta badda ama qunsuliyadda, ay amraaan in si deg-degga markabka laga soo dejiyo, codsi ka yimid qofka shaqaalaha awgeed, haddii taliyuhu uu kula kacay xadgudub awoodeed, ama uu ka maagay iyadoo xadgudubkaas ay dad kale ku kaceen, amase sabab la'aan aanu siin raashinkii iyo adeegyadi caafimaad sidii loogu baahnaa.

**Qod. 108**
**Lacagaha uu mutaystay qofka shaqaalaha marka shaqadu dhammaato iyo heshiiska marka la baabi'iyo**

Marka shaqadu dhammaato iyo heshiiska marka la baabi'iyo sida ku cad qodobada 106 iyo 107:

1) — haddii lacagaha la mutyaystay lagu saleeyay safar, shaqaaluhu wuxuu leeyahy qaybta lacagta lagu heshiiyay, iyadoo la xisaabinayo shaqada uu qabtay marka loo eego inta uu la ekaaa safarka ugu dheer ee la saadaalin karay marka heshiiska la galay;
2) — haddiii lacagaha la mutaystay lagu saleeyay bil ama waqti kale wuxuu mudanyahay in la siiyo illaa maalintii shaqada uu qabtay;
3) — haddii lacagta la mutaystay lagu saleeyay qaabka ka qaybgalka faai'iidada safarka, qofka shaqaalaha waxaa loo xisaabinayaa inta ay la egtahay hawsha uu qabtay, marka loo eego inta uu la ekaa safarka ugi dheer oo la saadaalin karay markii la galay heshiiska, laakiin marka heshiisku burburo sida ku cad lambarka 10) ee qodobka 107 waxaa la siinaya xisaabtiisa oo dhan.

**Qod. 109**
**Dal ku soo celinta shaqaalaha**

Marka heshiisku shaqaalaynta uu dhammaado ama burburo oo uu ka dhaco deked ka duwan middii laga soo qoray, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay kharshka ku noqoshada dekeddii laga soo qoray, haddii gaadiidlaha markabka aanu u qalqaalin, inta lagu jiro muddada lagu sheegay heshiiska, markab kale ee ku habboon una qalma oo geeya dekedda la soo sheegay.

Marka ay jirto xaaladda lagu xusay lambarka 7 iyo 9 ee qodobka 107 iyo markasta oo heshiisku burburo sabab uu leeyahay qofka shaqaalaha, iyo sidoo kale marka heshiisku uu ku burburo ikhtiyaarka shaqaalaha heshiiska shaqaalaynta safarka iyo midka waqtiga xaddidan, gaadiidlaha wuxuu xaq u leeyahay in qofka shaqaalaha uu u soo celiyo kharashka uu ku galay dib u soo dhoofintiisa.

**Qod. 110**
**Isbaddalka Gaadiidlaha**

Marka laga reebo arrinta lagu sheegay Lam. 2 qodobka 107, hadddii isbaddal ku yimaado milkiyadda markabka, gaadiidlaha cusub wuxuu ka dhaxlayaa kii hore xuquuda iyo waajibaadka idil ee ku jiray heshiiska shaqaalaynta kuuliga markabka, kuwaani waxay codsan karaan in heshiiska ay ka baxaan marka markabkuu uu yimaado deked ama uga dego Dalka ama deked halka ugu dambaysay ee uu socday.

**Qaybta 3aad**
Waajibaadka la xariira hawlgalka safarka badda

**CINWAANKA 1AAD**
Kiraynta markabka

**Qod. 111**
**Heshiinka kiraynta iyo qaabka**

Kireyntu waa heshiis uu milkiiluhu isku waajibinayo inuu kireystaha uu uga faai'iideeyo markabka muddo isagoo bixinayaa lacag cayiman.

Hehiisku waa in qoraal lagu muujiyaa. Sikastaba muujinta qoraalka la iskama doonayo maraakiibta duuduub ahaan aan ka waynayay shan-boqol oo tan.

**Qod. 112**
**Waajibaadka Kireystaha**

Kireystuhu wuxuu noqonaya gaadiidlaha. Kireystuhu waa in uu markabka u adeegsadaa dabeecaddiisa farsamo si waafaqsan hawsha lagu heshiiyay.

Isagu ma sii kireyn karo marakabka mana bixin karo xuquuqda heshiiska ka yimaada ee heshiiska, haddii awoodddaas aanu oggolaan gaadiidlaha.

Qaabka heshiiska dib u sii kireynta iyo midda bixinta xuquuqda waxaa lagu dhaqayaa sida ku qoran qodobka la soo sheegay.

**Qod. 113**
**Waajibaadka kireeyaha**

Kireeyaha waxaa ku waajiba ah in uu bixiyo markabka xaalad uu ku safri karo oo ay la socoto dokumentiyada lagama maarmanka u ah safarka, sidoo kale daaayactirada idil ee duugowgu keeno, ee la xariira isticmaalka caadiga ee markabka sida hawsha loogu heshiiyay.

Waxaa kaloo ku waajiba, haddii an si ka duwan lagu heshiin, inuu ka daayactiro sababaha ka baxsan awoodda aadanaha. Kireyuhu wuxuu masuul ka yahay dhibaatooyinka ka yimaada cilladaha safarka, haddii uusan caddayn in ay tahay cillad la qariyay oo aan lagu ogaan karin adeegsiga garashada caadiga.

**Qod. 114**
**Dhicitaanka heshiiska**

Haddii aan si cad kireyuhu u oggolaan heshiiska looma qaadanayo in la cusboonaysiiiyay, xitaa haddii markabku uu safar ku jiro, oo aan la soo celin karin marka heshiiska isaga waqtigiisu dhaco. Marka xaaladdaas ay jirto muddada dhicitaanka heshiiska waxay soconaysaa inta uu ka dhammanayo safarka.

**Qod. 115**
**Xaq-dhaca**

Xuquuqda ka dhalata heshiiska kireynta waxay xaq-dhac noqonayaan marka ay ka soo wareegto haI sano dhicitaanka heshiiska, ama, marka ay jirto xaaladda qodobka kor lagu soo sheegay taariikhda dib loogu soo gacangliyay markabka.

Marka la qiyaasay in markabka la waayay, muddadu waxay ka bilaabanaysaa taariikha laga saaray lambarka ama buugaagta diiwaangalinta.

**CINWAANKA 2AAD**
Kireynta

**Qod. 116**
**Heshiiska kireynta** .

Heshiiska kireynta waa heshiis uu gaadiidlaha markabka uu isku waajibinayo in markabka cayiman ku qaado safar ama safarro sheegan ama muddada lagu heshiiyay dhexdeeda, ama safarrada u amaray kireystaha sida xaaladda heshiiska ku qoran ama hab-dhaqanku uu yahay.

Kireystaha ma noqonayo milkiile. Heshiiska qaadista alabaada waa in lagu muujiyaa qoraal. Sikastaba muujinta qoraalka la iskama doonayo maraakiibta culayskoodu aan ka sareyn duuduub ahaan shanboqol oo tan.

**Qod. 117**
**Waajibaadka kireeyaha**

Kireeyaha wuxuu isku waajibinayaa, inta aanu markabka soo bixin in markabka ka dhigo xaalad uu gooshi karo si uu u sameeyo safarka, uu si habboon u shixnadeeyo, qalabeeyo iuyo u diyaariyo dokumentiyadiisa loo baahanyahay.
Kireeyaha wuxuu ka masuul yahay wayeellada ka yimaada cilladaha hagidda markabka, haddi aan la caddeyn in cillad qarsoon oo aan lagu ogaan karin adeegsiga garashada caadiga.

**Qod. 118**
**Waajibaadka kireystaha**

Haddi aan si ka duwan loogu heshiin kirada waqtiga waxay dushiisa tahay kireystaha, marka lagu daro kharshka rarka la xariira, iyo xitaa hawlaha la xariira adeegsiga ganacsi ee markabka sida rasaynta, xuquuqda wakiilashada, caafimaadyada iyo wixii la mida, iyo sidoo kale, haddii markabka ku shaqeeyo aaladda dhaqaajinta, shidaalka lagu shubo, biyaha iyo xayrta oo lagama maarmaan u ah waxqabadka qaybaha motoorka iyo qalabka caawinta dheegga markabka.

**Qod. 119**
**Fulinta kirada muddada leh inta lagu jiro safarrada**

Kireeyaha muddada leh kuma qasbana in uu galo safar markabka ama dadka u keeni kara khatar aan la saadaalin karin marka heshiiska la galay.
Sidoo kale kireeyaha xil kama saarna in uu galo safar muddada uu socdo ee la saadalin karay ay si wayn u dhaafay, marka loo eego inta heshiisku soconayo, dhicitaanka muddada heshiiska isaga ah.

Haddii ficil kireeystaha waqtiga inta uu socday safarka ugu dambeeya uu sababo dhammaadkaa heshiiska, dhibaatooyinka gaaray magdhow kama helayo, laakiin, haddii aanu jirin heshiis ka duwan, kireeyahu wuxuu yeelanaya waqtiga ka saaida muddada heshiiska laba jibbaar lacagta lagu sheegay heshiiska.

**Qod. 120**
**Bixinta kiraynta alaabta muddada leh**

Kireynta alaabta muddada leh, haddii aanay jirin heshiis ama hab-dhaqan ka duwan, wuxuu ku bixinayaa bilkasta qayb uu soo hormariyo.
Sikastaba, haddii aanu jirin heshiis ama hab-dhaqan diiddan, kirada la soo hormariyay looma qaadanayo mid la hantiyay xaald kasta**.**

**Qod. 121**
**Dib-u-kirenta iyo wareejinta heshiiska**

Waxaa la oggolyahay dib-u-kireynta ama wareejinta dhammaan ama qayb ahan xuquuqda ka timid heshiiska kirada.
Kireystuhu wuxuu uga sii masuul noqonayaa kireeyaha wixii waajibaad lagu qaaday heshiiska kirada.

**Qod. 122**
**Dhaqn ka-baxa**

Xuquuqda ka dhalata heshiiska kirada qaadista alaabta waxay dhaqan ka-bax noqonayaa marka ay ka soo wareegto hal sano. Muddadu waxay ka bilaabanaysaa haddii kirada ay ahayd midda muddada leh marka heshiisku dhammaado, ama dhammaadka safarka ugu dambeeya haddii safarka la kordhiyo sida uu qabo faqradda ugu dambaysa ee qodobka 119; haddiise kiradu ay ahayd midda safarka, waxay dhaqn ka-bax noqonaysaa dhammaadka safarka.
Mararka safarka aan la bilaabin ama la dhammaystirin, muddadu waxay ka bilaabanaysaa maalinta dhacdada sababtay fulin la'aanta heshiiska, ama sii wadidda safarka maalinta ay dhacday.
Marka la qiyaaso markabka in la waayay muddadu waxy ka bilaabanaysaa taariikhda laga saaro lambarka iyo diiwaanada.

**CINWAANKA 3AAD**
Qaadista dadka

**Qod. 123**
**Heheshiiska qaadista dadka iyo qaabka**

Heshiiska qaadista dadka gaadiidlaha badda wuxuu isku waajibinayaa inuu qofka deked ka qaado ama ku dejiyo meeel kale kadib markii uu lacag ka qaato.
Haddii marakab lagu fulinayo hawshaas, heshiiska qaadista waa in lagu muujiyaa tikidh lagu safrayo oo uu bixiyo gaadiidlaha, laguna tilmaamayo taariikhda la gooyay, goobta iyo taariikhda bixitaanka, sidoo kale goobta loo socdo iyo qiimaha safarka; haddii doonyo lagu fulinayo, heshiiska waaxaa lagu geli karaa afka ama qoraal la'aan.
Haddii aan si kale lagu heshiinin qiimaha safarka waa la sii hormarinayaa.
Qiimaha safarka waxaa ku jira lacagta lagu qaadayo alaabada rakaabka, iyadoo lagu xaddidayo tayada, miisaanka iyo mugga uu milkiiluhu jideeyo iyadoo la ilaalinayo hab-dhaqanka.

Kharshka raridda iyo dejinta ee rakaabka iyo alaabdiisa rakaabka ayaa isku qaba, haddii qiimahoodu aanu ku jirin qiimaha safarka.

## Qod. 124
## Wareejinta xuquuqda qaadista iyo baabi'inta heshiiska

Xuquuqda qaadista lama wareejin karo haddii milkiiluhu aanu si cad u oggolaan, sidoo kale, haddii tikidhka aan lagu sheegin magaca rakaabka, amse haddii tilmaamahaas ay ka maqanyihiin, meesha uu rakaabku safarrada ka soo bilaabay.

Haddii bixitaanka ka hor rakaabku geeriyoodo, ama safarka uu ka baaqdo sabab aan lagu eedayn karin awgeed heshiisku wuu burayaa waxaana loo celinayaa affar meelood meel qiimaha safarka, iyadoo la xisaabinayo raashinka saafiga haddii kaasu uu ku jiray qiimaha.

Haddii arrintu ay ku dhacday mid ka mida dadka la socday qoyska oo lagama maarmaan ay ahayd in ay wada safraan, midkasta oo ka mida rakaabka wuxuu codsan karaa in uu heshiiska ka baxo iyagoo isku xaalada ah.

Mararka ay jirto xaaladaha faqradda la soo sheegay, gaadiidlaha waa in la wargeliyaa sababta ka reebtay bixitaanka ka hor, haddii taas la waayo wuxuu yeelanayaa qiimaha idil oo saafiga.

Rakaabku, haddii aanu imaan dheegga markaabka waqtiga loo qabtay waxaa lagu yeelanaya qiimaha safarka iyadoo la xisaabinayo qiimaha raashinka saafiga.

Sikastaba, laguma laha qiimaha haddii, xuquuqda gaadiidka cid kale loo wareejiyay iyadoo milkiiluhuna oggoladay marka rakaabku codsado, laakiin markaaso kale milkiiluhu wuxuu yeelanayaa qiimaha lacag aan ka badnayn10%.

Haddii bixitaanku daah ku yimaado, rakaabku xaq ayuu u leeyahay waqtiga uu milkiiluhu xannibay bixitaanka markabka iyadoo aanay suurtgal ahayni in safarka markab kale oo isla milkiiluhu leeyahay loo duwo, kasaso markiiba soo baxa, heshiiska waa baaba'ayaa, milkiiluhuna waa in uu soo celiya lacagtii la siiyay.

Haddii bixitaanku daaho, rakaabku wuxuu xaq u leeyahay inta u socdo waqtiga daaha, jiif iyo cunto marka kuwaan qiimaha tikidhka ay ku jiraan.

Haddii safarka markabka uu ku yimaada hakad sababa xag Alle ka timid qiimaha safarka la yeelanayo waa wax u dhigma masaafada la soo maray.

Sikastaba milkiiluhu wuxuu xaq u leeyahay qiimaha oo dhan, haddii, waqti caqligala uu ku wareejiyo markab kale oo la nooca oo safarka lagu sii wadayo isago kharaskiisa isku qaba, isagoo si talan taaliya u bixinaya jiifka iyo cuntada, haddii taasi ay ku jirtay qiimaha safarka.

Haddii rakaabka lagu khasbo inuu joojiyo safarka sababa isaga aan lagu eedayn karin awgeed, qiimaha safarka waxaa loo xisaabinayaa wax u dhigma safarka uu soo galay..

Haddii safarku hakad ku yimaado sabab uu leeyahay rakaabku, waxa lagu yeelanayaa qimaha safarka saafiga ee safarka inta ka harsan.

Milkiiluhu wuxuu masuul ka yahay khasaaraha rakaabka ka soo gaara daahidda iyo fulin la'aanta qaadista, haddii aanu caddayn in dhacdadu ku timid sabab aan isaga lagu eedayn karin.

Xeerka qodobkaan waxaa lagu baddali karaa, heshiis qoraal ah iyadoo loo eegayo hab-dhaqanka, gaadiid qaadista maraakiibta ka yar duuduub ahaan boqoliyo-konton tan.

**Qod. 125**
**Mas'uuliyadda gaadiidlaha**

Milkiiluhu wuxuu ka masuul yahay shilalka soo gaara qofka rakaabka, ee dhaca laga bilaabo marka uu markabka soo fuulo illaa uu ka dego, haddii aanu muujin in dhacdadu ku timid sabab isaga aan lagu eedayn karin.

Milkiiluhu wuxuu kaloo masuul ka yahay illaa xadka ugu badan Sh. So. 120 halkii kiilogram, khasaaraha iyo dhibbka soo gaaray shandadadaha iyagoo xiran lo dhiibay, haddii aanu caddayn in khasaaruhu iyo dhibku aanay keenin sabab isaga aan lagu eedayn karin.

Khasaaraha ama dhibatada waa in uu ahaadaa mid sugan intaa aanu dhicin, waqtiga dib-u-gacangelinta.

Shandadaha gacanta iyo alaabada kale ee aan loo dhiibin gaadiidlaha, kuwaas isagu kama masuul aha khasaaraha ama dhibaatada soo gaarta, marka laga reebo marka rakaabku caddeeyo sababta keentay in aan isaga lagu eedayn karin.

**Qod. 126**
**Dhaqan ka-baxa**

Xuquuqda ka dhalata heshiiska gaadiid qaadista waxay noqonaysa dhaqan ka-bax marka ay ka soo wareegto lix bilood oo laga soo bilaabo marka rakaabku soo gaaaro halkuu uu u socday ama, marka laga baaqdo, maalinta rakaabku ay ahayd in uu yimaado.

**CINWAANKA 4AAD**
Gaadiid qaadista alaabta

**Qod. 127**
**Heshiiska gaadiid qaadista alaabta iyo qaabka**

Heshiiska qaadista alaabta gaadiidluhu wuxuu isku waajibinayaa, isagoo marka uu lacagta qaato in alaabta deked ka qaado isla markaana mid kale geeyo.

Heshiiska gaadiid qaadista lagu fulinayo maraakiib duuduub ahaan ka weyn culayska boqoliyo-konton tan, waa in lagu muujiyaa qoraal, marka laga reebo arrinta ku xusan faqradda ugu dambaysa ee qodobka 132.

**Qod. 128**
**Rarka badeecada**

Milkiilhu, inta aanu safarka bilaabin, isagoo adeegsanaya garashadiisa caadiga waa in uu markabka u diyaariyaa xaalad uu gooshi karo si habboonna loo shixnadeeyo iyo qalabeeyo, hagaajiyo khananka iyo meelaha kale ee alaabada la dhigo ee markabka in ay ahaadaan meelo si habboon wax loo dhigi karo, iyo wax lagu keydiyo alaabada.

Haddii aanu jirin heshiis ka duwan, Gaadiidluhu wuxuu alaabada ku qabanayaa ama ku gacan gelinayaa adeegsiga wiishka

Marka alaabada la saarayo iyo markasta ka hor inta aanu markabku soo bixin kan wax rarayaa waa in uu dhiibaa gaadiidlaha warqadaha kastanka. Kan wax raraya wuxuu uga masuulyahay gaadiidlaha waxyeellada ka dhasha dhiibid la'aanta.

Milkiiluhu lagama doonayo in uu hubiyo dhammaystika dokumentiyada iyo sixitaanka waxyaabaha iyaga ku jira.

Alaabada loo dhiibo gaadiidlaha, ama baakadayntooda, qofka wax raraya waa in ku suntaa calamado si caadiya loo arki karo dhammaadka safarka.

Kan wax raraya wuxuu uga masuulyahay gaadiidlaha dhibaatooyinka ka yimaada calaamadaha oo aan si hagaagsan loo samayn.

**Qod. 129**
**Masuuliyadda gaadiidlaha**

Milkiiluhu wuxuu masuul ka yahay khasaaraha iyo dhibaatada alabada loo dhiibay si loo qaado, laga bilaabo marka uu qabto illaa uu ka dhiibo, sidoo kale dhibaatooyinka ka dhasha daahidda.

Milkiiluhu wuxuu masuuliydda iska bari'i yeeli karaa haddii uu muujiyo in khasaaraha ama dhibaatada ama daahidda gabi ahaan ama qayb ahan aanay ku imaan sabab isaga ama shaqaalahiisa ay leeyihiin ama loogu talagalay.

Laakiin alaabada qofka guddooma ayay u taallaa in uu muujiyo in sababta khasaaraha, dhibaatada iyo daahidda uu leeyahay gaadiidlaha ama shaqaalahiisa, marka dhibaatadu ay ay ka timid:

a) — cillad la qariyay ama gooshi la'aanta markabka oo aan ka imaan xilgudasha la'aan ku xusan faqradda koobaad ee qodobka sare;
b) — ka timid nasiib ama khatar xagga badda;
c) — ka timid gubasho aan ku kicin sabab uu gaadiidluhu leeyahay;
d) — burcad badeedda;
e) — falal dagaal; qalalaaso iyo kacdoon madaniya;
f) — tallaabooyin maamul, sharci iyo xitaaa fal arrima caafimad loola jeedo;
g) — xayiraado garsoor;
h) — shaqa joojin, xannibaad, shaqa joojin guud ama qayb ahaan;
i) — arrimo ama iskuday gargaar ama samata-bixin, weecinta safarka arrima loola jeedo;
1) — six un u rasaynta;
m) — cillad muuqata ee badeecadda, hoos u dhac ku yimid mugga ama miisaanka, baakadeynta oo aanu ku filnany, calaamadaha alaabta oo aan ku filnayn ama aan hagaagsanayn;
n) — arrimo ama dayac ka yimid xagga qofka wax raraya iyo kuwa la shaqeeya ama loogu talagalay.

Marka laga bari'yeelo masuuliyadda lagu soo sheegay labada farqadood ee la soo sheegay, kharashk rarka la hormariyay lama soo celinayo.

Magdhowga laga doonayo gaadiidlaha sikastaba kama badnaan karo qiimaha dhabta ah ee shayga iyadoo markastaba lagu xaddidayaa ugu badnaan 2.000 – sh Somaali – unug kasta ee rarka, haddii qofka wax rarayaa aanu caddayn, inta aan la soo saarin, dabeecadda iyo qiimaha badecadda iyadoo caddayntaas la soo raacinayo warqadda rarka.

## Qod. 130
## Wax ka dhimidda xeerka ku saabsan mas'uuliyadda

Xeerka ku xusan qodobka sare markasta waxbaa laga dhimi karaa iyadoo loo daneynayo shixnad raraha.
Waxaa kalo wax laga dhimi karaa iyadoo loo daneeynayo xitaa gaadiidlaha waxa quseeya waqtiga ka horreeyay shixnad raraidda iyo kan ka dambeeya dejinta.

Wax ka dhimiddaas waxaa la gaarsiin karaa xita xilliga u dhexeeya iyado lagu xaddidayo gaadiid qaadista badeecadaha la soo saaray dusha sare ama maraakiibta aan dusha sare lahayn iyo gaadid qaadista xayawaanada nool.

Dhimidda iyada ah waxaa kaloo la oggolyahay marka ay ku koobantahay gaadiid qaadista lagu sameynayo xeebta dalka, iyo sidoo kale waxa quseeya dhibaatooyinka ka yimaada daahidda.

Marka la eego dhinacyada saddexaad dhaqangalka sababaha dhimista marka laga reebo gaadiid qaadista lagu sameeyo doonyaha aan gudaha lahayn, waxaa shardi ah kolba sida loogu qoro warqadda rarista.

Xeerka la soo sheegay waxbaa laga dhimi karaa, xitaa waxa ka baxsan malaha iyo xudduudaha ku sheegan faqradda sare, marka aan la soo saarin warqadda rarista.

## Qod. 131
## Waqtiga raridda iyo dejinta

Waqtiga wax lagu rarayo ama wax lagu dejinayo, haddii heshiiska wax ka duwan lagu xusin, waxaa lagu dhaqayaa hadba hab-dhaqanka maxalliga ama, haadii aany jirin masuulin ka socota badda goobta sheegan oo arrinta wax ka yiraahda, qaabayn la'aan, marka loo eego xaaladaha saadaasha hawada, qalabka la heli karo, qaab dhismeedka markabka iyo sidoo kale nooca badeecada.

## Qod. 132
## Horjoogsiga bixidda iyo sii wadidda safarka

Haddii markabka laga horjoogsado bixitaanka ama daahid ka timid arrin culus oo xag Alle ka timid heshiiska gaadiid qaadidda waa burbburayaa, haddii burburka heshiiska uu dhaco xannibaadda ka dib shixnad raraha waa inuu bixiyaa kharashka dejinta.

Haddii horjoogsi aaan joogto ahayn ku dhaco sababa xag Alle, marka markabku soo baxo ama uu sii wato safarka, heshiiska waa sii jirayaa shixnad raruhuna xaq uma laha in uu yareeyo kirada.

Haddii horjoogsigu bixitaanka uu si xoogle u sii socdo ama uu noqdo kamadambays inta aanu markabka soo bixin waxaa la dabbaqayaa faqradda koobaad ee qodobkaan, haddii horjoogsigu ay si xoogle u sii socoto ama ay kamadambays noqoto intii safarka lagu jiray, shixnad raruhu waa in uu bixiyaa kharaska dejinta iyo kirada waxa u dhigma masaafada la soo maray, waase haddi taliyaha markabka isago ka wakiilka gaadiidlaha uu diyaariyo sidii alaabta markiib kale loogu wareejin laha si loo geeyo halkii ay u socotay.

Xeerka qodobkaan waxaa wax looga baddali kara heshiis qoraal ah, iyadoo lala xiriirinayo hab-dhaqamada oo si cad loo muujiyo marka rarka lagu fulinayo doonyo.

**Qod. 133**
**Ka bixidda shixnad qaadaha iyo shixnad-qaadista dhimman**

Inta aanu markabku soo bixin shixnad qaaduhu wuxuu ka bixi karaa heshiiska, isagoo bixinaya kala bar lacagta kirada lagu heshiiyay, iyo sidoo kale kharashka raridda iyo dejinta.
Sikastaba shixnad raruhu waa iska bari'yeeli kara gebi ahaan ama qayb ahaan xilkaas, isagoo muujinaya in milkiiluhu aanu u geysan wax dhib ah ama u geystay dhib yar.

Haddii shixad raruhu uu wareejiyo badeecad ka yar tii lagu heshiiyay, haddii aanu jirin heshiis ka duwan, waa inuu bixiyaa lacagta kirada idil oo lagu heshiiyay.
Inta safarka lagu jiro shixnad qaaduhu dib ayuu ula bixi karaa alaabta markabka la saaray, isagoo bixinaya lacagta kirada oo dhan iyo in uu u celiyo gaadiidlaha kharashka aan caadiga ahayn ee ku baxay dejinta.

**Qod. 134**
**Horjoogsiga imaatinka iyo daahidda dib ula bixidda rarka ee imaanshaha**

Haddii goobta loo socday laga horjoogsado ama si ba'an uu soo daahay sababo xag Alle taliyuhu, haddii aanu heli amarro ama se amarrada la helay aan la fulin karin, waa in uu sameeyaa sida ugu wanaagsa oo ay ku jirto danta markabka iyo danta rarka, isagoo ku xiranaya meesha ugu habboon ama ugu dhaw ama xitaa in uu ku soo laabto meesha uu ka soo tagay.

Marka qofka rarku u socdi uu ka daaho dib u-qaadashada ama la isku khilaafo qaabka gacan gelinta, taliyahu wuxuu weydiisan karaa hay'adda garsoorka fasax lagu dejiyo amal lagu keydiyo meel la isla ogyahay badeecada oo idil ama, haddii uu bixin waayo qofka ay socotay kharashkii kirada, qayb badan oo ka mida in meel la dhigo sii loo iibiyo lagana gooyo wixi kharsha ee kirada.

**Qod. 135**
**Khasaaraha iyo dhibaatooyinka alaabta**

Khasaaraha iyo dhibatooyinka soo gaara alaabta inta lagu jiro rarka alaabta qofka alabtu u socotay waa inuu si toosa kala xaajoodaa taliyaha markabka ama wakiilka gaadiidlaha, waqti aan ka dheerayn dib u-gacan-gelinta, haddii khashaaraha ama dhibaatada tahay wax muuqda ama laga joogo waxaan ka badnayn saddex cisho haddii ay tahay khasare ama dhibaato aan muuqan.

Haddii aanay jirin dood looga xajooday, badeecadda waxaa loo qaadanayaa im dib loogu dhiibay gaadiidlaha si waafaqsan tilmaamaha ku jira dokumentiga qaadista rarka ama sidii horay loogu heshiiyay qaadista rarka isaga ah.

**Qod. 136**
**Dhaqan ka-baxa**

Xuquuqda ka dhaIata heshiiska qaadista alaabta waxay noqonayaan dhaqan ka-bax marka ay ka soo wareegto hal sano oo laga soo bilaabo marka shayga dib loogu dhiibo, ama haddii khasaaaruhu yahy kulligiis, maalinta ay ahayd inuu gaaro halkii uu u socday.

## CINWAANKA 5AAD
Warqadda rarka

### Qod. 137
### Bixinta iyo tilmaamamaha warqadda rarka

Marka laga reebo rarka gaadiidka la saarayo doonyaha ama maraakiibta duuduub ahaan ka hooseeyo boqoliyokonton tan, milkiiluhu, ka dib badeecada marka markabka la saaro, waxaa ku waajiba in uu siiyo gaadiid raraha warqadda rarista.

Warqadda rarista, la taariikheeyo iyo uu saxiixa gaadiidlaha, ama wakiilkiisa ama taliyah markabka, waa in lagu sheegaa:

1) — Markabka;
2) — magaca gaadiidlaha iyo meesha uu degganyahay;
3) — magaca qofka raray iyo meesha uu degganyahay;
4) — goobta iyo taariikhda alaabta laga soo raray;
5) — goobta alaabta u socoto; iyo, haddii warqadda rarista ay tahay nooca magaca leh magaca iyo goobta u degganyahay qofka ay u socoto;
6) — caynta, tiradaa iyo tayda alaabta la soo rarayo,

Sidoo kale inta shay oo ka koobantahay iyo calaamadaha baadi sooca;

7) xaaladda muuqaalka iyo baakadaynta alaabta.

Milkiiluha, ama wakiilada ama taliyaha markabka, ee bixinaya warqadda rarka wuxuu ikhtiyaar u leeyahay inuu keydkiisa ku daro marka aanu ku wada samayn karin ama qayb baaris caadiya tilmaamaha uu siiyay gaadiid raraha ee la xariira caynta, tayada iyo tirade alaabta, iyo sidoo kale tirade sheyada iyo summadaha baadi sooca. Haddii aanu jirin dib u dhigid, waxyaabaha la soo sheegay waxaa loo qaadanayaa inay waafaqsanyihiin tilmaamaha ku qoran warqadda rarka.

### Qod. 138
### Asalka warqadaha rarka iyo wareejinta midda la siiyo gaadiid raraha

Warqadda rarka waxaa laga sameynayaa laba warqadooda oo asal ah.

Asalka u haraya gaadiidlaha waxaa saxiixaya gaadiid raraha ama wakiilkiisa, mana la wareejin karo, waxaana ku cad tilmaantaa in aan la wareejin karin.

Warqadda asalka la siiyo gaadid raraha oo uu saxiixay gaadiidlaha, ama wakiilkiisa ama taliyaha markabka, waxay siinaysaa qofka haysta si waafaqsan qodonka 140, xaqa ah in loo dhiibo alaabada warqadda ku qoran, gacan ku haynteeda iyo xaqa yeelashada shahaadadas.

Asalka warqadda raridda waxay noqon kartaa mid ah qofka sita, mid amran ama mid magac wadata.

Wareejinta asalka la soo sheegay waxay dhacaysaa marka shahaadada la dhiibo, haddii ay tahay midka qofka sita; wareejintu haddii shahaadada lagu qoray oo uu saxiixay wareejiyaha, wareejintu haddii ay tahay midka amarka: wareejinta in cidda sameysay shahaadada uu ku qoro magaca qofka iibsaday, ama wareejin laga sameeyay notaayo, haddii warqadda ay tahay midka magac wadata; wareejinta la sameeyo marka bixiyaha uu shahaadada ku dul qoro magaca qofka iska leh, ama wareejin notaayo tasdiiqisay, hadduu uu yahay midka magaca wata.

**Qod. 139**
**Nuqullada laga sameeyay shahaadada rarka ee amarka dhiibista**

Asalka warqadda rarka ee la siiyay gaadiid raraha, ka dib marka uu codsado qofka xaqa u leh haysashada shahaadada, waxaa laga samayn karaa nuqullo, laakiin ma siinayso xuquuqda lagu sheegay farqadda saddexaad ee qodobka sare ku xusan.
Nuqullada lama wareejin karo, waana in lagu dul qoraa in aan la wareejin karin iyo in lambarada amarka la bixiyay midba midka kale laga duwo.

Gaadiidlaha ama wakiilkiisa, marka sidaas loogu heshiiyay heshiiska gaadiid qaadista, waa in uu u sameeyaa nuqullada kadib marka uu weydiisto qof xaqa u leh alaabada, amarada dhiibista ee taliyaha markabka ama wakiilkiisa.

Markaaso kale gaadiidlaha ama wakiilkiisa, marka ay sameynayaan amarrada dhiibista, waxaa lagu muujiyaa warqadda asalka in la wareejin karo, iyadoo lagu muujinayo nooca, tayada iyo tirada alaabta ee lagu caddeeyay warqad kasta oo ka mida amarka, lagana saxixayo qofka soo codsaday: marka warqadda rarka oo dhan loo kala googooyay amarro badan ee bixinta, waa in uu sidoo kale la noqdaa warqada raridda ee asalka ah.

Amarrada gacan-gelinta lagu soo saaray si waafaqsan faqradda sare waxay awood u siinayaan xuquuqda lagu sheegay faqradda saddexaad ee qodobka 138, kuwaaso noqn kara midka qofka sita, amran ama kuwa magaca leh.

Amarada gacan-gelinta la soo soo sheegay waxaa lagu dabbaqayaa, haddii ay isqaadan karaan, xeerka soo saaridda iyo wareegga warqadda rarka.

**Qod. 140**
**Sharcinimada qofka sita warqadaha badeecada ku qorantahay**

Qofka sita asalka warqadda rarka alaabta la wareejin karo wuxuu xaq u leeyahay in uu isticmaalo xuquuqda warqaddaas ku qoron, iyadoo lagu saleynayo marka la soo bandhigo warqadda iyada ah ama markii tira ka dhowr jeer la wareejiyo ama ay jirto sabab magac- dhabid isaga loogu daneynayo, kolba nooca warqadda in ay tahy midka sitaha, amarka ama middda magaca leh.

**CINWAANKA 6AAD**
Gacan ka-geysashada dhibaatooyinka caadiga

**Qod. 141**
**Dhibaatooyinka caadiga**

Dhibaatooyinka caadiga waxay yihiin kharashka iyo dhibaatooyinka sida tooska ka dhasha tallaabooyinka ku-talagalka iyo caqligalka uu u qaaday taliyaha markabka, si waafaqsan qodobka 93 si loo badbaadiyo waxa markabka saaran, markastaba iyadoo dhibaatada ku dhacday sida ku-talgalka aanay ahayn isla midka marka la eego dhacdooyin caadi ahaan u dhici lahaa.

**Qod. 142**
**Qaybsiga**

Si ka duwan haddi aan lagu heshiin, rarka gaadiidka lagu qaado doonyaha ama doonyaha aan ka badnayn duuduub ahaan boqol-iyokonton tan, khasaaraha soo gaaro alabta waxaa loo qaybinayaa keliya dadka soo raray, iyadoo loo eegayo hab-dhaqanka, iyadoo gaadiidlaha uu bannaanka ka yahay kharsh kasta ama khasaaraha.

Haddii aanu ka dhex jirin heshiis gaara dhinacyada rarka gaadiidka lagu qaadayo maraakiibta ka sarreya boqoliyo-kontonka tan dhibaatooynka caadiga waxaa wax ka bixinaya gaadiid raraha iyo milkiila marka la eego nidaamka York e Anverso ee 1950.

**Qod. 143**
**Xaq-gudidda**

Haddii dhinacyaday aanay si ka duwan ugu heshiin, tilmaan-bixinta, xisaabinta iyo qaybsiga ee dhibaatooyinka caadiga (141) waxa lagu xallinayaa si saaxiibtnimo iyado lagu qabanyo goobta markabka looga dejinayo (176), oo ay joogaan hal xaq-bixiye ama ka badan ee dhibatooyinka oo si wada jira loo soo magacaabay ama, haddii cillad ay jirto masuulinta garsoorku soo magacaabaan, ama, haddii aan lahayn masuuliinta maxalliga goobta lagu dejinayo haddii ay tahay dalka dibaddiisa, masuuliinta qunsuliyadda ama haddii aanay jirin masuulinta goobta.

Qaybsiga ay soo jeediyeen xaq-gudayaasha oo ay magacaabeen masuuliinta lagu soo sheegay faqradda sare, masuulinta iyaga waa in ay baaris ku sameeyaan.

**Qod. 144**
**Dhaqan ka-baxa**

Xaqa dacwadda looga qaybgalayo bixinta dhibaatooyinka caadiga wuxuu dhaqan ka-bax noqonayaa hal sano oo ka soo bilaabata marka alaabada la dejiyay.

**CINWAANKA 7AAD**
Mas'uuliyadda jugta markabka

**Qod. 145**
**Shilka jugta ama sabab shaki ku jiro iyo jugta kama'a**

Haddii ay maraakiib isku dhacdo, isku dhacu haadii si kama'a ku dhaco ama arrin xag Alle awgeed, oo aanay suurtagal ahayn in sababta la xaqiijiyo, dhibaatooyinka waxaa iska leh maraakiibta geysatay.

Haddii sababta isku-dhacu uu leeyahay mid ka mida maraakiibta, magdhowga dhibaatooyinka waxaa la saarayaa markabka dhibka kama'a geystayay.

Haddii masuuliyadda ay ka dhaxeyso dhowr markab, mid kasta oo ka mida wuxuu ka masuul noqonayaa hadba inta uu dhiganta dhibka uu geystay. Sikastaba, haddi duruufo gaar ah awgood, aan la caddayn karin inta u dhiganta dhibka, magdhowga waxaa loogu qaybinayaa si isla eg. Magdhowga dhibatooyinka sababa dhimashada ama dhaawacyo dadka, maraakiibta ka masuulka ah si wada jira ayay masuuliyaadda u wada qaadayaan.

**Qod. 146**
**Waajibka Gurmadkaa marka isku dhac yimaado**

Haddii maraakiib ay isku dhacaan taliye kasta waa inuu kuwa kale u gurmadaa, kuuliga iyo rakaabkooda, markasta isagoo aan u geysanayn khatar culus markabkiisa iyo dadka saran. Taliyaha markabka iyo kuwooda kale, waa in ay siiyaan maraakiibta kale wixii suurtagala macluumaadka lagama maarmaanka ah ee aqoonsigooda.

**Qod. 147**
**Xiriirada heshiisyada**

Marka laga yimaado masuliyad wadareedka maraakiibta ee magdhowga dhibaatooyinka sababa dhimasho iyo dhaawacyo dadka, sida ku xusan farqadda ugu dambaysa ee qodobka 145, xeerarka ku saabsan magdhowga dhibaatooyinka ka dhasha isku dhaca laguma dabbaqayo xiriirada masuuliyadaha ka dhasha waajibka heshiiska shaqo ama rarka gaadidka ama heshiis kale.

**Qod. 148**
**Dhaqan ka-baxa**

Xaqa magdhawga dhibaatooyinka ay sababaan isku dhaca maraakiibta waxay dhaqan ka-bax noqonayaan marka ay ka soo wareegto laba sano oo ka bilaabata maalinta uu dhibku dhacay.

Xaqa dib u weydisiga uu markabku leeyahay, marka la eego faqradda ugu dambaysa ee qodobka 145, marka uu bixiyay magdhowga oo idil, wuxuu dhaqn ka-bax noqonayaa marka ay ka soo wareegto hal sano oo ka soo bilaabata maalinta uu lacagta bixiyay.

**Qod. 149**
**Dhibaatooyinka aan keenin isku dhaca muuqda**

Xeerarka aan soo sheegnay waxaa lagu dabbaqayaa dhibaatooyinka ka dhasha kala gurista biyaha ama sababa kale oo la mida, oo ka yimaada markab illaa markab kale iyo dadka ama sheyada markabka saaran xitaa haddii aanay jirini sku-dhac muuqda.

**CINWAANKA 8AAD**
Gurmadka iyo samata-bixinta

**Qod. 150**
**Waajibaadka Gurmadka iyo samata-bixinta**

Gurmadka markab halis ugu jira inuu haligmo waa waajib, wixii suutgala ah haddii aanay u keenayn halis culus kan gurmanaya, kuuliga iyo rakaabkiisa, ama wax ka baxsan xaaladda ku xusan qod. 146, marka dadka markab saaran ay yihiin dad halis ku jira.

Taliyaha markabka, safarka ku jira ama u diyaara inuu baqoolo, oo ka war hela halis markab haysata, waxaa ku waajiba xaaladaha iyo xudduudaha la soo sheegay in uu gurmad u fidiyo, marka si caqligal ah uu malayn karo in uu natiijo wax tara qaban karo, marka laga reebo

haddii uu ogyahay in ay jirto cid kale oo isaga kaga habboon xaaladda gurmadka ama mid la mida wax uu isagu qaban lahaa.

Marka markabku uu halis galo ama gebi ahaan aan la wadi karin, taliyaha markabka soo gurmanaya waxaa ku waajiba, isagoo tixgalinaya xaaladaha iyo xudduudaha kor lagu soo sheegay, inuu isku dayo samata-bixinta, amase haddii aanay suurtagal ahayn inuu isku dayo badbaadinta dadka markabka saaran..

Waxaa la mida oo waajiba, wixii isla xuddudahaaso kale, iskudayga samata-bixinta dadka halista ugu jira in ay badda ku haligmaan.'

## Qod. 151
## Gunnada iyo magdhawga

Gurmadka iyo samata-bixinta markabka aan loo samayn oo ku timid diidmo qeexan oo caqligala ee taliyaha markabka, waxay xaq u siinaysaa, wixii ku siman xudduuda qiimaha markabka iyo hantida la caawiyay ama la badbaadiyay, in la magdhabo dhibka gaartay, ama loo celiyo kharshka la galay, sidoo kale haddii xitaa natiijo qayb ahaan waxtar ah la gaaray in loo cawil celiyo.

Magdhowga waxaa lagu goynayaa hadba guusha la gaaray, halisyada la soo gudboonaatay markabka soo gurmaday, dadaallada la galay iyo waqtiga ay qaadatay, iyo sidoo kale halisyada markabka soo food saaray iyo hantida la caawiyay ama la badbaadiyay iyo qiimahooda.

Wax magdhow ah lagama bxinayo dadka la badbaadiyay.

Mararka gurmadka iyo samatabixinta ay ka qayb galaan maraakiib badan oo soo gurmaday, si caddalada ayaa loogu qaybinayaa maraakiibta iyaga ah, iyadoo loo eegayo xudduudaha faqrdaha aan soo sheegnay dhibaatooyinka, kharshka iyo cawil-celinta ku xusan faqradaha iyaga ah.

## Qod. 152
## Qaybsiga magdhowga

Magdhowga gurmadka iyo samata-bixinta waxaa la mutaysanayaa marka markabku aanuu u samaysnayn ama u qalabaysnay in uu gurmada sameeyo, saddex meelood meel gaadiidlaha iyo saddex meelood laba meelood kuuliga oo lacagta loo qaybinayo iyadoo loo tixgalinayo hawsha uu mid kasta qabtay.

## Qod. 153
## Qaabka bixinta kgarajka gunnooyinka iyo magdhawga

Dib-ugu-soo celinta kharajka gunnooyinka iyo magdhawga ee markabka fidiyey samatabixinta iyo takuleeynta waxaa yeelan doono sida uu qabo qaabka caawimadaha shilalka caadiga ah ciddii loo fidiyey cawimaaddaas, xataa haddii uu naaquudaha markabka qatarta galay uusan weydisanin ama uu diiddan yahay in la caawiyo.

**Qod. 154**
**Dhammaadka xuquuq**

Xaqa codsiga dib u so celinta kharajka iyo magdhowga howlaha badbaadinta iyo samata bixinta wuxuu ku eg yahay 2 sano kadib maliintii shaqadaasi ay dhamaatay.

**CINWAANKA 9AAD**
Helista iyo dib u soo celinta xamuulka soo caariyey

**Qod. 155**
**Xilka badbaadinta iyo mas'uliyadda badbaadiyaha**

Markii laga reebo dadaalka hantilayasha in ay samatabixiyaan markabka, haddii ay noqoto in dad badan ay ku tartamaan in la badbaadiyo markabka ciiray ama xamuulka laga helay xeebaha, waxaa mudnaanta la siin doona, qofkii kadib markii uu arkay marxaladda, noqday qofkii ugu horreyey ee soo wargeliyaa Hey'daha Badda, kadibna ilaa iyo in ka badan 1 sano ku dhaqaaqay howlaha badbaadinta isagoo kala joojinin.

Howlaha samatabixinta lama joojin karo kadib markii la bilaabay haddii aysan jirin asbaabo cad sababtoo waxaa dhalan karo ah dhibaatoyin dheerad ku ah hantilaha markabka jabay.

Toban beri gudahooda ayaa laga doonayaa in markabkii soo samatabixiyey markabka jabay, ama haddii aanan la isticmaalin qalabka badmaaxinta, in ciddii howsha samabixinta qabatay ay guddonsiiso hantilaha wixii xamuul ah ee la helay; haddii aan la garaneynin cidda iska leh waxaa la guddon siin doonaa Maamulka Badda.

**Qod. 156**
**Dib-u – soo celin kharaj iyo magdhow**

Howlaha la xirira badbaadinta markab caariyey iyo fulinta waajibaadka la xiriira in la xafido alaabaha la helay, waxaa ka dhashay xuquuqda in dib-ugu celin iyadoo lagu saleeynayo qiimaha xamuulka la helay, wax allaliyo wixii la xiriira magdhow iyo dib-u-celin kharajka ku baxay, qatarta la galay iyo qalabka loo isticmaalay howlahaas; haddii howlaha badbaadinta ay fulisay markab dagaal u qalab iyo shaqaalihiisa u dhan yihin waxaa la siin doonaa kharjaka ku baxay hey'adda iska leh markabkaas.

Qaabka qeybsashada magdhowgaas iyo kharaj celinta waxaa la istimaali doonaa sida ku carifan Qod. 152, haddii howlaha badbaadinta loo isticmaalay qalabka badda, haddii kale dadka fuliyey howlahaasi ayaa kala qeybsan dooona iyadoo lagu qiimen doono howsha culeyskeeda iyo qatarta qof kasta soo wajahtay.

**Qod. 157**
**Badbaadinta uu fuliyo naquudaha markabka**

Markii la tixgeliyo Qod. 155, waxaa mudnaan la siin doonaa Naquudaha markabka caariyey, oo isla markiiba caddeyey in uu madax u noqon doono howlaha badbaadinta iyo samatabixinta.

Haddi ay dhacdo in hantilaha markabka caariyey iyo Naquudaha markabku ay ku heshiin waayaan, Hey'adda Badda ama Qunsuliyadda ayaa carifin doonta qiimaha qalabka la badbaadiyey, culeyska howsha samatabixinta iyo qatarka howsha uu Naqudaha iyo shaqaalihiisauay qabteen.

## Qod. 158
## Dib u helista xamuulka soo caariyey

Qofkii si lama filaan ah u hela alaab soo caarisay ama ay baddu ku soo tuftay xeebta dalka, waxaa waajib ku ah in 10 beri gudahooda ama 3 berri gudahooda, haddii uu markab soo caariyey la wargeliyo Hey'adda Badda ugu dhow, markii la garanayo cidda iska leh waa in loo geeya alaabtaasi, haddi aan la garaneynin ama qiimaha alaabtu ay ka badan tahay 5 shillin Somali waa in loo geeya Hey'adda Badda.

Qofka helay xamuulka soo caariyey oo fuliya wajiibdiisa wargelinta iyo dib u celinta xamuulkaasi wuxuu xaq u leeyahay in loo celiyo kharajka, lana siiyo abaalmarin la eg ilaa iyo 3 dalool hal dalool ee qiimaha xamuulka la helay; haddii xamuulkaasi laga helay badda dhexdeeda wuxuu yelaan doona ilaa iyo boqolkiiba 10 ilaa iyo 800 oo shilin iyo boqolkiiba 20 oo dhaaraad ah, haddii xamuulka laga helay xeebta dowladda.

## Qod. 159
## Nibiriyo soo caariyey

Nibiriyo ama kalluun waaweyn ee ku soo caariyey xeebaha dalka waxaa iska leh Maamulka halkaas ka taliya.

Qofka hor arka oo wargeliya Maamulka wuxuu xaq u leeyahay abaalmarin u dhigmata boqol kiiba 20 wixii laga helo.

## Qod. 160
## Xafidaadda iyo hibeynta xamuulka soo caariyey

Hey'adaha Badda iyadoo tixgelinaysa qod. 155 iyo qod.158 markii la guddonsiyo xamuulka soo caariyey oo aan dib loogugu celin hantilihi lahaa, waxaa waajib ku ah in uu ogeysis qoro oo lagu ogeysinayo ciddii daneysneysa guddonka qalabkaas in muddo 1 sano gudaheeda ay ku soo codsadaan dib u celintaas. Madaxa qeybta waxaa la gudboonan karta in ogeysiiskaasi lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Haddii muddada halka sano ay dhamaato iyadoo aysan jirin cid soo codsato dib u celin xamuulkaas ama codsiyadii soo gaaray aanan lagu aqbalin maxkamad horteeda, xamuulka soo caariyey waxaa la siin doonaa qofkii soo badbaadiyey ama qofkii soo helay.

Haddii xamulka la helay ay ka mid yihiin qalab taariikhi ah, ama hiddo iyo dhaqan khuseeya ama hub waxaa la wareegi doona Maamulka, kadib markii la carifo xuquqda abaalmarinta iyo magdhawga sida ku cad qodobbada sare ku qoran.

**Qod. 161**
**Xaqdhac**

Xuquuqda maqdhowga ama abaalmarinta waxaay ku eg tahay ilaa iyo 2 sano laga bilaabo maalintii howlaha badbaadinta xamuulka ay dhamaatay ama maalintii la helay xamuulka.

**CINWAANKA 10AAD**
Mudnaanta

**Qod. 162**
**Qodobo Guud**

Xuquuqaha ku qoran cinwankan ayaa mudnaan ka leh kuwa guud ama gaarka ah.

Haddii xamuulka la helay uu ku dhaco nusqaam, qiimeynta abaalmarinta waxaa lagu saleyn doonaa inta ka soo hartay xamuulkaasi.

Qofka xuquuq ku yeesha shey ama alaab badan, haddii uu ku qanci waayo qiimaynta oo uu qasaaro u arko, haddii uu qof deyntiisa ay ka yartahay qiimaha ahaan cid kale oo xaq deyn ah ku leh wuxuu qofkaasi ku wareejin karaa xaqiisa si uu ugaga hormaro ciddii kale oo deyn ka yar ku leh hantida ama markab qaameeysan.

Sidoo kale qof ba qofkii uu ka deyn weyn yahay wuxuu kahor mari doonaa cidda deyn yar ku leh.

**Qod. 163**
**Xuquqda lagu yeesho markaba iyo xamuulka**

Xuquuqda lagu yeesho markaba iyo xamuulka sida ku cad farqada labaad ee qod. 73 waxaa ka mid ah.

1) — Kharajka maxkamada ee Mamulku galay ama kharajka dadka badbaadiyey ee la xirira qoraalada, canshuurta iyo kharajka keydiinta markabka markii uu so gaaro furdedii ugu dambeysay.
2) — Deymaha ka soo arooray heshiisyada shaqaada ee Naquudaha iyo shaqaalaha badmaaxa ah.
3) — Deymaha la xiriray lacagaha horumariska ah ay Hey'adda Badda ama Qunsuliyada ee la xirira in dib loogu celiyo dalalkooda shaqaalaha badmaaxa ah iyo lacagaha ay xaq ugu yeesheen
4) — Abaalmarinta iyo dib ugu celinta kharajka ku baxay howlaha taakuleynta iyo badbaadiinta markabka iyo xamuulka
5) — Magdhaw haddii uu shil markabku galay, khasaarada la gaarsiyey furdada, magdhawga haddii ay geeri iyo dhaawac shaqsi ay soo gaareen dadka rakaabka ah ama shaqaalaha markabka, magdhawga hantida iyo xamuulka khasaaray.
6) — Magdhawga deymaha ka soo arooray heshisyada ama howlaha uu Naqudaha galay sida sharci u oggoladay ee la xirira shaqada naquudanimada ama maal-geliyaha. Xuquuqda shaqaalaha waxaa ka mid ah intii safar markaabka uu galay oo ku xusan isla heshiiskaas.

Haddii markabku qalibmo ama jabo amase xamuulki qaarkiis ama gebi ahaantiisa baa'bao waxaa weli taagan in la bixiyo xuquuqaha sare ku xusan oo kala ah:

a) — kharajka dib u sameynta markabka iyo khasaaraha xamuulka
b) — Kharjaka lagu lahaa markabka haddii aan weli dib u habeyn lagu suubinin
c) — Magdhawga iyo abaalmarinta ee la xirira safarka kadib markii laga jaro mushaarka shaqaalaha markabka.

## Qod. 164
## Kala mudnaanta iyo qiimeynta xuquuqda ku soo arooray markabka iyo xamuulka

Xuquuqda lagu yeesho markabka iyo xamuulka waxaa mudnaanta leh kuwa kasoo arooray safarkii ugu dambeyey ee markabkuu galay.

Laakin haddii safarro badan oo hoos imaanaya hal heshiis uu markabku galay waxaa lagu xisaabin doono safarkii ugu dambeeyey

Xuquuqda ku sabsan hal safar keliya waxa loo kale hormarin doonaa sida ku cad qodobka midkaan ka horreyey.

Xuquuda ku qoran faqrad kasta ee qoobkkan ka horeyey waxaa lagu tartan siin doonaa markii ay qiimuhu ku filnayn tirada deymaha la doonayo in la gudo.

Magdhawga hantida dhuntay, sida ku cad farqadda sare, waxaa mudnaan ka leh magdhawga dhibaatada jireed ee dadka soo gaartay sida ku cad lambarka 5 ee isla qodobkaan

Dadka deymaha in loo gudo ay tahay sida ku cad lambarka 4 iyo 6 waxaa loo kala hormarinayaa taarikhda is daba joogga ah ee waqtiga deymahaasi ay aburmeen.
Deymaha ka dhashay hal dhacdo waxaa loo qiimeynayaa si wada jir ah.

## Qod. 165
## Fulinta xuquuqda markabka iyo xamuulka lagu yeeshay

Deymaha markabka muteysta waxaa uu ku warejin karaa hantilaha 3aad. Deymaha gaarka ee socdaal waxaay jiri doonaan ilaa iyo intii socdaal weli lagu dhex jiro ama haddii lacagtaasi ay ag taalo naaqudaha ama wakiilka.

## Qod. 166
## Dhammadka xuquuqda markabka iyo xamuulka lagu yeeshay

Xuquuqda lagu yeesho markab iyo xamuulkiisa wuxuu ku eg yahay ilaa iyo muddo hal sano, markii laga reebo deymaha ku qoraan faqradda 6 ee Qod. 163 oo dhamman doono ilaa iyo 180 beri.

Muddada dhamaadka xuquuqda deymaha la xirira howlaha samatabixinta waxay ka bilabataa maalinta ay howlahaasi la soo gebagabeeyay, xuquuqda deymaha la xiriira magdhawga shilalka ama dhibatooyin kale sida dhawaaca qofka, waxay ka bilaabata maalinti dhibkaasi dhacay, xuquqda xamuulka iyo rarka waxay ka bilaabata maliinta dib loogu soo celiyey hantilaha ama la sugayey in dib loogu soo celiyo, xuquuqda deymaha la xiriray heshis ama fulinta howlaha naquudaha ee badbaadinta markabka iyo safarka waxay bilaaban doontaa maalintii deynta la qaatay, xuquuqda la xirirta heshiiska shaqaleynta badmaaxyada waxay bilaaban doontaa markii dib loogu celiyo goobtii shaqaalaha laga soo qoray. Intaas wixii ka koreeyay, xuquqda waxay bilaaban doontaa deynta la qaatay.

Awoodda codsi hormaris ama heshisyada kale qiimo kuma leh deymaha ku qoran faqradda 2 ee Qod. 163

Waqtiga dhammaadka xuquqda sare ku taxan waxaa la laalay ilaa iyo markabka dhibaata ku dhacay lala wareego ama rahan ku galo biyaha dalka Somaliya., laalinta waqtiga kor uma dhaafi karo 3 sano ka bilaabato maalintii deynkaasi la qaatay.

Xuquqda markabka waxay dhamman doonaan markii:

a) — kadib markii dekereeto maxkamadeed markabka lagu wareejiyo ciddii gadatay
b) — 60 beri kadib markabku ku suganaado beec istikhyaari ah haddii ay jirto ka noqosho. Muddada waxay ka bilaaban doontaa taarikhda la sugay heshiiska beec, haddii markabku uu ku sugan yahay goobta qorista ama waqtiga uu ku soo noqdo goobtaasi, haddii qoraalka beeca la qoray kadib markabkii uu safar galay.

**Qod. 167**
**Marka maal-geliyaha ku shaqeeysta markabku aan ahayn hantiliha**

Qodobada sare lagu soo xusay waxaa lagu dabaqi doonaa markii markabku uu shaqo u haayey qofka maal-geliyaha ah iyadoo uu hantilihu war u haynin, kadib markii laga reebo in si sharci darro ah lagala wareegay oo haddana cidda deymaha ku sheeganeysana ay og yihiin.

**Qod. 168**
**Xuquuqda lagu yeesho alaabta xamuulka ah**

Xuquuqda lagu yeesho alaabta rarka ah waxaa ka mid ah:

1) — kharajka maxkamadeed ee Maamulka galay ama lagu galay si loo dhowro danaha deyn bixiyaalka, iyo qoraallada fulinta;
2) — Kharajka furdada iyo dejinta xamuulka;
3) — Magdhawga iyo abaalmarinta howlaha taakuleynta iyo samatabixinta;
4) — Deymaha ka soo arooray heshiisyada nooliga, kuwa dejinta, ijaarka baqaarrada oo lagu dejiyey xamuulka;
5) — Deymaha iyo khidmada kor saarmay heshiisyada uu Naqudaha markabka galay sida ku qoran qod. 96.

Deymaha sare ku qoran ayaa mudnaan ka leh kuwa ku yimaada rahanka xamuulka.

Haddii xamuulka ay khasaaro gaarto amaba baaba' noqdo, magdhawga hantida dhuntay oo ay ka mid tahay kharajka caymiska waxaay mudnaan leeyihiin markii laga reebo in magdhawgaasi lo isticmaalo hantida iyo xamuulka khasaaray.

**Qod. 169**
**Kala mudnaanta, qiimeynta iyo dhammadka xuxuqda xamuulka**

Kala mudnaanta magdhowga lagu yeesho xamuulka waxay u kala horeeyaan sida ku qoran qodobka sare ku xusan.

Deymaha ku qoran farqadaha 3 iyo 5 waxay mudnaan doonaan hadba sida ay ku dhasheen iyo taarikhda ay dhasheen.

Deymaha ku qoran lambaradda kale waxay yeelan doonaan kala mudnaan iyadoo loo eegayo qeybaha ay khuseeyaan, taarikhda iyo xaaladaha ay ka dhasheen.
Xuquuqda xamuulka la dejiyey waxay ku egtahay 15 beri haddii uusan deyn bixiyaha uusan la kulmin muran dhinaca Naaqudaha amase xamuulkasi uusan ku wareegin gacan seddaxaad.

## CINWAANKA 11AAD
Rahmidda

### Qod. 170
### Fursadda, qaabka iyo shaacinta

Markabka waxaa la kor dhigi karaa oo keliya rahmid ikhtiyaari ah.

Haddii aysan jirin heshiis ka duwan xamulka kama mid noqon karo rahmidda.

Fursamadda rahmidda wuxuu noqonayaa mid wax kama jiraan ah haddii aana lagu qorin qoraal sharci ah ama qoraal gaar oo koobeysa tilmaamaha markabka.

Rahamidda markabka qiima u yeelan meeyso cid seddaxaad haddii aanan la shaacinin sida ku cad qodobbada 76 iyo 77.

### Qod. 171
### Isku bedelka magdhowga ka dhashay markabka

Haddii markabku uu xumaado ama qayirmo waxaa ku xiran deymaha rahanka kadib markii laga reebo kharajka dib u habeynta markabka:

a) — magdhawga hantiilaha markabka ee dhibka soo gaaray markabka;
b) — magdhaw hantiilaha markabka ee kharjaka ku baxay markabka xamulkiisa;
c) — magdhawga hantilaha markabka ee kharajka taakuleynta ama samatabixinta, kharajkaasi oo la galay kadib markii la galay heshiiska rahmidda markabka, kharjakaasi oo aanan dib loogu celin hantiilaha qaadan intaa aanan la xaraashin markabka laftisa;
d) — Kharajka caymiska.

### Qod. 172
### Kala mudnaanta rahanka iyo baahista qorallada

Heshiiska rahmiddu wuxuu hirgalayaa xillaga la diiwaangeliyo
Rahanku wuxuu hirgalayaa kaddib mudnaanta ku qoran qod. 163, waxxana laga doorbidayaa mudnaan kale kasta ee guud ama gaarka ah.

Qoraalka rahanku wuxuu ka mid dhigaaya qoraalka asaaska rahmidda, kuwa dib u cusboneysiinta iyo kuwa caadi ah ee fulinta.

Heshiiska rahmidda ee caddeeya in ay macaash jiro wuxuu qiimaha la saartay lagu caddeyo qoraalkaasi.

Macaasha la saartay heshiiska rahamka wuxuu ku eg yahay sanadkii la soo dhaafay iyo maalintii markabku galay rahan.Laakin dhinacyadu waxay ku heshiin karaan in la baahiyo macaashka ilaa sanad kale

**Qod. 173**

**Xaqdhaca**

Xuquuqda ka soo aroorata helitaanka rahanka waxaay ku eg tahay 2 sano kadib markii wajiibkaasi dhamaado.

**Qaybta 4aad**

Qodobbada habraaca madaniga

**CINWAANKA 1AAD**

Baarista iyo asbaaabta shilalka badda

**Qod. 174**

**Baarista kooban**

Hey'adaha lagu tilmaamay Qod. 27, kadib markii ay dhammadaan howlaha samatabixinta waa in ay ku dhaqaaqda baaris kooban ee la xirira asbaabaha iyo marxaladaha shilka dhacay iyo tilaabooyinka loogaga hortagaayo in ay dhumaan aaladaha anfici kara baaritaanno muddada fog.

Haddii shilka dhacay uu sababay markab leh calan ajnabi wato, hey'adaha sare ku xusan waxay tilaabo qaadi karaan keliya markii shilkaasi ay maraakib Somali wax noqdeen ama shilkaas awgiis ay mamulka dhibaato soo gaartay.

Waxaa muhim ah in lagu qoro diiwan arrimaha la xiriira baarista iyo tilaaboyinka la qaaday si loo xafido caddeymahasi.

**Qod. 175**

**Warbixinta hey'adda sharciga**

Warbixinta iyo baarista la xirira farqada c) ee Qod. 51 oo la gaarsiyey Madaxa qeybta, haddii la ogaado in asbaabaha sababay in markabku qalibmo, ama la dayaco, geerida iyo dhaawaca dadka gaaray ay sabab u ahaayeen musuqmaasuq ama dembi cid kale geysatay, waxaa xogta baarista oo dhameeystiran uu madaxa qeybta u gudbin doonaa Hey'adda sharciga ee qaabilsan.

**Qod. 176**

**Isku dayidda in heshiis laga gaaro shilalka maraakibta**

Haddii ay dhacdo arrimaha hoos ku qoran:

a) — dhibaatoyin ay sababeen shil markabeed;
b) — dhibaatoyiin ka dhashay maraakib ku jira howlaha baroosindhigashada iyo joojinta markabka ama dhaqdhaqaaq kasto ee furdada iyo meelaha lagu soo xiro maraakiibta;
c) — Dhibaatoyinka ka dhashay isticmaalka qalabka dejinta iyo raridda xamuulka guud ahaan oo ay ka mid tahay ku wareejinta xamulka markab kale;
d) — Dhibaatoyinka loo geysto shabaqyada iyo qalabka kallumeysiga;
e) — Magdhawga iyo gunnoyinka taakuleynta iyo samatabixinta;

f) — Dib ugu soo celinta kharajka iyo abaalmarinta helista xamuulka.

Dhinacyadu intii aysan sharciga la aadin waa in ay codsadaan in Madaxa furdada uu soo dhexgalo si loo gaaro heshiis nabadeed.

Haddii heshiis la gaaro waa in lagu qoraa qoraal rasmi ah oo ay dadka khuseeya ay saxiixaan, kaas oo yeelan doono awood fulineed.

Haddii heshiis la gaari waayo waa in qoraal rasmi ah oo ay ku lifaaqan yihiin qoraallada la xirira iyo baarisyada iyo caddeymaha la suubiyey lagana saxiixa ciddii ay khuseeyso.

**Qod. 177**
**Qiimaha ku meel gaarka ah ee caddeymaha kooban ee khuseeya shilaalka badda iyo xamuulka**

Hey'adda sharciga ah markii ay go'aamineyso shilalka badda waxay go'aankeedu ku saleyn doontaa qoraallada la horkeenay ee la xirira baarisyada kooban iyo qoralka in heshiis la gaari waayey.

Hey'addu markii ay ka talineyso qeybinta khasaaraha guud ee ku tilmaaman qod.143 waxay ku saleyn doontaa go'aannadeeda qoraallada baarista ee ku xusan farqada c) ee qod. 51.

Arrimaha lagu caddeyey qoraallada baarista waxaa loo qaadan doona kuwa rasmi ah markii laga reebo caddeynta ka soo horjeedi karta ee qofkii mudac ku ah barista.

**CINWAANKA 2AAD**
Muraanka ka dhasha shaqada

**Qod. 178**
**Isku dayidda xalinta khilafaadka**

Khilafaadka la xiriira:

a) wada shaqeynta shaqaalaha badmaaxa ah, xataa haddii khilaafku khuseeyo arrimo qoyska ah ama dad xuquud ku sheeganaya;
b) fulinta howlaha furdada iyo magdhowga la xirira;
c) Kharajka ay yeeshaan dadka iska leh qalabka iyo aaladaha loo isticmalayo rarista iyo dejinta xamuulka iyo dadka . Dhinacyadu intii aysan u dacwoon Hey'adaha Sharciga waa in ay raadiyaan in si nabad ah lagu xaliyo khilaafka iyadoo madaxa furdada gacan ka heli doonan.

**CINWANKA 3AAD**
Fulinta la xoojiyey iyo amarrada digniinta

**Qod. 179**
**Sheyga lagu fulin karo kala wareegid iyo amarrada digniinta**

Waxaa lagu fulin karaa kala wareegid ama amarrada digniinta maraakiibta, doomaha, iyo qalabka sabeeya ama qeyb ka mid ah.

Haddii sheyga si xoogga leh loola wareegay iyo amarrada digniinta la kor dhigay, xaakimka qaabilsan, kadib markii uu dhegeystay hantileyaasha aan deyn ku leheen, wuxuu amri karaa in la rahmo ama lala wareego markabka haddii qeybta hantilaha deynka ku leh uu xoolihiisa ay ka badan tahay kala bar; taas oo ku kalifaysa hantileeyaasha aan deyn lehayn in qeybtooda lagu beddelo qiimaha la xukumi doono waxaana ka reeban in laga jaro kharajka fulinta maxkamadda.

Fulinta la wareegidda ama amarrada digniinta laguma dabaqi karo maraakiibta iyo doomaha u diyaar garoobay in ay safraan amaba ku dhex jiro safar haddii aysan ahayn deyn la xirirta safarkaasi. Waxaa lagu qiyaasayaa in markab ama doon ay diyaar u tahay safar sida ku cad qod. 52.

**Qod. 180**
**Habraac**

Fulinta la xoojiyey iyo amarrada digniintu waa kuwa toos ah, waxaana awood u leh maxkamadda qaabilsan, oo tixraacaysa habka asali ah ee hantida maguurtada ah iyo qodobbada kale ee la xiriira.

**Qod. 181**
**Amar**

Amarka la doonayey in la fuliyo oo loo qoondeyey 24 sac wuxuu noqonayaa mid aan qiimo leheyn kadib markii ay 30 beri ka soo wareegatay iyadoo aan lagu dhaqaaqin rahan.

**Qod. 182**
**Dulucda iyo ogeysiinta rahmidda iyo amarka xaraashka**

Qoraalka rahmidda iyo amarka fulinta xaraashka sharciyeed ama xafidaadda waa in lagu caddeeya tilmaamaha guud ee markabka iyo amarka la kor dhigay .Naqudaha in uusan dhaqaajinin markaabkaas.

Amarradaasi waa in la gaarsiiya cidda deymaha ku leh, hantiilaha iyo Naquudaha markabka.

**Qod. 183**
**Kala wareegidda hantilaha oo aanan ahayn maal-geliyaha**

Haddii cidda deyn ku leh maal-geliyaha oo aanan ahayn hantilaha markabka oo haysata xuquqaha fulinta, amarka fulinta in loo dhaqaaqo kala wareegid sharci ama xafidaadda waa in la gaarsiyaa hantilaha aanan maalgelin.

Haddii laakiin amarka rahmidda ama guud ahaan amarrada kala wareegidu lagu fulinayo hantilaha aanan maalgelin, kaas oo lagu dabaqi doono amarrada la xirira cidda deyn qabto, taas waxaa ka reeban in markabku aan beec la gelinin.

**Qod. 184**
**Ogeysiinta xafiiska diwaanka iyo tallaabada lagu hor-istaago markabka in uu safar galo**

Ciddii deyn ku leh waxay soo gaarsineysa xafiiska laga diwaan geliyey amarka rahanka iyo amarka in lagu dhaqaaqay kala wareegidda markabkas.

Maxkamadda qaabilsan iyo hey'adda badda kadib amarradas soo gaaran waa in ay qaadan tillaaboyinka joojinta in markabku uu dhoofo.

**Qod. 185**
**Maamulidda markabka la xaraashay**
**oo lala wareegay**

Kadib markii ay Maxkamaddu tixgelisay danaha ciddii hor u maris lacageed dhiibtay, markii ay dhageysatay deymaha rahmidda, iyo sida lagu xafidi karo, ballanqadyada iyo digniinta loo baahan yahay, waxay
maxkamaddu amri kartaa in markabka la rahmay loo oggolaado in hal iyo in ka badan uu safar galo.

Wixii lagu kireeyey kadib marki laga bixiyo kharajka , iyadoo la dhowrayo lacagaha dammaanadda ah, waxaa lagu kordhin doonaa qiimaha la xukmi doono.

**Qod. 186**
**Xayeysiinta kala wareejinta**
**markab la xukmiyey**

Dekereetada uu Xaakinku ku amray gadidda iyo kala warejiinta markabka waxaa la socota amarka in xafiiska diiwaan gelinta uu tirtiro qoraallada rahamka kadib lagu xayeysiiyo sida ku qoran qod. 76.

**Qaybta 5aad**
Dembiyada badda

**CINWAAKA 1AAD**
Dembiyada lid ku ah booliska markabka saran iyo naqudeeynta

**Qod. 187**
**Ku xadgudubka nidaamka shaqaalaha markabka**

Shaqaalaha markabka oo diida in uu fuliyo amarka sarkaal ka sareeya ee la xirira shaqadiisa farsamo waxaa uu muteysan doonaa ciqaab xarig ilaa iyo 3 bilood.
Haddii farsamada ay la xirirta mid xarako teknika ah, wuxuu muteysan doonaa ciqaabto xarig u dhexeeya 1 ilaa 6 bilood.

Haddii diidmada fulinta amarkaasi ay ka dhalatay dhibaato adeega naqudeynta ama sababtay qatar nafeed ee rayidka ama amaanka markabka, ciqaabtu waa 4 bilood ilaa 2 sano oo xarig ah.

Haddii diidmada amar samatabixin markabka ama badbaadinta markab kale ama dad qatar ku suggan, ciqaabtu waa xarig 1 sano ilaa iyo 3 sano.

**Qod. 188**
**Fulin la'aanta amar ee qof rakaab ah**

Qofkii rakaab ah ee diido in uu fuliyo amar la xirira ammaanka markabka waxaa uu muteysan doonaa xarig 3 bilood ama ganax dhan 160 sh. So.

**Qod. 189**
**Dayicid naaquudaha iyo shaqaalaha badmaaxa ahi ee markab qatar ku jira**

Naaqudaha anan noqonin qofka ugu dambeeya ee kasoo dega markab qatarta ku jira wuxuu muteysan doona xarig ilaa iyo 2 sano.

Shaqaalaha badmaaxa ah oo ka carara markabka qatar ku jira isagoo amar aan ka helin Naquudaha wuxuu museysanaya xarig ilaa iyo hal sano.

**Qod. 190**
**Raridda hub, rasaas iyo dad**
**si sharci darro ah**

Naaqudaha markab oo wata xataa calan ajnabi oo soo raro hub ama rasaas ama dad si loo fuliyo fal dembi ah, haddii uusan fal dembigaas weli la fulin wuxuu muteysanayaa xarig 6 bilood ilaa 2sano, markii la baaro in dembigu uu salka ku haynin dambi kaas ka weyn.

Shaqalaha badmaax oo marqaati ka noqda falalka handidaadda ama shaqaaqo lid ku ahaa madaxda markabka oo gudanayey howlahooda, oo ka gaabsado in u fidiyo cawimaad wuxuu muteysan doonaa ciqaab xarig ah ilaa 1 sano iyo ganax 400 shilin Somali ah.

Ciqaabtaas oo kale waxaa muteysan doona shaqaalaha ka tirsan badmaax oo marqaati ka noqday amardiiddada ku xusan qodobka sare, oo aanan isticmaalin awooddisa si uu u kala diro shirarka iyo kacdoonka.

**CINWAANKA 2AAD**

Fal dembiyeed lid ku ah madaxa markabka ama hey'adaha Qunsuliyadaha

**Qod. 191**

**Dembiyo lid ku ah Naquudaha iyo saraakisha kale ee markabka**

Xubnaha shaqaalaha badmaaxa ka tirsan oo meel ugaga dhaco sharafta iyo qiimaha sarkaal kale ee ka sarreeya intii howlaha shaqada la gudanayo wuxuu muteysan doonaa xarig 3 bilood ilaa 2 sano.

Isla ciqaabtaas waxaa muteysan doona ciddii adeegsato qoraal telegraafka ama telefoonka ama sawirka gacmeed oo meel uga dhacaya Naqudaha ama sarkaal kale ee ka sareeya.

Ciqaabtaasi waxa 3da mar jibaar noqoneysa haddii fal dembiyeedku watay rabshado iyo cabsi gelin ama iyadoo dad kale ay joogaan.

Haddii fal dembiyeedka lidka ku ah Naqudaha, sarkaal ama sarkaal xigeen u geesto qof ka tirsan rakaabka, dembigaas oo aan ka cusleyn kuwa sare ku xusan waxaa lagu dabaqi doonaa ciqaab sare ku qoran, iyadoo laga dhimi doono ugu badnaan 3 u dhig qeyb ka mid ah

**Qod. 192**

**Amardiiddo**

Haddii ay dhacdo in tira aan ka yaareen 3 u dhig shaqaalaha badmaadxa ay kacdoon suubiyaan waxay muteeysan doonan xarig 3 bilood ilaa 2 sano.

1) — haddii si wadajir ah ama ay ku heshiiyaan in ay ka hor yimaadaan amar ka soo baxay Naquudaha
2) — in ay ku dhaqaaqaan kacdoon

Haddii shaqaalaha badmaxaa qaarkood ay joojiyaan amardiidda, iyadoo weli aysan fal dembiyeed kale gelin ciqaabtu waa 4 ilaa 6 bilodoo xarig:

1) — haddii amardiiddada ay sabab u tahay marxalad ay la kulmi waayaan ciddanka dalka
2) — haddii amardiidadu ay khuseeyso amar la xiriira ammaanka socdaalka markabka ama falkaasi loola jeeday in la carqaladeeyo jahada socdaalka ama qatar la geliyo ammaanka markabka iyo xamuulka.
3) — Haddii qaar ka mid kuwa amardiidada ku dhaqaaqay ay hubeysanaayeen ama ay isticmaaleen cabsi gelin, kuwii madax ama qabanqaabiyey falka amardiiddada ah waxaa loo kordhi doonaa ciqaabta ilaa iyo 3 dalool hal dalool.

**Qod. 193**
**Ka hortegid la'aan fal dembiyeed**

Shaqalaha badmaax oo marqaati ka noqda falalka handidaadda ama shaqaaqo lid ku ahaa madaxda markabka oo gudanayey howlahooda, oo ka gaabsado in u fidiyo cawimaad wuxuu muteysan doonaa ciqaab xarig ah ilaa 1 sano iyo ganax 400 shilin Somali ah.

Ciqaabtaas oo kale waxaa muteysan doona shaqaalaha ka tirsan badmaax oo marqaati ka noqday amardiiddada ku xusan qodobka sare, oo aanan isticmaalin awooddisa si uu u kala diro shirarka iyo kacdoonka.

**Qod. 194**
**Shirqool lid ku ah naquudaha**

In ka badan 3 xubnood ee ka tirsan shaqaalaha badmaaxa oo ku heshiiya shirqool lid ku ah naquudaha markabka si waxyeelo loo gaarsiyo naftiisa, xoriyaaddisa shaqsiyeed ama awooddiisa shaqo, haddii aysan shirqoolkaasi fulinin waxay muteysan doonaan xarig ilaa 3 sano.

Xubnaha qaban qaabiyey ama horsocday shirqoolkaasi, waxa lagu kordhin doonaa ciqaabtooda ilaa iyo 3 meelood meel.

Xubinta shaqaalahaas ka tirsan oo ka war helay shirqool kaasi oo aanan wargelin naquudaha wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa iyo hal sano.

Ciqaabta markastoo la muteeysan doono waxay ka yaraan doontaa kala bar midda loogu tala galay falka shirqoolka.

**Qod. 195**
**Dal ku laabasho muwadin oo laga gaabiyo**

Naquudaha markab ku sii jeega furdada ama meel lagu soo xirto ee dalka ka tirsan, oo sabab la'aan ka gaabiya in uu fuliyo codsiga hey'adda qunsuliyeed ee dhoofinta dad shicib ah, sida ku qoran faqradda 2aad ee Qod. 57, wuxuu muteysan doono xarig ilaa 6 bilood ama ganaax ilaa iyo 800 shillin Somali.

**CINWAANKA 3AAD**
Fal dembiyeedyada lid ku ah ammaanka markabka

**Qod. 196**
**Fulinta, qaadista amar la'aan iyo fal-gelin la'aanta calamooyinka badmaaxa**

Ciddii si aan sharci ahayn amar ku bixisa ama sameeyso mid ka mid ah calaamoyinka socdaalka loogu tala galay, ama calaamoyinkiis ka qaado wuxuu muteysanayaa xarig ilaa1 sano iyo ganaax 800 shillin Somali ah.

Isla ciqaabtaasi waxaa muteysan doona ciddii, isagoo ay wajib ku tahay uusan fulin in uu rakibo calaamoyinkaas loogu tala galay ammaanka markabka ama aan gudanin wajiibka dhowrista ammaanka socdaalka.

Haddii falkaas ay sabaabaan qatar dab kacay, ama markabka oo caariyo, ama markabka oo quuso, ciqaabtu waxay gaari doontaa 1 sano ilaa 5 sano oo xarig

Qodobkaan laguma dabaqi karo haddii fal dembiyeedku uu ku muteysan karo ciqaab ka weyn shuruuc kale oo xeerkaan ka duwan.

Haddii si kama' ah ay fal dembiyeedyada sare ku xusan lagu galo, ciqaabtooda waxay noqon doontaa kala bar.

**Qod. 197**
**Ka gaabsi fidin gargaar**

Maalgeliyaha ama Naquudaha, kadib codsiga hey'adaha qaabilsan sida ku cad farqad 3aad ee qod. 27, ka gaabsada in uu ka qeyb qaato gargaarka loo fiidiyo markab ku jira qatar ama shil galay, wuxuu muteysan doonaa xarig 1 sano ilaa 3 sano.

**Qod. 198**
**Baxsi xil iyo jago**

Naquudaha ka baxsado sabab la'aan xilkiisa madaxtanimo ee markabka, xilkaaso ay la wareegto cid aanan lahayn kartideeda iyo aqoonta shaqada, wuxuu muteysan doonaa xarig 1 sano ama ganaax 200 ilaa 800 shillin Somali ah.

Ciqaabtu waxay 3 u jibaar ku kordhi doontaa haddii falkaasi baxsiga ah uu dhacay iyadoo Naquudaha laga rabay in uu shaqsi ahaan u guto shaqadaasi.

Xubnaha ka tirsan shaqaalaha badmaaxa ee intii uu gudaanayay shaqadiisa la xiriirta ammanka markabka, oo dayaca shaqadiisa, wuxuu muteysan doonaa xarig 3 bilood ilaa 1 sano.

**Qod. 199**
**Marxaladaha ciqaabaha culus**

Falalka ay carifeen qod. 196 iyo qod.198 ciqaabtoodu waa xarig 2sano ilaa 8 sano haddii falalkaasi ay ka dhashaan dab kacay, markabkana uu qalibmo ama quuso.

**CINWAANKA 4AAD**
Fal dembiyeedka lid ku ah ammanka guud

**Qod. 200**
**Been ku qorista qoraalka socdaalka badda iyo warbixinadda**

Naquudaha markabka oo, si uu u gaaro ahmiyaddiisa gaarka ah ama uu u dhibaateeyo cid kale, been ku qora qoraalka socdaalka oo khuseeya fal isagu uu suubiyey ama uu marqaati ka noqday, ama warbixin la siiyey, ama si kas wax ka beddelay ama ka tegey qoraal soo gaaray.

Qoraalka socdaalka oo loogu tala galay in ay caddeyaan runta, wuxuu muteysan doona haddii falkaasi uusan dhalin dembi ka weyn, xarig 6 bilood ilaa 4 sano oo xarig ah,

**Qod. 201**
**Isticmaal xadgudub ku ah calaanka**

Ciddii surta ama u istimaasha markab ajnabi ah calaanka badda ee ganacsiga Somaliyeed wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 1 sano ama ganax ilaa 200 oo Shillin Somali ah.

**Qod. 202**
**Isticmaalka summad been ah ee aqoonsiga**

Ciddii, iyadoo raadineysa fa'idooyin gaar ah ama doneysa in ay dhibaateyso cid kale, ku dhejisa markab summad been ah ee aqoonsi ah waxaa uu muteysan dooaa xarig ilaa 1 sano.

Ciqaabto xarigga ilaa 2 sano iyo ganax 400 waxaa lagu muteysan doonaa haddii dembiluhu uu isticmaalo dokumentiga markabka summadiisa la isticmaalay.

**Qod. 203**
**Magac amaahidda xadgudbka ah si loo dhiso markab**

Ciddii haysata awoodda dhisidda maraakiibta oo amaahiya magaciisa la xirira howshaasi qof aanan loo amrin, wuxuu muteysan doona ganax 80 ilaa 800 shillin Somali ah.

Isla ciqaabtaas waxaa heli doona ciddii soo ergato magac dad kale.
Haddii dhismaha markabka la bilaabo, ciqaabtu way sii kordhi doontaa ilaa iyo 3 u dhig.

**Qod. 204**
**Istimaalka xadgudbka ah ee buug-yaraha socdaalka**

Ciddii, si ay u gaarto danaheeda gaarka ama u faa'ideyso cid kale, ama dhibaato u gaarsiiso cid kale, isticmaasho buug-yahaya socdaalka qof kale, haddii falkaasi uusan dembi ka weyn sababin wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa iyo 1 sano.

**CINWAANKA 5AAD**
Falalka lid ku ah lahaanshaha markabka iyo xamuulka

**Qod. 205**
**Burcadnimo**

Naquudaha markabka ama shaqalaha saaran markab Somali ah, ama ajanabi ah oo ku dhaqaaqo falal burcadnimo markab Somali ah ama ajnabi ah ama xamuulka, kuwaas oo noqon kara kuwa la socda shaqaaqad lid ku ah dad markabka saaran, wuxuu muteysan doonaa xarig 10 sano ilaa 20 sano.

Xubnaha badmaaxayaalka, ciqaabta waxaa laga yareen doonaa ilaa 3 u dhig, kuwa ajaanabiga ahna ilaa iyo kala bar.

**Qod. 206**
**La wareegidda markabka**

Xubnaha shaqaalaha badmaxa ee la wareega markabka ay saaran yihin waxay muteysanayaan ciqaabaha kala ah:

1) — Haddii falka la wareegiddu loo adeegsadey xoog ama handadaad lid ku ah Naquudaha iyo saraakiisha, ciqaabtu waa 10 ilaa 20 sano oo xarig ah.
2) — Ciqaabtu waa 3 ilaa 10 sano haddii falka la wareegidda lagu gaaray si qayaano ah ama qarsoodi ah. Ciddii horjooge ama madax u ahayd falkaasi ciqaabtu waxaa loo kordhiyey ilaa u dhig. Haddii falku ka yimid qof aan ka tirsaneyn shaqaalaha markabka ciqaabtu waxay ka yaran doonta ila 3 u dhig.

**Qod. 207**
**Jaho qaldan**

Naquudaha si uu u gaaro dan u gaar ah ama dad kale ugu daneynaaya amase doonayo in dhibaato gaarsiyo cid kale oo si kas ah ugu jaheeyo markabka jaho qaldan waxaa u muteysan doonaa xarig 1 sano ilaa 6 sano oo la socda ganaax ilaa 800 oo shillin Somali ah.

Haddii arrintaas keenta fal khatar ah: dab kaca, Markab jaba ama quusa, ciqaabtu waxay ku sii kordhaysaa 3 meelood meel.

Haddii falku uu keeno dabka kaca, jabka ama quusidda markabka, ciqaabtu waxay noqonaysaa xarig 2 sano ilaa 10 sano.

**Qod. 208**
**Bililiqada xamuul Markab jabay**

Ciddii bililiqo u geysata xamuulka markabka, jabay sida ku cad qod. 158, oo laga doonayey in uu wargelin ka keeno waxaa uu muteysan doonaa xarig ilaa 2 sano iyo ganax ilaa 1000 shilin Somali.

**Qod. 209**
**Bililiqada alaabta markab caariyey**

Ciddii bililiqo u geysata markab soo caariyey, ama quusay ama la cidleeyey wuxuu muteysanaa xarig 1 sano ilaa 4 sano iyo ganax 160 ilaa 800 shillin Somali.

**CINWAANKA 6AAD**
Fal dembiyeedyo lid ku ah qofka

**Qod. 210**
**Xadgudub awoodeed**

Naaqudaha markabka oo u geystaa falal uu sharcigu reebay qof shaqaalaha, ama rakaab ah ama qof la xiray ama loogu dhiibay in uu xafido ama gaadid markab u noqdo, haddii falalkiisu aysan noqon kuwa xambarsan dembi ka culus, wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 30

bilood. Sidoo kale ciqaabtani waxay dul saaran tahay ciddii kale oo lagu aaminay qof oo falalkaasina kula kaca.

Ciqaabtu kama yaaran karto 6 bilood haddii fal dembiyedku lahaa ujeeddo shaqsi, ama lid ku ah qof xanuunsan ama qaan gaarin ama waayeel ah ama qof haween ah.

**Qod. 211**
**Si sharci darra ah marka dad uga dejin ama ka tegid**

Naqudaha markab oo si kas ah ku dejiya xubin ka tirsan shaqaalihisa ama rakaab goob uusan garaneynin ama halkaas ugaga soo dhaqaaqa isagoo uu diida in uu dib u soo fuulo markabka, ama ka soo baxsada isagoo soo hormarinaya waqtiga dhoofka wuxuu muteysan doona xarig 6 bilood ilaa 3 sano iyo ganaax u dhexeeya 80 ilaa 200 oo shillin Somali.

**Qod. 212**
**Diidmo caawimaad**

Naaqudaha markabka oo la kulma xubin badmaax dalka dibeddisa oo aysan joogin hey'ad qunsuliyeed ee sabab la'aan ka gaabsado in uu markabka soo saaro ama dib u soo celiyo, wuxuu muteysan doonaa xarig 6 bilood ama ganaax ilaa 200 shillin Somali.

Haddii diidmada caawimaaddu ay khuseyso dad badan ciqaabtu waa laba laab.

Haddii diidmada aawimaddu ay sababto dhawaac shaqsiyeed ama geeri, ciqaabtu waxay u dhexeeysa 1 sano ilaa 6 sano.

**Qod. 213**
**Diidmada caawimaadda markab iyo dad qatar ku jira**

Naaqudaha markab, ama doon ama waxyaalaha sabbeeya, ha ahaato mid dalka laga leeyahay amase ajaanib oo diida in uu fidiyo caawimaad markab kale ama dad qatar ku jira, ama isku dayin in uu samata bixiyo sida ku cad xeerkaan wuxuu muteysan doona xarig ilaa 2 sano.

Ciqaabtu waxay sii kordheysa ilaa inta u dhexeysa 1 iyo 6 sano haddii falka diidmada ay ka dhasheen dhaawac shaqsi; ciqaab 3 ilaa 8 sano ayay noqonaysaa haddii geeri uu falku sababay.

Haddii falka diidmada uu ahaa mid kama' ah ciqaabtiisu waa xarig ilaa 6 bilood, ciqaabaha faqradda kor ku qoran waxay noqon doonaan kala bar haddii ay khuseeyaan xaladaha farqadaas ku qoran.

**Qod. 214**
**Gaajeey siin**

Naaqudaha markabka oo gaajeeysiiya dadka saaran markabka wuxuu muteysan doonaa xarig 1 sano ilaa 6 sano.

Haddii falka gaajeysiintu uu ahaa mid kama` ah, ciqaabtu waa 1 bilood ilaa 1 sano ama ganaax ilaa 500 shillin Somali.

## CINWAANKA 7AAD

Falalka lid ku ah amarrada bedka qaranka ee badda

### Qod. 215
### Degidda xadgudubka ah ee bedka qaranka ee badda

Ciddii degta si sharci la'aan bedka loo xaddiday badda ama u diida isticmaalka bulshada ama dhisma aan ruqsad lahayn ka taaga, haddii falalkiisi aysan wehlin falal dembi oo ka culus wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 6 bilood ama ganaax ilaa iyo 400 shilin Somali.

### Qod. 216
### Soosaaridda ruqsad la'aaned ee macdanta iyo dhagaxyada qaaliga ah

Ciddii kala soo baxda waxyaalo sida ku qoran Qod. 17 ruqsad la'aan wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 2 bilood iyo ganaax ilaa 80 Shillin Somali.

### Qod. 217
### Alaab dhigaal ruqsad laaneed iyo ka qaadis la'anta alaab la dhigay

Waxaa muteysan doono ganax ilaa 400 shillin Somali ciddi:

1) — Alaab ama qalab ku turta goobaha ku qoran Qod. 23 iyadoo ka haysanin ruqsad hey'adda furdada;
2) — Ciddii ka gaabisa fulinta amarka ka qaadista alaabta meshaas la dhigay

## CINWAANKA 8AAD

Falalka lid ku ah amarrada Booliska iyo adegyada furdadaha iyo goobaha maraakibtu ku soo xirtaan

### Qod. 218
### Kallumeysiga, isticmaalka waxyaalaha qarxo iyo dab ku shididda goobaha ka reeban

Ciddii ka kallumeysata goobaha ku qoran Qod. 30 isagoo ka haysanin ruqsad hey'adaha badda wuxuu muteysan doonaa ganaax ilaa 40 shillin Somali.

Ciddii goobaha sare ku xusan, isagoo ka haysanin ruqsad hey'adda badda, ku qarxiya waxyaalaha qarxo, ama daara nalal iyo dab oo carqaladeyn kara adeegga calaamaynta socdaalka badda, wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa iyo 3 bilood ama ganaax 16 shillin Somali.

### Qod. 219
### Xadgubka adeega furdada

Ciddii ruqsad la'aan fulisa adeegyada furdada iyadoo aysan jirin fursadaha ku qoran Qod. 33, wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 1 sano ama iyo ganaax ilaa iyo 800 shillin Somali.

**CINWAANKA 9AAD**

Falalka la xiriira qorista xubnaha badmaaxa

**Qod. 220**

**Qorista iyo shaqo u dhiibisto dad aan weli qaan gaarin**

Maalgeliyaha ama Naaquudaha markab, doon ama waxyaalaha sabbeeya, oo sida ku qoran farqadda 2aad ee Qod. 25, shaqaaleeya qof ka yar da'da 15 sano iyadoo aysan jirin xalaadaha ku carifan Qod. 36, ama u xil saaro shaqooyinka mashiinnada qof ka yar 18 sano, wuxuu muteysan doonaa ganaax 40 ila 400 shillin Somali.

**CINWAANKA 10AAD**

Xadgudubyada ku saabsan axkaamta lahaanshaha markabka

**Qod. 221**

**Dhowrid la'aan ama ku guul dareysi in uu calanka fogeeyo**

Dhowrid la'aanta xukunnada 43 iyo 44 waxa lagu ciqaabayaa lix bilood oo xarig ah ama iyo ganaax gaaraya sideed boqol Sh. So.

**Qod. 222**

**Ku guul dareysiga burburinta markab**

Qofkasta oo sameeya burburinta lagu sheegay qodobka 46 asaga oo aan oggolaasho qoraal maamulka ka heysan waxa lagu ciqaabayaa ganaax afartan ilaa afar boqol Sh.So.

**CINWAANKA 11AAD**

Ganaaxyada ku saabsan xukunnada u gaarka ah Booliska badda

**Qod. 223**

**Ku guul dareysiga xukunnada ku saabsan isticmaalka calanka ama la dhigo calaamado iyo qoraallo markabka dushiisa**

Waxaa lagu ciqaabaa ganaax ama edbin ilaa boqol iyo lixdan Sh. So.

1) — Naakhuudaha aan calanka ka taagin markabka marka lagu wargeliyo.
2) — Milkiilaha ama naakhuudaha markabka ee aan dhowreynin shuruucda u dhigan calaamadaha aqoonsiga markabka.
3) — Naakhuudaha badda ku safra asaga oo aan wadanin waraaqihii markabka.

**Qod. 224**

**Maqnaashaha cusbooneysiinta waraaqaha xadka**

Milkiilaha markab ee aan cusbooneysiineyn waqtigeeda waraaqaha, waxa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa afar boqol Sh. So.

**Qod. 225**
**Dhowrid l'aanta hab maamuuska ka bixidda ama soo gelidda dekadda ama halka lagu dego**

Milkiile markab ama doon Somali ama ajnabi oo waqtiga bixidda ama soo gelidda dekadda ama soo degidda aan dhowrin hab maamuuska hore u yiil, waxa lagu ciqaabayaa haddii uusan falka ka dhalan dembi ka daran ganaax ilaa afar boqol sh. So.

**Qod. 226**
**Diidmo ka qayb qaadasho dib u soo celin**

Qof ka mida shaqaalaha markab oo diido, haddii markabaas dego oo taliyaha ama maamul awood leh ay ka dalbadaan in uu gacan ka gaysto, si loo soo hagaajiyo markabka degay, waxaa lagu ciqaabayaa, haddii uusan falkaas ka dhalan dambi ka daran ganaax ilaa boqol iyo lixdan sh.so.

**Qod. 227**
**Carqaladeynta soo gudbinta cabashooyinka**

Taliyaha sabab cad la'aan diida in shaqaalaha ama rakaabka ay tagaan xeebta si saxana cabashadooda ugu war geliyaan maamulka, waxa lagu ciqaabayaa, haddii uusan falkaas ka dhalan dambi ka daran, ganaax sideed ilaa afar boqol sh.so.

**Qod. 228**
**Aqbalid la'aanta magangelyo**

Taliyaha ka siiya magangelyo waddan ajnabi markabka dushiisa qof, xataa haddii uu yahay muwaaddin Soomaali, oo maamulku u baadigoobaayay dambi uu galay, waxa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa siddeed boqol sh. so.

**CINWAANKA 12AAD**
Ganaaxyada ku saabsan shuruucda bedqabka maritaanka badaha

**Qod. 229**
**Bad ku safrid oggolaansho la'aan**

Milkiilaha isticmaala markab ama doon duqa ama wax sabbaynaya oo aan heysan ogolaasho safar badeed ama uusan u haysan waraaqihii caddeynayey in ay safar ku habboonyihiin, waxa lagu ciqaabayaa xarig ilaa hal sano ah ama iyo ganaax ilaa siddeed boqol sh.so. ah.

Isla ciqaabta waxaa mudanaya kabtanka waxaase hoose loo dhigaa saddex meelood hal meel wax aan ka badneyn ganaaxa.

**Qod. 230**
**Ku guuldaraysiga dhowridda calamadaha digniinta**

Kabtanka wado markab, doon, ama waxkasta oo sabbaynaya Soomaali ama ajnabi oo aan dhowrin digniinaha badaha lagu maro, waxa lagu ciqaabayaa xarig lix bilood ama iyo ganaax afartan ilaa siddeed boqol sh.so. ah.

**Qod. 231**
**Dhowrid la'aanta nadaamka la xiriira habeynta shaqaalaha iyo u magacaabid meelo aan ku habbooneyn xirfadahooda**

Milkiile markab ama taliye aan dhowrin sharciga ku cad qod. 98 ee ku saabsan habeynta shaqaalaha, waxa lagu ciqaabayaa afar iyo labaatan ilaa laba boqol iyo afartan sh. so. ah.

Milkiile markab ama taliye sabab macquul ah la'aanteed u magacaaba markabka dushiisa shaqooyin gaar ah dad aan shuruudihii qabashadooda lahayn, waxa lagu ciqaabayaa, haddii uusan ka dhalan falkaas dembi ka daran, ganaax afartan ilaa afar boqol sh.so. ah.

**CINWAANKA 13AAD**
Ganaaxyada ku saabsan sharciyada booliska caafimaadka badaha

**Qod. 232**
**Indha ka daboolasho axkaamta ka hortag**

Taliyaha aan taxadarka loo baahan yahay qaadan si loo dhowro caafimaadka shaqaalaha iyo rakaabka kale marka loo caddeyo in gegida cudurro ka jiraan, waxa lagu ciqaabayaa xarig ilaa hal sano ah ama iyo ganaax afartan ilaa afar boqol sh. So. ah.

**Qod. 233**
**Si Xadgudub u saarid markabka rakaab jirran**

Raraha ama taliyaha aan maamul awood leh ogolaansho ka heysan ama aan dhowrin taxaddarada uu qoray ee rara ruux cudur khatar ah qaba, ama si kastaba khatar ku ah bedqabka badmaaxda, ama bedqabka dadka markabka saaran ama qof sababo caafimaad maamul awood leh uga reebay in uu safaro, waxa lagu ciqaabayaa xarig ilaa lix bilood ama iyo ganaax afartan ilaa afar boqol sh.so. ah.

**CINWAANKA 14AAD**
Xad gudubka ku saabsan kalluumeysiga

**Qod. 234**
**Qaabka xun ee kalluumeysiga**

Qofkastoo aan haysanin oggolaasho ama ruqsadda lagu sheegay qod.67:

1) — oo dabta kalluun badan waxa lagu ciqaabayaa siddeetan ilaa siddeed boqol sh.so.ah
2) — oo xannaaneeya kallun ama xayawaan badeed kale waxa lagu ciqaabaa soddon ilaa siddeetan sh. So. ah.
3) — oo dabta kallun yar yar waxa lagu ciqaabayaa soddon ilaaa saddex boqol sh.so. ah.

**Qod. 235**
**Ku kalluumeysi qalab ka reeban**

Qof kasta oo u kalluumaysto habka ku xusan cutubka koowaad ee Qodobka 71, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa saddex bilood ama iyo ganaax ilaa boqol iyo lixdan. sh.so.

Qofkasta oo aruuriya ee gada kalluunka iyo xayawaan biyoodyada lagu soo jillaabtay hababka kor lagu soo sheegay waxaa lagu ciqaabayaa soddon ilaa siddeetan sh. So. ah.

**Qaybta 6aad**
Axkaamta edbinta

**Qod. 236**
**Awoodda edbinta**

Awood edbin waxaa leh:

1) — taliyaha oo u adeegsada shaqaalaha markabka iyo dadka rakaabka ah xataa haddii ay ajaanib yihiin.
2) — madaxda dekadda oo u adeegsada badmaaxyada ama kuwa u gaarka ah khidmadaha badaha iyo dekadaha iyo meelaha lagu dejiyo iyo dadka ku xusan cutubka koowaad ee qodobka 28;
3) — maamulka qunsuliyadda oo u adeegsanaya xubnaha Shaqaalaha markabka.

**Qod. 237**
**Edbinta xadgudubyada**

Badmareennada, kuwa maamulka khidmadaha dekadaha iyo meelaha agu dejiyo agabka, dadka lagu tilmaamay faqrada koowaad qodobka 28, sida xaalku noqon karo, waxaa ku jro xadgudubyo edbin, haddii aan loo ciqaabin sida qodobkaanu qabo.

1) — diidmo ama ka daahid oggolaashaha amarka taliyaha ama madaxda sare;
2) — Dhowrid la'aanta sharciyada nadaamiya fulinta shaqada dekadaha;
3) — Dayacidda shaqada loo igmaday;
4) — ixtiraamid la'aanta madaxda sare;
5) — Ka maqanaansho shaqada idan la'aan;
6) — Ixtiraamid la'aanta maamulka badaha iyo la taliyayaasha;
7) — Qas ka kicin markabka dushiisa, iyo si guud hab dhaqan xumi, sida qasid kala dambeynta shaqaalaha, ama edebta markabka dushiisa, ama si kasta hab aan raali gelineynin nadaamka iyo kala dambeynta iyo edeb ku sugnaanta guud.

**Qod. 238**
**Ciqaabta anshax marinta xubin ka mida shaqaalaha**

Ciqaabta edbinta ee la saaro xubin shaqaalaha ka mida:

1) — Maalin ilaa shan maalmood in uu markabka saarnaado;

2) — In laga joojiyo mushaarkiisa maalin ilaa toban maalmood, ama qyab ka mida waxyaabaha uu helo labo ilaa afar iyo labaatan sh. So. ah.

Ciqaabta ku xusan l.1) waxaa ku shaqa leh taliyaha shaqaalaha, ama maamulaha dekadda ama goobta dejinta iyo maamulka qunsuliyadda .

Ciqaabta ku xusan l.2) waxaa ku shaqa leh taliyaha dekadda ama goobta dejinta.

**Qod. 239**
**Ciqaabaha edbinta shaqaalaha adeegga dekadaha iyo dejinta**

Ciqaabta edbinta ee la saaro shaqaalaha adeegga dekadaha iyo dejinta, waa ka jarid qayb mushaarkooda ka mida labo ilaa afar iyo labaatan sh. so. ah. Waxa saaraya ciqaabta taliyaha dekadda ama dejinta.

**Qod. 240**
**Ciqaabaha la saaro hey'adaha ka shaqeysiiya dekadaha iyo dejinta**

Dadka ku tilmaaman faqrada koowaad ee qodobka 28, ee ciqaabta edbinta waxaa dhici kara in taliyaha dekadda ama dejinta uu ka reebo shaqada dekadda gudaheeda ama dejinta ilaa toban maalmood.

**Qod. 241**
**Gefafka yar yare ee edbinta rakaabka**

Shaqaaluhu waxa ay leeyihiin gefaf edbin marka aysan dembi weyn ahayn sida:

1) — ixtiraam la'aan taliyaha iyo saraakiisha sare ee markabka dul saaran.
2) — la dagaalanka rakaabka kale, ama shaqaalaha;
3) — qalqal gelinta kala dambeynta wanaagsan ee markabka.

**Qod. 242**
**Ciqaabta edbinta rakaabka**

Ciqaabta edbinta rakaabku waa:
1) — canaanasho fudud;canaanasho guud.
2) — Rakaabka markabka waxaa kale oo lagu ciqaabaa in uu dusha sare ee markabka joogin shan sacadood ka badan muddo aan ka badneyn saddex maalmood.

**Qod. 243**
**Awoodda edbinta haddii markabku lumo**

Haddii uu markabku lumo shaqaalaha oo idil waxa ay mudanayaa sharciga edbinta ilaa ay hoos yimaadaan hoggaanka dib u soo helidda markabka lumay.

**Qod. 244**
**Reebidda isku milanka shuruucda edbinta**

Ciqaabaha edbinta looma saari karo wada jir haddii ay is kor fuulaan waxaa lagu fulinayaa tan daran.

## SHURUUCDA KU MEEL GAARKA IYO CIQAABTA

**Qod. 245**
**Siin degaan qaran**

Ogolaanshaha dowladda ee badda iyo xuquuqda kalluumeysiga ee hore loogu hibeeyey; markii uu hirgalo xeerkan waxaa loo aqoonsadaa in uu leeyahay hirgelid buuxda ilaa uu ka idlaado waqtiga dokumiintiga la xiriira dhammaadka.

**Qod. 246**
**Tariifada dekadda**

Tariifada dekadda ee shaqeyneysa marka uu dhaqangalo qodobkaan waxaa loo aqoonsanaa mid ansax ah , sida ay qabaan axkaamta hore u tiilay.

**Qod. 247**
**Canshuur dhaafka loogu diiwaan geliyo badmaaxiinta iyo qandaraasyada shaqaaleynta**

Codsiyada diiwaan gelinta badmaaxnimo iyo qandaraasyada shaqaaleysiinta isku qoridda badmaaxnimada iyo sidoo kale wixii la mida oo dhan iyo qoraallada waa laga dhaafaa canshuur kasta.

**Qod. 248**
**Awood siin, si ku meel gaar najaarro khibrad leh**

Ilaa laga helayo tiro ku filan oo maraakiib dhisayaal ah, dhismaha maraakiibta looxa ah ee aan xamuulkooda guud ka badneyn boqol tan waxaa awooda in ay dhisaan oo la amraa najaarada hadda shaqeeya.

**Qod. 249**
**Si ku meel gaar ah u magacaabid khabiir shaqooyinka laga rabo xafiiska farsamada badda**

Ilaa laga sameynayo hab nadaamiya xafiisla farsamada badda ee ku tilmaaman qodobka 49, howlaha la xiriira ee lagu meeleeyey qodobkaan wixii ku saabsan maraakiibta wasiirka arrimaha dhaqaalaha ayaa soo magacaabi khabiir.

**Qod. 250**
**Ansaxnimada heshiisyada shaqaaleysiinta**

Heshiisyada dhexe ee la galo ilaa taariikhda qodobkaanu galo adeegsi waxaa loo aqoonsanayaa mid shaqeynaya si buuxda, ilaa waqtiga ugu dambeeya ee lagu qeexay xeerar la xiriira.

**Qod. 251**
**Mudnaanta**

Waxa la dhowrayaa xukkunnada qaanuun ee ku saabsan xuquuqda deymiyeyaasha mudnaanta leh, sida ay u kala mudnaan leeyihiin iyo firfircoonida kuwaan marka loo fiiriyiyo rahanta iyo xuquuqaha runta ah ee kale, waxa kale oo la eegayaa mudnaanta ka horreysay inta aan qodobkanu hirgelin.

**Qod. 252**
**Xeerarka la laalay**

Marka qodobkaan uu howlgalo waxa la laalaa dhammaan xeer kasta oo ku saabsan massaa'isha qodobkan xukumayo ama ka hor imaanayo ama aan la socon Karin.